
“Jidkii Hanuunka“ Qisooyinkii ay Ku soo Islaameen Shakhsiyaad Adduunka Caan ka Ah Waa Buug uu Qoray Qoraa Aaden Daahir Cabdilaahi (Aaden Cade) Si Taxane ah Kala Soco Shabakadda.

Written by: Oday
Published: June 26, 2014

“Jidkii Hanuunka“ Qisooyinkii ay Ku soo Islaameen Shakhsiyaad Adduunka Caan ka Ah Waa Buug uu Qoray Qoraa Aaden Daahir Cabdilaahi (Aaden Cade) Si Taxane ah Kala Soco Shabakadda.



MaroodiJeex 24 June 2014 Buugan Jidka Hanuunka ee uu Qoray **Qoraa Aaden Daahir CabdiLaahi (Aaden Cade)** Ayaa Qoraagu Ku Soo Koobay Qisooyinkii Ay Ku soo Islaameen Shakhsiyaad Adduuka Caan ka ah .

Buuga ayaa ka Kooban 226 Bogg oo Qoraagu u Qeybiyey Tusmadda Buuga , Hibayn, Mahadnaq , Odhaahda Buuga Laga Yidhi, GoGol Dhig Iyo Iyo Cutubyada Buugu Ka Kooban Yahay..

Buuga ayaa Haatan Qoraagu Daabacay Si Aad Macluumaad Dheeraad ah uga Hesho La Xidhiidh Qoraaga oo Telefankiisa Gacantu yahay **63 44 15 022 .**

© Xuquuqda Daabacaada Iyo Qoraalku Waxay Gaar u Tahay Qoraaga Buuga.

Hibayn

Buugan waxa aan u hibeeyay:

Qof kasta oo Muslim ah islamarkaana jecel in ay diinta islaamku fiddo …

Dhammaan dadka ku hadla afka soomaaliga jecelna in ay wax ka ogaadaan korreynta islaamka iyo kordhidda tirada muslimiinta aduunka …

Qof kasta oo jecel in uu fidiyo diinta islaamka una bandhigo dadyawga aan muslimiinta ahayn …

Qof kasta oo raba in uu dacwadda gaadhsiiyo amma dood la galo dadyawga aan muslimka ahayn …

Qof kasta oo raba inuu wax ka ogaado dadyawga caanka ah ee soo islaamay iyo waxyaabaha ku dhiirigaliyay in ay islaamaan …

Qof kasta oo jecel In uu akhristo sheekooyinka iyo qisaska faa'iidada leh islamarkaana ku cibro-qaadashada mudan …

Mahad-naq

Marka koowaad waxaan u mahad-naqayaa ilaahay SW, I waafajiyay inaan buugan qoro islamarkaana ii fududeeyay dhamaystirkiisa iyo daabiciddiisaba …

Marka labaad waxaan u mahadnaqayaa cid kasta oo si toos ah iyo si dadban intaba iigala qayb-qaadatay hawsha buuggan …

Waxa aan si gaar ah ugu mahad-naqayaa

¨ Cabdisalaam Ismaaciil Nuur – madaxa suuq-gaynta iyo xidhiidhka guud ee shirkadda telesom.

¨ Sheekh Khadar C/laahi Badeed – madaxa qaybta maal-gashiga ee shirkadda telesom.

¨ Sheekh Siciid C/laahi Siciid – maamulka xafiiska hargeisa ee jaamacadda Islamic Online University.

- Sheekh Khaalid Maxamed Yuusuf – khadiibka masjidka Anas Bin-Maalik ee degmada M.Mooge.

- Faysal Jaamac Geelle – sarkaal katirsan wasaaradda Qorshaynta Qaranka.

Waxa kale oo mahad-naq mudan dad kale oo aanan hadda magacyadooda halkan ku wada xusi Karin oo talo, taageero iyo tilmaamid intaba ila garab taagnaa.

"Qoraagu waxa uu baadhitaan qoto-dheer ku sameeyay Taariikh hore loogu baahnaa in wax laga qoro, taariikhda Buuggan ku qorani waxa ay muujiynaysaa baadhis baaxad leh

Odhaahihii buugga laga yidhi

"oo uu qoraagu muddo dheer ku hawllanaa. taariikhdan waxa ka faaidaysan doona dad badan oo dhuuxi doona sida iyo qaabka ay ku soo muslimeen dad adduunka caan ka ahi. Markii aan isha mariyay dhawr cutub oo buuggani ka hadlayo, waxaan ku arkay taariikho mucjiso ah. ugu dambayntii waxaan ku hambalyaynayaa baadhista iyo aqoonta uu qoraagu ku soo bandhigay buuggan".

Cali Cabdi Coomay

Qoraa Saxafi ah

"Buuggan uu qoray walaalkeen Aadan Daahir C/laahi waa buug mudan in la akhriyo waayo waxa ku jira faa'iidooyin badan, waxa uu u faa'iidaynayaa dhamaan ummadda. Waxa kale oo uu cibro u yahay muslinka xaqii garab maray ee macaasida dabbaashay, kadib marka uu akhriyo dadkan xaqa baadigoobka u galay ee ku guulaystay ka dibna islaamay.Waa buug ku qoran afkeennii hooyo oo si fudud loo akhrisan karo, waxaan qoraaga ku dhiiri galin lahaa inuu qoraalka sii wado".

Sheekh Aabi Cali Maxamed

Guddoomiye Ku-xigeenka jaamacadda Beder

"Runtii buuggani waxa uu muujinayaa hal-abuurnimo hor leh oo ku soo biirtay saaxadda qoraalka Soomaalida, Waa buug koobay qisas aad u xiiso badan oo muujinaya muuqaalo kala duwan oo daahfuraya sirta ku duugan diinteena suubban. Waan ku hambalyaynayaa qoraaga buuggan sida farshaxanimadu ku dheehan tahay ee uu u soo gudbiyay farriimaha buuggu sido".

Sheekh siciid cabdilaahi siciid

Madaxa jaamacadda Islamic Online University

Gogol-dhig

Horreyso iyo dambaysaba waxa mahad leh Ilaahay, waxa kale oo mahad-naq iga mudan cid kasta oo si toos ah iyo si dad intaba uga qayb-qaadatay buuggan, intaa kadib buugan in aan qoro waxa ay igu dhalatay bilawgii sanadkii 2013-kii, isla waqtigaas ayaan bilaabay qoraalka iyo ururinta qisooyinka buugga ku qoran.

Buuggani ma aha kii koowaad ee aan qoro, waxa ka horreeyay buug kale oo la yidhaa ***WEBIYADA KALGACALKA***, buugga webiyada kalgacalku waa buuggii koowaad ee aan qoro balse ma uu soo bixin, maadaama oo uu buuggan **jidkii hanuunku** ka koobanyahay buugga kale islamarkaana ay fiicantahay in looga faa'idaysto bishan Ramadan waxaan door biday in aan isaga soo hor saaro.

Waxyaabaha igu dhaliyay in aan buuggan qoro waxa kamid ah Kadib markii aan arkay dadkii muslimiinta ahaa, gaar ahaan soomaalidii oo ka gaabisay fidinta diinta islaamka iyo dacwadda, una aragtay in dacwadu tahay arrin khusaysa cid gaar, sida culimada diinta, balse waxa muhiim ah in qof kasta oo muslim ahi ogaado in uu xil ka saaranyahay inta uu diinta ka yaqaano aayad kaliyana ha ahaatee, sababtoo ah nebi Muxammed NNKH waxa laga weriyay xadiis macnihiisu yahay ***"waar dadka diinta iga gaadhsiiya, aayad kaliyana ha ahaatee"***, macnaha xadiisku waxa uu innagu dhiirigalinayaa:

¨ In uu qof waliba dadka gaadhsiiyo wanaagga iyo khayrka inta uu yaqaanno ee karaankiisa ah.

¨ In uu xumaanta iyo sharka la dagaalamo inta awooddiisa ah, islamarkaana dadka uga digo cidhibta iyo cawaaqibka xun ee xumaanta iyo danbigu leeyahay.

¨ In uu dadyawga aan diinta islaamka haysan u bandhigo wanaagga iyo qiimaha islaamka, islamarkaana tuso in uu islaamku yahay nidaamka kaliya ee lagu badbaado laguna horumaro aakhiro iyo adduun labadaba, isaga oo adeegsanaya hadba qorshaha iyo hanaanka la jaanqaadaya ee uu fahmayo qofka uu dacwadda gaadhsiinayaa, sida; in uu u sharraxo diinta islaamka, in uu fahansiiyo in diinta islaamku dhamaystirantahay oo aanay jirin wax ay dhaaftay oo khuseeya adduun iyo aakhiro toona, in uu guddoonsiiyo kutub hadyado ah oo ka hadlaysa islaamka iyo xaqiiqada muslimiinta, in uu kula dhaqmo hab-dhaqan iyo akhlaaq soo jiidata islamarkaana waafaqsan islaamka iwm.

Marka aynu ka nimaadno macnaha ballaadhan ee xadiiskan kor ku xusani tilmaamayo, waxa igu kallifay in aan buuggan qoro, kaddib markii aan arkay dhalinyaro badan oo aqoonyahanno ah islamarkaana la shaqaysa haayadaha caalamiga ah ee gayigeena ku sugan, hay'adahaas waxa kala shaqeeya dad aan muslimiin ahayn una baahan in diinta islaamka loo bandhigo, balse waligood aan hal buug oo ka hadlaya islaamka u hadyadaynin, iskadaa hadyad iyo dacwad ay u bandhigaane, aan waligood isku dayin in ay diintooda fidiyaan amma u hiiliyaan jidkii nebigu NNKH jeexay.

Buuggu waxa uu ka koobanyahay 27 qiso oo ku saabsan dadkii soo islaamay ee caanka ahaa, dadkani waxa ay isugu jiraan rag iyo dumar, aqoonyahan iyo caammo, waxa kamid ah 7 asxaabi oo soo islaamay xilligii uu Nebigu NNKH noolaa, waxa kamid ah kuwo soo islaamay kadib markii ay baadi-goob dheer u galeen xaqa, kuwo ku soo islaamay gacanta culimada islaamka, kuwo ilaahay ku soo hanuuniyay gacanta dad muslimiin ah oo caammo ah islamarkaana aan aqoon badan u lahayn diinta islaamka iyo kuwo kale oo soo islaamay kadib markii ay fahmeen in diintii hore ee ay haysteen ahayd mid aan waafaqsanayn aqoonta iyo xaqiiqada.

Ugu dambayntii buuggani waxa uu dadka u iftiiminayaa sida fudud ee loo soo islaamin karo dad badan oo gaalo ah, sidoo kale waxa uu talo fiican ka bixinayaa su'aalaha ay is-waydiiyaan dadka aan muslimka ahayni, iyo meelaha shakigu kaga jiro ee ay uga giigayaan in ay diinta islaamka soo galaan, sida: xuquuqda dumarka, dhaxalka, xuquuqda

bani’aadamka, cadaaladda, xorriyadda, xukunka, tacaamulka iyo wada-noolaanshaha, iwm, sidaa darteedna uu qofku ka shidaal qaato su’aalahan islamarkaana uu jawaabo wax shaafiya iyo talooyin wax qancin kara ugu diyaarsado in uu dadkan kula doodo.

“Jidkii Hanuunka“ Qisooyinkii ay Ku soo Islaameen Shakhsiyaad Adduunka Caan ka Ah Waa Buug uu Qoray Qoraa Aaden Daahir Cabdilaahi (Aaden Cade) Qaybtii 2aad

SAFARKII DHEERAA IYO SAHANKII XAQA

Taariikhda Aduunka Waxaynu Ku Maqalnaa Qof Taraag Dheer U Galay Siduu Uu U Heli Lahaa Nolol Ka Fiican Tan Uu Haysto, Waxaynu Maqalnaa Ruux Hawkar Iyo Haydaare U Maray Siduu Magac Iyo Maamuus U Yeelan Lahaa Amma Geed Gaaban Iyo Mid Dheerba U Fuulay Sidii Uu Hanti U Heli Lahaa, Waxa Kale Oo Aynu Maqalnaa Qof Kale Oo Jab Iyo Hoog, Halaag Iyo Halaseba U Maray Siduu Taabka Ugu Dhigi Lahaa Ruux Kale Oo Nolosha La Wadaaga, Waxase Dhegaheena Ku Yar Inay Maqlaan Qof U Tafaxaytay Siduu Ugu Sahan Tagi Lahaa Caqiido Fiican Ama Socdaal Dheer Ugalay Sidii Uu U Heli Lahaa Iimaan Sax Ah, Haddaba Qisadani Waa Mid Ku Saabsan Sahaminta Diin Sax Ah Iyo Raadinta Mabda’ Suuban, Halyeyga Qisadu Waa Wiil Garaad Iyo Gobonimo Iskudarsaday, Waa Wiil Karti, Sdaacadnimo Iyo Raganimo Isugu Biirtay, Isaga Ayaynu U Dhiibi Doonaa Hogaanka Sheekada Islamarkaana Inooga Qisoon Doona, Safarkiisii Dheeraa Iyo Waayihii Uu Kala Kulmay.

“Waxaan Ahaa Wiil Yar Oo Fardo-Fuul Ah Oo Kasoo Jeeda Tuulo La Yidhaa ***Jayaan***, Aabahayna Waxa Uu Ahaa Gudoomiyaha Tuulada, Waxa Uu Kamid Ahaa Gadh-Casta Magaalada Ugu Maalqabeensan, Waxa Kale Oo Uu Ku Jiray Odayaasha Tuulada Ugu Sharafta Badan. Aad Ayuu Aabbahay Ii Jeclaa, Si Aad Ahna Wuu Ii Ilaalin Jiray.

Waxaanu Ahayn Dab-Caabud Waxa Ay Caabudaan Uu Yahay Dabka, Waxaan Shidi Jiray Dabka Aanu Caabudi Jirnay Oo Aniga Shakhsi Ahaan La Ii Xilsaaray, Si Habeen Iyo Maalin Toona Aanu U Damin.

Aabahay Waxa Uu Lahaa Beer Wayn Oo Uu Isagu Daryeeli Jiray, Hasa Ahaatee Maalin Maalmaha Kamid Ah Ayaa Aabahay Cidi Ka Mashquulisay Hawshiisii Islamarkaana Aniga Ayuu I Yidhi Aabbo Orod Oo Maanta Beerta Dayac Tirkeeda Iyo Daryeelkeedaba Ka Adkoow Oo Si Fiican U Ilaali, Waan Maqlay Aabahay Waxaanan U Dhaqaaqay Xagii Beerta, Intii Aan Beerta Kusii Socday Ee Aan Jidka Kusii Jiray Ayaan Kusoo Baxay Kiniisad Ay Niman Kiristaan Ahi Ku Cibaadaystaan, Waxaan Maqlay Codadkoodii Iyagoo Tukanaya Oo Cibaadaysanaya, Dareenkaygii Ayay Soo Jiidatay Cibaadadoodii Iyo Codadkii Aan Maqlayay, Hore Wax Aqoon Ah Umaan Lahayn Dhaqanka Iyo Diinta Kiristanka Iyo Diin Kale Toona Oo Aan Ahayn Taanu Haysanay Ee Ahayd Dab-Caabudnimada Waayo Aabahay Ayaa Aad Ii Ilaalin Jiray Gurigana Igu Xidhay Oo Cid Kaleba Aqoon Badan Umaan Lahayn.

Markaan Si Fiican U Maqlay Nimankii Kiristaanka Ahaa Codkoodii Ayaan Soo Galay Kiniisadii Si Aan U Arko Una Daawado Waxa Ay Samaynayaan, Arkay Oo Si Fiican Uga Bogtay Salaadoodii Iyo Hanaanka Ay U Cibaadaysanayeen Waanan Xiiseeyay Oo La Dhacay Waxaan Is Idhi: Walaahi Diintan Ayaa Ka Khayr Badan Tan Aad Haysataan, Mana Ka Tagin Ilaa Qoraxdii Dhacday, Beertii Iyo Dhankeedii Hadalkeedaba Adaa Sheegayee Uma Dhaqaaqin. Nimankii Waxaan Waydiiyay: Diintan Asalkeeda Iyo Gundhigeedu Waa

Xagee? Waxay Iigu Jawaabeen Dhulka Shaam, Markuu Gabalki Dumay Ee Habeenki Dam Yidhi Ayaan Gurigayagii Ku Noqday, Aabbo Ayaa Ila Kulmay Oo Iga Waraystay Beertii Iyo Xaalkeedii, Ana Waxaan Ugu Jawaabay Aabbo Maanta Waxaan Arkay Dad Ku Tukanaya Kiniisad Dabadeed Waxa Aan La Yaabay Diintooda Iyaga Ayaanan La Joogay Ilaa Intii Qoraxdu Godka Ka Galaysay. Odaygii Argagax Iyo Naxdin Ayuu Ka Qaaday Waxaan Sameeyay Waxaanu Igu Yidhi: Wiilkaygiiyoow Diintaasi Wax Khayr Ah Male Diintaada Iyo Diinta Aabayaashaa Ayaa Ka Khayr Badan, Waxaan Idhi: Maya, Walaahi Diintooda Ayaa Ka Khayr Badan Oo Ka Wanaagsan Teenna, Aabahay Waxa Uu Ka Baqday Inaan Riddoobo Oo Diintaydii Ka Baxo Dabadeed Guriga Ayuu Igu Xidhay Lugtana Wuu Iga Silsiladeeyay.

Markii Aan Noqday Maxbuus Xidhan Oo Aan Bixid Iyo Socod Toona Loo Ogolayn Ayaan Cid U Dirsaday Nimankii Kiristanka Ahaa Anoo Ku Leh*: Marka Aad Aragtaan Ama Ay Idin Soo Maraan Dad Safar Ah Oo Ku Socda Dhulka Shaam Ila Soo Socodsiiya,* Iyadoo Wax Badaniba Aanay Kasoo Wareegin Fariintaydii Ayuu Nimankii Soo Maray Safar U Jihaysan Dhulka Shaam, Wayna Ii Soo Sheegeen, Kolkaas Ayaan Isku Dayay Inaan Xadhigii Iska Furo Oo Aan Baxsado, Qoladaa Safarka Ahna Aan U Raaco Shaam, Waanan Ku Guuleystay Oo Waan Ka Fakaday Waxaanan Raacay Nimankii Safarka Ahaa Anoo Dhuumanaya Oo Is Qarinaya Ilaa Aanu Nabad Qab Ku Gaadhnay Dhulkii Shaam.

Markii Aanu Ku Dagnay Shaam, Ayaan Dadkii Waydiiyay: *Waa Kuma Ninka Ugu Wanaagsan Uguna Fadliga Badan Dadka Diintan Kiristanka Haysta?* Waxay Ii Tilmaameen Nin Sheekha Oo Kiniisad Jooga, Wadaadkii Ayaan U Imid Waxaanan Ku Idhi*: Sheekhoow Waxaan Jeclaaday Diinta Kiristanka, Waxaanan Rabaa Inaan Kula Joogo, Kuu Adeego, Waxna Kaa Barto Islamarkaana Kula Tukado,* Wadaadkii Waa Ii Ogolaaday Dalabkaygii, Waan La Joogay Waanan U Adeegi Jiray, Hase-Ahaatee Muddo Aan Badnayn Ka Dib Ayaan Ogaaday Inuu Wadaadku Yahay Nin Xun Oo Inta Uu Dadka Sadaqada Faro Kuna Waaniyo Inay Sadaqada Bixiyaan Ayaa Marka Ay U Keenaan Ee Ku Yidhaahdaan Wadaadoow Waa Taa Sadaqadiye Masaakiinta Iyo Dadka Baahan Sii Ayuu Cidna Ma Siiyee Isagu Kaydsadaa Oo Waxaabu Ka Buuxsaday Sadaqadii Dadku Keeni Jiray Toddoba Kiish Oo Waawayn.

Wadaadkii Aad Ayaan Uga Cadhooday, Waxaanan Ku Nacay Khiyaamada Uu Samaynayay Isagoo Wadaad Ah Oo Dadku Aamineen, Waase Amar Allee Maalmo Ka Dib Ayay Tii Alle U Timid Oo Uu Geeriyooday, Dabadeedna Dadkii Ayaa Isug Yimid Aaskiisii, Markaasaan Dadkii La Hadlay Oo Ku Idhi: *Ninkani Nin Xun Ayuu Ahaa, Waxa Uu Idin Fari Jiray Sadaqada Laakiin Marka Aad U Keentaan Sadaqada Isaga Ayaa Kaydsan Jiray Masaakiin Iyo Dan Yar Toona Muu Siin Jirin.* Dadkii Ayaa Yaabay Ina Waydiiyay Sidee Ayaad Ku Ogaatay Adigu? Waxaan Idhi: Anaa Idin Tusaya Kaydkiisii, Nasoo Tus Ayaa La I Yidhi, Waan Soo Tusay Meeshii Uu Kaydka Dhigan Jiray, Waxaanay Kasoo Saareen Toddoba Kiish Oo Dahab Iyo Dheemman Ka Buuxdo, Markay I Rumaysteen Ee Ay Xaqiiqadii Ogaadeen Ayay Yidhaahdeen Walaahi Maba Aasayno Oo Inta Ay Daldaleen Maydkiisii Ayay Dhagxaan La Dhaceen.

Muddo Yar Kadibba Waxa Ay Booskiisii U Soo Magacaabeen Wadaad Kale, Kii Ayaan La Joogi Jiray, Waligayna Ma Arag Nin Ka Saahidsan, Ka Aakhiro Jecel Kana Cibaado Badan Habeen Iyo Maalinba, Wadaadkan Ayaan Aad U Jeclaaday, Muddo Dheerna Aan La Joogay, Waa Xaq Oo Cidina Ma Huraysee Isna Geeridii Ayaa U Timid, Markaasaan Isagoo Sakaraatkii Ku Jira Waydiiyay: *Sheekhoow Yaad Igula Dardaarmaysaa, Yaad Igula Talinaysaa Inaan Adiga Dabadaa La Joogo?,* Waxa Uu Igu Yidhi: *Wiilkaygiiyow, Ma Garanayo Cid Xaqii Aan Ku Taagnaa Haysata Marka Laga Reebo Nin Jooga Meesha La*

*Yidhaa **Muusil** Oo Hebel Layidhaa, Ninkaasi Diintii Kiristanka Muu Bedelin Manuu Taxriifin Ee Ninkaasaan Kugu Ogahay.*

Geeridiii Wadaadka Ka Dib, Waxaan U Kacay Dhankaas Iyo Muusil, Wadaadkii La Igula Dardaarmay Ayaan U Imid Oo Aan Uga Sheekeeyay Arrintaydii Oo Aan Ku Idhi: Wadaad Hebel Ayaa Igula Dardaarmay Markuu Sii Dhimanayay Inaan Adiga Kuu Imaaddo, Waxaanu Iiga Warramay Inaad Tahay Nin Xaqu Sidiisii U Haya Oo Aan Bedelin, Waxuu Igu Yidhi Waa Saxe Ila Joog, Waanan La Joogay, Waxaanan Ku Arkay Wanaagii La Iigu Sheegay Iyo Samaan Badan, Aduunyadu Waa Laguma Waaraan Geedi Laga Yahay Oo Nina Ku Waari Maayee Wadaadkii Isagana Xaqii Ayaa U Yimid, Isagana Sidii Wadaadkii Hore Oo Kale Ayaan Ku Idhi: *Sheekhoow Waad Aragtaa Oo Amarkii Alle Ayaa Kuu Yimid Anna Warkayga Waad Haysaaye Yaad Igula Dardaarmaysaa?… Yaanad I Faraysaa Inaan Adiga Dabadaa U Tago?.* Waxa Uu Igu Yidhi: *Wiilkaygiiyoow, Ma Garanayo Cid Xaqii Aan Hayay Ku Sugan Marka Laga Reebo Nin Hebel La Yidhaahdo Oo Magaalada **Nasiibiin** Ku Nool Ee Ninkaas Ayaan Kugu Ogay;* Nasiibiintuna Waa Magaalo Ku Taalla Jidka Safaradu Maraan Oo U Dhaxaysa Muusil Iyo Shaam, Waxaanay Ka Fogtay Muusil Lix Maalin Socod. Markii Odaygii Luxudka Lagu Hubsaday, Ee Isaga Iyo Xabaashiisii Loo Kala Tagay, Ayaan U Kicitimay Dhankaa Iyo Nasiibiin Iyo Ninkii Wadaadku Igula Dardaarmay, Nabad-Qab Ku Gaadhay Ninkii Waxaanan U Sheegay Warkaygii Oo Dhan Iyo Dardaarankii Wadaadku Igula Soo Dardaarmayba, Waxaanu Igu Yidhi Waa Saxe Ila Joog, Waanan La Joogay Waxaanan Ku Arkay Khayrkii Iyo Wanaagii Aan Kuwii Hore Ku Arkay Oo Kale, Waase Amar Alloo Naf Waliba Gacanta Ilaahay Ayay Ku Jirtaa Oo Maalinta Uu Doono Ayuu Macaanka Ka Jaraaye Wadaadkiina Waxa U Timid Geeridii, Markaasaan Ku Idhi: *Sheekhoow, Warkayga Waad Haysaaye Yaad Igula Dardaarmi Lahayd?* Waxa Uu Igu Yidhi: *Wiilkaygiiyoow, Walahi Ma Garanayo Cid Xaqii Aanu Ku Taagnayn Ku Taagan Marka Laga Reebo Nin Hebel La Yidhaa Oo Ku Sugan Meesha **Cammuuriyah** La Yidhaa Ee Ninkaa U Tag,* Aaskii Wadaadka Kadib Waxaan U Dhaqaajiyay Xagii Cammuuriya Iyo Ninkii Wadaadku Igula Dardaaramay, Waanan U Imid Warkaygiina Waan Uga Waramay Waxaanu Igu Yidhi: Waa Saxe Ila Joog **(La Soco Waa Wadaadkii Shanaad Marka Lagu Daro Kii Ugu Horreeyay Ee Xumaa)….** Waanan La Joogay In Mudo Ah Waxaanu Ahaa Nin Wanaaga Iyo Khayrka Saaxiibadiisii Hore Kala Mid Ahaa, Hasa-Ahaatee Isagana Ilaahay Waxa Uu Qoray Inuu Iga Horreeyo Oo Malagii Geerida Ayaa Soo Booqday, Intii Uu Sakaraatka Ahaa Ayaan Waydiiyay*: Sheekhoow Warkayga Waa Ogtahaye Yaad Igula Dardaarmaysaa? … Maxaanad I Faraysaa Inaan Sameeyo?.* Waxa Uu Igu Yidhi: *Wiilkaygiiyoow, Wallaahi, Ma Ogi Mana Filayo Inay Jirto Cid Xaqii Aanu Haysanay Haysa Oo Dhulka Guudkiisa Ku Nooliye, Laakiin Waxa Soo Dhawaaday Xilli Uu Dhulka Carbeed Kasoo Bixi Doono Nebi Lagu Soo Diri Doono Diintii Nebi Ibraahiim, Dabadeedna Ka Haajiri Doona Dhulkiisa Una Haajiri Doona Dhul Kale Oo Laba Haarood U Dhexeeya, Dhir-Timireedna Leh, Waxana Nebigaasi Uu Leeyahay Calaamado Iyo Astaamo Aan Qarsoomi Karin, Waxana Kamid Ah Astaamaha Aad Ku Garan-Doonto :*

V *Ninkaasi Hadyadda Waa Uu Cunaa.*

V *Sadaqadana Ma Cuno.*

V *Labadiisa Garab Dhexdoodana Waxa Ku Yaalla Shaambadii Nebiyada. Ee Hadii Aad Dhulkaa Gaadhi Kartid Tag.*

Wadaadkii Dhimay, Anna Waxaan Magaaladii Cammuuriya Sii Joogay Muddo Ilaa Markii Dambe Uu Isoo Maray Safar Ganacsi Oo Ay Lahaayeen Niman Carbeed Oo Qabiilkooda La

Yidhaa Reer Kalib. Waxaann Ku Idhi Nimankii Carbeed: *Hadaad I Gaadhsiisaan Dhulka Carbeed Waxaan Idin Siinayaa Lo'daydaa Iyo Adhigaygaaba,* Waxay Iigu Jawaabeen Waa Sax Waana Aanu Ku Gaadhsiinaynaa, Anna Xoolihii Aan Ku Heshiinay Farta Ayaan Ka Saaray, Waanay I Gaadhsiiyeen Dhulkii Carabta, Hasa-Ahaatee Markii Aanu Gaadhnay Ee Aanu Marayno Togga Qura (Waadi Quraa), Ayay Ballantii Igaga Baxeen Oo Addoon Ahaan Iiga Iibiyeen Nin Yuhuudi Ah, Ninkii Yuhuudiga Ahaa Ayaa I Kaxaystay Isaga Ayaan Anoo Addoon U Ah U Shaqayn Jiray…

Muddo Markii Aan Ushaqaynayay Ninkii Yuhuudiga Ahaa Ayaa Maalin Maalmaha Ka Mid Ah Waxa U Yimid Inaadeerkii, Oo Isna Ahaa Yuhuudda Ilma-Qurayda (Banii-Qurayda) Ah, Kii Ayaanu Iga Iibiyay, Isna Waxa Uu Iila Kicitimay Dhankaa Iyo Magaalada Madiina Oo Markaa Loo Yaqaanay Caana Ku Ahayd Yasrib (*Yathrib)* Oo Uu Daganaa, Isla Markii Aan Madiina Soo Galayba Waxaan Arkay Dhirtii Timirta Ahayd Ee Uu Wadaadkii U Dambeeyay Iigu Sheegay Ee Uu Yidhi Nebi Ayaa Ka Soo Bixi Doona Dhulka Carabta Oo Inta Dhulkiisa Laga Eryo Tagi Doona Dhul Dhir Timireed Badan Leh Oo Ku Yaal Laba Haarood Dhexdood, Astaamihii Uu Iisheegay Oo Dhan Ayaan Arkay Waxaanan Gartay Inuu Yahay Dhulkii Uu Ii Sheegayay, Ninkan Yuhuudiga Ah Muddo Ayaan U Shaqaynayay Oo Aan La Joogay, Xilligaasna Nebigu Nnkh Waxa Uu Joogay Magaalada Maka Oo Tolkii Ayuu Dhambaalka Diineed Gaadhsiinayay, Hasa Ahaatee Wax War Ah Kamaan Maqal Waayo Waxaan Ahaa Addoon Ku Mashquulsan Hadba Hawlaha Loo Egmado Oo Aan Xor U Ahayn Socod Iyo Tasaruf Toona.

Markii Dambe Ayuu Nebigu Nnkh Usoo Hijrooday Madiina. Maalin Maalmaha Ka Mid Ah Anoo Dusha Ka-Saaran Geed Timireed Uu Lahaa Ninka I Adoonsan Jiray Oo Timirta Kasoo Guraya, Ninkii Yuhuudiga Ahaa Ee Aan Addoonka U Ahaana Geedka Laftiisa Hoos Fadhiyo, Ayaa Waxa U Yimid Nin Ay Ilmaadeer Yihiin Waxana Uu Ku Yidhi: *Alle Waxba Kama Reebaankii Reer Qayla (Aws+Khasraj), Waxay Ku Ururs*anyihiin *Ceelkii Quba Waxana La Joogay Nin Maanta Maka Kasoo Galay Oo Sheeganaya Inuu Nebi Yahay.* Islamarkii Aan Warkaa Maqlayba Waxa I Taabtay Wax Aad Xummad Moodo, Aadna Waan U Dawakhay Ilaa Aan Geedkii Kasoo Dhici Gaadhay Dushana Kaga Dhici Gaadhay Ninkii Aan Adoonka U Ahaa Ee Geedka Hoos Fadhiyay, Intaan Si Degdeg Ah Geedkii Uga Soo Dagay, Ayaan Ninkii Waydiiyay: *Maxaad Tidhi?, Warka Iigu Soo Celi.* Markaan Intaa Idhi, Ayuu Ninkii I Addoonsan Jiray Xanaaqay Oo Inta Uu Feedh Igu Daandaamiyay Igu Yidhi: *Maxaa Kaa Galay Adiga Ninka La Sheegayo?! Ku Noqo Shaqadaada.*

Maalintaa Galabnimadeedii Ayaan Qaatay Waxoogaa Timir Ah Oo Aan Ururs*aday,* Waxaanan U Kicitimay Dhankii La Iigu Sheegay Inuu Rasuulkku Kusoo Dagay, Imid Oo Waan Usoo Galay Nebigii Nnkh, Waxaanan Ku Idhi: "*Waxaa Isoo Gaadhay Inaad Tahay Nin Wanaagsan, Waxaanan Ka Warqabaa Inay Kula Socdaan Dad Qariib Ah Oo Baahan, Timirtana Waxaan Rabaa Inaan Sadaqo U Bixiyo, Waxaanan U Arkay Inaad Idinku U Mudantiine Hooya",* Waxaanan U Soo Dhaweeyay Timirtii, Markaasuu Asxaabtii Iyo Raggii La Socday Ku Yidhi *Cuna,* Isagu Se Ma Cunin; Kolkaasaan Naftayda Hoos Ahaan Ugu Idhi Taa Kow Dheh, Anoo Ka Wada Astaantii Koowaad Ee Wadaadkii Kiristanka Ahaa Ii Sheegay Ee Ahayd Inaanu Nebiga Soo Bixi Doonaa Sadaqada Cunin.

Waan Ka Tagay, Waxaanan Soo Ururiyay Timir Kale, Markii Uu Nebigu Nnkh Kasoo Wareegay Quba Ee Uu Madiina Soo Galay, Ayaan Hadana U Imid, Waxaanan Ku Idhi: "*Waan Ku Arkay Oo Sadaqada Ma Cuntide, Iga Gudoon Tani Waa Hadyad Aan Kugu Sharfayo'e",* Markaasuu Inta Uu Wax Ka Cunay, Saaxiibadiina Yidhi Cuna. Marlabaad Ayaan Naftayda Hoos Ugu Idhi: *Tanna Laba Dheh.* Markale Ayaan Ugu Imid Meel La

Yidhaa *Baqiic Al-Qarqad*, Isagoo Fadhiya Oo Laba Go' Ama Laba Maro Oo Waawayn Ku Jeeni Qaaran, Markaasaan Intaan Salaamay, Ka Wareegay Xagiisa Dambe Si Aan U Eego Dhabarkiisa Oo Aan U Hubiyo Astaanta Kaliya Ee Ii Hadhsanayd Astaamihii Wadaadku Iiga Sii Sheegay Nebiga, Oo Ah Shaambadii Nebiyada, Markuu Arkay Anoo Dhabarkiisa Fiirinaya Ayuu I Fahmay, Oo Go'ii Ka Qaaday Dhabarkiisa, Islamarkiiba Waxa Ishaydu Ku Dhacday Shaambadii Nebiyada., Markaas Ayaan Si Dhab Ah U Xaqiiqsaday Inuu Yahay Nebi Ilaahay Soo Diray Kuna Xusnaa Diimihii Hore, Oo Inta Aan Kusoo Booday Dhunkaday Anoo Ooyaya. Rasuulkii Ayaa Inta Uu Yaabay Igu Yidhi: Bal Arrinkaaga Iiga Sheekee?, Waanan Uga Sheekeeyay Jidkii Dheeraa Ee Aan U Soo Maray Hanuunka, Iyo Safarkii Dheeraa Ee Aan Usoo Galay Raadinta Xaqqa, Nebigu Nnkh Waa Uu Ku Farxay Qisadii, Markaasuu Ii Tilmaamay Inaan Uga Sheekeeyo Saaxiibadiis, Iyagana Waan Uga Waramay Sheekadii Oo Dhamaystiran Waanay La Cajabeen, Islamarkaana Aad Ugu Farxeen.

"Jidkii Hanuunka" Qisooyinkii ay Ku soo Islaameen Shakhsiyaad Adduunka Caan ka Ah Waa Buug uu Qoray Qoraa Aaden Daahir Cabdilaahi (Aaden Cade) Qaybtii 3aad

Fashilaadii Dilkii Qorshaysnaa

Haldoorka Qisada Labaad Waa Cumayr Bin-Wahab, Cumayr Waxa Uu Ka Badbaaday Dagaalkii Qadhaadhaa Ee Badar, Waxa Uu Ilaahay Ka Samatabixiyay Halasihii Dagaalka Ee Ay Ku Dhinteen Rag Toddobaatan Nin Gaadhaya Oo Sanam Caabudkii Carbeed Ah, Waxa Uu Nasiib U Yeeshay Inay Dhaafaan Seefihii Xaqa Iyo Warmihii Halyeyadii Hanuunku, Hasa-Ahaatee Waxa Dagaalkaa Lagu Qafaashay Wiilkiisii Uu Jeclaa, Waxana Uu Ka Baqayay Inay Wiilkiisa Ka Jaraan Intii Isaga Laga Jari Lahaa, Waayo Isaga Ayaa Ahaa Nin Aad U Colaadiya Rasuulka Nnkh Iyo Asxaabtiisa.

Dharaar Dharaaraha Kamid Ah, Ayuu Goor Barqo Ahayd U Kacay Dhanka Kacbada Si Uu Ugu Soo Dawaafo Ugana Soo Barakaysto Ilaahyadii Samayska Ahaa Ee Ay Caabudi Jireen, Markuu Soo Galayba Waxay Isku Arkeen Kacbada Nin La Odhan Jiray Safwaan Bin Umaya Oo Ka Mid Ahaa Halyeeyada Iyo Waxgaradka Qureysheed, Waa Uu Salaamay Waxana Uu Ku Yidhi, *Subax Wanaagsan* Oo Ahayd Salaanta Carbeed, Safwaan Ayaa Ugu Halceliyay*: Subax-Wanaagsan Inaadeer, Bal Hadda Yara Fadhiiso Aan Sheekaysanee, Waqtiga Sheekaa Laysku Dhaafiyaaye*. Wada Fadhiiste, Waxana Si Fiican Ay U Qaadaa Dhigeen Dagaal-Xaqeedkii Badar, Raggii Kaga Dhintay, Intii Kaga Dhaawacantay, Cidii Lagaga Qafaashay Iyo Waxii Khasaare Soo Gaadhayba, Waxa Waliba Gaar Ahaan Ay Aad Uga Faalloodeen Raggii Ahaa Hal-Doorka, Halyeyada, Madaxda, Iyo Qoodha Qureysheed Ee Dagaalkaa Ay Muslimiintu Leefsiiyeen Seefta Cadaaladda. Safwaan Oo Adkaysan Kari Waayay Ayaa Inta Uu Isla Kacay Oo Fadhigii Ka Hinqaday Yidhi: Walaahi Raggaa Dabadood Noloshu Dhadhan Ma Yeelanayso, Cumayr Ayaa Markiiba Ugu Jawaabay Wallaahi Waa Runtaa, Hadana Inta Uu Yara Aamusay Yidhi: *Ilaaha Kacbada Leh Ayaan Ku Dhaartee Hadii Aanay*

Jiri Lahayn Dayn La Igu Leeyahay Oo Wax Aan Ku Bixiyana Aanan Haynin, Iyo Caruur Yaryar Oo Aan Ka Baqanayo Inay Iga Dayacmaan Hadii Aan Ka Tago, Intaan Muxamed U Tago Ayaan Dili Lahaa, Hawshiisana Aan Soo Gabogabeyn Lahaa, Dadkana Sharkiisa Kaga Fillaan Lahaa, Waliba Wiilkaygii Ayaa U Xidhan Oo Maxbuus Ahaan Ay U Haystaanoo Tagitaankayga Madiinana Cidi Kama Shakideen.

Safwaan Oo Ka Faaidaysanaya Fursadda, Lana Dhacay Qorshaha Cumayr Iyo Sida Ay Suurogalka U Tahay In Muxamed Looga Takhaluso, Ayaa Yidhi: *Cumeyroow, Wax Alla Waxii Dayn Lagugu Leeyahay Oo Dhan Anaa Bixinaya Inta Ay Doonto Ha Leekaatee, Caruurtaaduna Caruurtayada Ayay Wax La Qabaysaa Oo Anaa Sii Daryeelaya Xoolo Iyo Hanti Ku Filana Waan Hayaa,* Cumayr Oo Isaga Laftiisa Fikradu La Quruxbadnaatay Ayaa Yidhi, Waa Saxe Cidna Ha U Sheegin Arrinteenaa Oo Afkaaga Yay Dhaafin, Safwaana Waa Uu Ka Yeelay Waxaanu Yidhi Cid Aan Labadeenaa Ahayni Ma Ogaanayso Waana Iga Ballan.

Cumayr Ayaa Masaajidkii Ka Baxay Isagoo Dabkii Xiqdiga Iyo Xaasidnimadu Laabtiisa Ka Holcamayo, Diyaarna U Ah Inuu Fuliyo Go'aankaa Dilka Ah, Cid Safarkiisa Ka Shakiyi Kartaana Majirto Oo Waxa La Is Odhanayaa Inankiisii Xidhnaa Ayuu U Tagayaa Oo Usoo Ergaynayaa, Seeftiisii Ayuu Afaystay Markaasuu Waliba Sumeeyay Si Cidda La Taabsiiyaa Aanay Tigaan-Tig Dambe U Dhigin, Neefkiisii Rakuubka Ahaa Ayuu Dalbaday Oo Loo Diyaariyay, Diyaar Garowgaa Qorshaysan Ka Dibna Waxa Uu Afka Saarray Dhankii Madiini Ka Xigtay, Isagoo Shar Iyo Nacayb Fatahsan.

Madiina Soo Gaadh, Hashiisiina Waxa Uu Fadhiisiyay Irridda Hore Ee Masaajidkii Rasuulka Nnkh, Waanu Kasoo Dagay, Isla Markiiba Waxa Arkay Cumar Bin-Khidaab Oo Qaar Kamida Asxaabta La Fadhiya Afaafka Hore Ee Masaajidka Oo Iyaguna Ka Sheekaysanayay Dagaalkii Badar Iyo Sidii Ay U Galeen Madaxdii Baadilka, Tiradii Badnayd Ee Maxaabiista Ahaa Ee Ay Soo Qabqabteen Islamarkaana Hadba Cajalada Dib Ugu Soo Ceshanaya Muuqaaladii Geesinimada Lahaa Iyo Wacdarihii Ay Dagaalkaas Kooxda Xaqqu Ka Muujisay, Cumar Ayaa Markiiba Yidhi: *Eygaasi Waa Nacabkii Ilaahay Iyo Cadowgii Diinta Ee Cumayr Bin-Wahab, Waana Ninkii Dagaalka Soo Kiciyay Ee Gaalada Ku Soo Dhiiri Galiyay, Dagaalka Ka Horna Waxa Uu Ahaa Basaas Macluumaadka Muslimiinta Raadiya, Belaayo Iyo Shar Mooyee Marnaba Wanaag Uma Socdee Kaca Oo Rasuulka Isku Gaashaama Oo Ka Ilaaliya Inuu Wax Gaadhsiiyo.*

Haddana Cumar Intaa Kuma Aaminine Intuu Cararay Oo Rasuulka U Tagay, Ayuu Ku Yidhi: Rasuulkii Allow, Waxa Yimi Cadowgii Alle Ee Cumeyr Bin-Wahab Isagoo Seeftiisii Ku Gaashaaman, Umana Malaynayo Inuu Wax Aan Shar Ahayn Wado, Nebigeena Oo Isku Kalsoon Ogna Inuu Ilaahay Ilaashanayo Ayaa Ugu Jawaabay, Ii Soo Daaya Hasoo Galee. Cumar Bin-Khadaab Oo Nin Adag Ahaa Ayaa Inta Uu Kaladhka Ku Ceejiyay Oo Ku Bakhtiin Gaadhay Usoo Jiiday Dhankii Rasuulka, Rasuulkii Oo Arkay Sida Uu Bakhtiin Gaadhay Ayaa Ku Yidhi Cumar, Sii Daa Cumaroow, Markaasuu Faraha Ka Qaaday, Nebiga Ayaa Hadana Cumar Kusii Yidhi Dib Uga Yara Bax, Haye Rasuulkii Alloow Intuu Yidhi Ayuu Cumar Dib Uga Yara Joogsaday, Rasuulka Ayaa Intuu Cumayr Qaabilay Ku Yidhi, Soo Dhawoow Cumayroow, Kolkaasuu Laba Saddex Tallaabo Hore Usoo Qaaday Isagoo Yaabban Ayuu Nebigii Ku Yidhi: *Subax Wanaagsan* Oo Ah Salaantii Waagii Jaahiliyada La Isku Salaami Jiray, Rasuulkuna Waxa Uu Ugu Jawaabay, Salaantaa Salaam Ka Fiican Ayuu Ilaahay Na Siiyay Waana Salaanta Ehlu – Jannada.

Intaa Kaddib Nebiga Nnkh Iyo Cumayr Bin-Wahab Waxa Dhex Maray Hadalkan:

Nebiga: Cumeyroow Maxaad Usocotay Ee Ku Keenay?!

Cumeyr: Waxaan U Imid Inaad Inankayga Idiin Xidhan Ee Maxbuuska Ah Aad Iisoo Daysaan, Oo Aad Wanaaggaa Ii Samaysaan.

Nebiga: Hadaad Intaa U Socotay Waa Maxay Seeftu?!

Cumeyr: Ilaahay Laba U Kala Jabi Ma Kolbay Dagaalkii Beder Wax Noo Tartay.

Nebiga: Runta Ii Sheeg, Oo Cumeyroow Maxaad U Socotay?!

Cumeyr: Intaas Aan Kuu Sheegay Ayuunbaan U Imid.

Nebiga: Maya, Intaa Umaad Imane, Adiga Iyo Safwaan Bin-Umaya Ayaa Kacbada Wada Fadhiistay, Markaasaa Ka Sheekaysateen Raggii Idinkaga Dhintay Dagaalkii Beder, Markaasaad Adigu Tidhi Hadii Aanay Jiri Lahayn Dayn La Igu Leeyay Oo Aanan Iska Bixin Karayn Iyo Ciyaal Yaryar Oo Iga Dayacmayaa, Waan Bixi Lahaa Oo Muxamed Ayaan Soo Dili Lahaa, Markaasuu Safwaan Kaa Qaabilay Dayntii Iyo Caruurtiiba Si Aad Iisoo Disho, Laakiin Ilaahay Ayaa Inakala Xijaabay.

Cumeyr Ayaa Argagaxay, Illayn Sirtan Isaga Iyo Safwaan Oo Kaliya Ayaa Ogaa, Muddona Kama Soo Wareegin, Cid Nebiga War U Keeni Kartaana Ma Jiri Karaynin, Islamarkiina Islaamay Oo Yidhi: Rasuulkii Allow Waxaanu Beenin Jirnay Oo Aanu Been U Haysanay Waxyiga Ilaahay Noogu Soo Kaa Dhiibay, Laakin Arrintan Aniga Iyo Safwaan Oo Kaliya Ayaa Ogayn, Ilaahaybaan Ku Dhaartee Ilaahay Ayuunbaa Ku Soo Gaadhsiiyay Oo Warkayagaa Fashiliyay, Ilaahaybaanan Ugu Mahadnaqayaa Xagaaga Iisoo Kexeeyay Si Uu Diinta Islaamka Iigu Soo Hanuuniyo. Halkaasna Waxa Uu Ku Qiray Inaan Ilaah Xaq Lagu Caabudaa Jirin Ilaahay Mooyee, Muxamedna Uu Yahay Rasuulkiisii.

Rasuulka Ayaa Dabadeed Yidhi: *Walaalkiin Diinta Fahansiiya, Quraankana Bara, Wiilkiisana U Sii Daaya.*

Muslimiintina Aad Ayay Ugu Farxeen Cumeyr, Cumar Bin-Khadaabna Waxa Uu Yidhi; *Doofaarka Ayaan Ka Jeclaa Cumeyr Bin-Wahab Markuu Rasuulka Kusoo Socday, Imikana Qaar Caruurtayda Kamid Ah Ayaan Ka Jecelahay.*

“Jidkii Hanuunka“ Qisooyinkii ay Ku soo Islaameen Shakhsiyaad Adduunka Caan ka Ah Waa Buug uu Qoray Qoraa Aaden Daahir Cabdilaahi (Aaden Cade) Qaybtii 4aad

ABU-DAR AL-QAFAARI ***(Jundub Bin-Janaada)***

Jilibkiisa Waxa La Odhan Jiray Reer Qafaar, Waxa Ay Daganaayeen Togga ***Waddaan***, Oo Ahaa Tog Ay Mari Jireen Safarada Qureysheed Ee Ku Jihaysan Dhulka Shaam, Waa Tog Isku Xidhi Jiray MAKA Iyo Caalam Dibadeedka Kale, Reerkaasi Waxa Ay U Dhuljiifayn Jireen Safarada Ganacsi Ee U Kala Gooshaya Dhulka Shaam Iyo Makka. Inkastoo Halyayga Sheekadeenu Uu Kasoo Jeeday Reerkaas, Waxa Uu Ahaa Nin U Dhashay Dhiiranaan, Geesinimo, Caqli Badnaan Iyo Aragti Dheeri, Waxana Aad Uu U Dhibsan Jiray Sanamada Ay Reerkoodu Caabudaan, Oo Uu U Arkayay Inaanay Wax Macquula Ahayn In Loox Ama Jirrid Aad Caabuddo, Waxana Uu Aad Ugu Kuurgali Jiray Inuu Ogaado Diin Kale Oo Dhaanta.



Wax Waliba Waagiisa Ayay Yimaadaane, Maalin Isaga Iyo Walaalkii Aniis Oo Wada Fadhiya, Ayaa Waxa Ay Maqleen, War Sheegaya In Nin Nebinimo Sheeganayaa Kasoo Baxay Magaalada Makka, Abaa-Dar Ayaa Markiiba Walaalkii Ku Yidhi: Orod Oo Makka Tag, Ninkaa War Iiga Keen, Waxa Uu Sheegayana Si Fiican U Soo Dhagayso. Aniis Dhaqaaq, Una Tabaabushaysay Dhankaa Iyo Makka, Waxuu Lamadegaanka Carbeed Sii Haadaba Markii Uu Makka Gaadhayba, Waxa Uu Arkay Nebigii Oo Dad Ku Ururssanyihiin Oo La Hadlaya, Dhegta Intuu Furta Ka Saaray Ayuu Si Fiican U Dhagaystay Warkii Uu Sheegayay, Inta Uu La Dhacay, Ayuu Dib Ugusoo Dhaqaajiyay Dhankii Miyiga Ee Uu Ka Yimid, Si Uu Walaalkiis Uga Warramo Waxii Uu Soo Arkay, Waxuu Laydha Iyo Hawada Lasoo Beretemoba Soo Gaadh. Abu-Dar Ayaa Markiiba Waydiiyay Walaalkii Bal Waxa Uu Kala Soo Kulmay Iyo Sifooyinka Uu Kusoo Arkay Ninkii La Sheegayay Ee Uu Diray Inuu War Uga Keeno, Walaalkiis Aniis Ayaa Ugu Halceliyay: Wallaahi Waxaan Soo Arkay Nin Dadka Ugu Yeedhaya Habdhaqanka Wanaagsan, Islamarkaana Akhriyaya Hadal Aan Gabay Ahayn, Hadalkaana Ku Magacaabaya Quraan, Abu-Dar Ayaa Hadana Waydiiyay: Sidee Ayay Dadku U Arkayeen? Dareenka Ay Ka Qaateen Se Sidee Ayuu Ahaa?, Anas Waxa Uu Hadana Ugu Jawaabay: Mar Waxa Ay Ku Sheegayeen Gabyaa, Marna Waxaba Ay Yidhaahdeen Waa Sixiroole, Mararka Qaarkoodna Waxa Ay Ku Magacaabeen Beenaale Ama Faaliye. Abu-Dar Oo La Dhacay Warkii Walaalkii Usheegay, Hasa Ahaatee Aanay Taladiiba Talo Ahayn Ilaa Uu Isagu Indhaha Ka Soo Qaado Ninkaas, Ayaa Walaalkii Ku Yidhi: Niyaw Ma Kusii Filantay Oo

Maad Kasii War Hayn Caruurtayda Bal Aan Anna Soo Eego'e?, Walaalkii Ayaa Ka Aqbalay Inuu Masuuliyada Caruurtiisa Ka Qaado, Kulana Sii Dardaarmay, Walaal Reer Makka Iska Ilaali Oo Si Feejigan U Gal.

Markii Waagu Walac Yidhi Ee Fallaadhaha Qoraxdu Wareemeen Oogada Sare Ee Lama-Degaanka Carbeed, Ayuu Abu-Dar Sahaydiisii Diyaarsaday, Oo Inta Waysadiisa Biyaystay, Cagta Socodka Ugu Deeqay, Wax Uu Soo Baqoolabo Soo Gaadh Makka, Nebiga Wajigiisa Toos Ugaran Maayo, Hadii Uu Dadka Waydiin Lahaana Makala Saarayo Kuwa Nebiga Raacsan Ee Hadii Uu Waydiiyo Sida Fiican Ugu Tilmaamaya Iyo Kuwa Hadii Ay Magaciisaba Ka Maqlaan Waranka Obocda Kaga Wareemaya. Markii Gabalki Dhacay, Qoraxduna Si Basar Leh Godkeedii Ugu Xarootay, Ayuu Ileen Cid Kama Garanayo Magaalada'e Waxa Uu Seexday Masaajidka, Waxyar Ka Dib Ayaa Waxa Ku Soo Baxay Cali Bin Abi Daalib Oo Markiiba Gartay Inuu Yahay Nin Qariiba Oo Socoto Ah Kuna Yidhi: Waar Ina Mari, Oo Kaalay Aniga Marti Ii Noqo Gurigaygana Soo Seexo, Hagaag Inta Uu Yidhi Ayuu Raacay, Habeenkiina U Hoyday Gurigii Cali, Markii Waagu Beryeyna Inta Uu Waysadiisii Qaatay Ayuu Ku Kalahay Dhankaa Iyo Masaajidkii, Hase Ahaatee Isaga Iyo Cali Habeenkaa Ismay Waraysan, Oo Midkoodna Ka Kale Si Fiican Umuu Garan, Maalintii Oo Dhan Wax Uu Masaajidkii Dhex Fadhiyoba Isaga Oo Aan Cidna Wax Waydiin, Ayuu Maalintii Labaad Gabalki Ugu Dumay Masaajidka Dhexdiisa, Hadana Waxa Ku Soo Baxay Cali Oo Yaabay Isna Yidhi Toloow Ninku Ma Reerkiisii Ayuu Garan La'yahay Laakiin Waa Deegsi Raganimo Ku Dhamaatee Habeenkii Labaadna Inta Uu Kaxeeyay Ayuu Martigaliyay, Markay Ahayd Maalin Saddexaaddii Ee Aanu Wali Nebiga Dadkii Ka Garan, Cidna Aanu Waydiin Ayaa Hadana Cali Soo Kaxeeyay Habeen Saddexaadkii, Laakiin Habeenkaa Ayuu Cali Ilaahay Haka Raalli Noqdee, Ninkii Waydiiyay: Niyaw Makka Maxaa Ku Keenay Oo Safarkaagu Daarranaa?, Abu-Dar Ayaa Yidhi: Haddii Aad Ii Ballanqaadayso Inaanad Cid Kale U Sheegin, Oo Aad Ii Gaynayso Cidda Aan U Socday Waan Kuu Sheegi, Cali Ayaa Ballantii Ka Qaaday, Markaas Ayuu U Sheegay In Ujeedadii Socdaalkiisu Ahayd Inuu Soo Arko Nebiga Cusub Ee La Sheegayo, Islamarkaana Uu Bal Hadalkiisa Iyo Waxa Uu Sheegayo Soo Dhagaysto. Cali Ayaa Fallaadhaha Faraxaddu Wajigiisa Ka Muuqdeen, Uguna Halceliyay: Wallaahi Waa Rasuulkii Ilaahay Oo Dhab Ahe, Barri Marka Waagu Baryo Hadii Alle Ogolaado Isoo Raac Oo I Daba Soco, Markaan Arko Wax Ama Cid Aan Kaaga Baqo, Waan Yara Istaagayaa Sidii Biyo Cabbaya Oo Kale Ee Ila Fahan, Oo Taxadir Qaado, Markaan Dhaqaaqo Se Iga Soo Daba Dhaqaaq, Meel Kasta Oo Aan Galona Igasoo Daba Gal. Habeenkii Oo Dhan Abu-Dar Dheg Iyo Dhaban Ma Dhigin Xiiso Uu U Qabo Aragtida Iyo La Kulanka Nebiga Awgeed, Markii Waagi Beryay, Ayaa Sidii Ballantu Ahayd Ay Cali Is Raaceen, Waxay Si Taxadir Leh U Farsamo Socdaanba Waxa Ay Usoo Galeen Nebigii NNKH, Abu-Dar Ayaa Markiiba Ku Yidhi Nebiga: Salaamu Caleykum Yaa Rasuululaahi, Rasuulkuna Si Fiican Intuu Salaantii Uga Qaaday Ugu Jawaabay: Wacalaykuma Salaam War Raxmatulaahi Wa Barakaatuhu. Nebigu NNKH Si Fiican Ayuu U Qaabilay Abu-Dar, Waxana Uu Usoo Bandhigay Oo Faahfaahin Ka Siiyay Diinta Islaamka, Kuna Dul Akhriyay Aayado Kamid Ah Quraanka Kariimka Ah, Abu-Darna Nin Xaq Doon Ah Ayuu Ahaaye Markii Uu Arkay In Diinta Nebigu Wadaa Xaq Tahay, Ayaa Kamuu Labalabayne Markiiba Ku Dhawaaqay Ereyada Xaqqa Halkiina Ashahaadda Loogu Qabtay, Halkaana Waxa Uu Ku Noqday Ninkii Afraad Amma Shanaad Ee Diinta Islaamka Soo Gala.

Bal Hadda Aan Abu-Dar Udayno Intaa Waxii Ka Dambeeyay Isagu Ha Inooga Warramee: *Waxoogaa Markii Aan Nebiga La Joogay Makka, Ee Uu Islaamkana Waxoogaa Iga Baray, Quraankana Aan Dhigtay, Ayuu Rasuulku Igu Yidhi:****Cid Kaliya Oo Reer Makka Ah Ha Uga Warramin Islaamidaada, Waayo Waxa Aan Kaaga Baqaayaa Inay Ku Dilaane.****Markaasaan Rasuulku Ugu Jawaabay Walaahi Kamaba Tagayo Makka Ilaa Aan*

Masaajidka Ka Kaco, Oo Islaamnimadayda Ku Dhawaaqo, Quraysh Oo Dhana U Caddeeyo, Markaasuu Rasuulkii Aamusay…

Masaajidkii Ayaan Imid, Iyadoo Quraysh Oo Dhami Fadhiyaan Oo Sheekaysanayaa, Markaasaa Inta Aan Badhtanka Ugalay, Codkaygii Ugu Dheeraana Ku Dhawaaqay Ayaan Idhi: Qureysheey, Waxaan Qirayaa Inaan Ilaahay Mooyee Ilaah Kale Oo Xaq Lagu Caabudaa Aanu Jirin, Muxamedna Waa Rasuulkii Ilaahay.

Markii Ay Ereyadaa Xaqu Ku Dhaceen Dhegihii Qureysheed, Ayay Kaceen Oo Inta Ay I Qabteen I Garaaceen, Iskuna Dayeen Inay I Tumaan Ilaa Aan Ka Dhimanayo, Hase Ahaatee, Cabbaas Bin Cabdi Muddalab Oo Ahaa Nebiga Adeerkii Waagaana Gaal Ahaa, Ayaa Igu Guntaday Oo Yidhi: Waar Ma Waxa Aad Dilaysaan Nin Reer Qafaar Ah Oo Safaradiina Ganacsi Ee Shaam Ka Yimaada Ama Ku Socda Oo Dhami Ay Soo Maraan Deegaankooda,Markaas Ayay Faraha Iga Qaadeen, Markii Aan Soo Miyirsaday Ayaan Nebigii Ku Soo Noqday, Isla Markii Uu I Arkaybana Igu Yidhi: Maanan Ku Odhan Islaamnimadaada Ha Muujinin?. Markaas Anoo Tacbaan Ah Ugu Jawaabay Rasuulkii Allow Wax Naftaydu Doontay Ayuu Ahaa Arrinkaasi Waanan Fuliyay, Markaasuu Nebigu Igu Yidhi: ***Orod Oo Reerkiinii Iyo Tolkaa Qabo, Oo Waxii Aad Aragtay Iyo Waxii Aad Maqashay Usheeg, Uguna Yeedh Inay Ilaahay Oo Kali Ah Caabudaan, Waxa Laga Yaabaa Inuu Ilaahay Kugu Anfaco Oo Ay Wax Kaa Qataan Adna Ajar Iyo Abaal Kaa Siiyee, Marka Aad Maqasho Inaan Awoodaystayna Ii Kaalay.***

Waan Qaatay Hadalkii Nebiga, Waxaanan U Dhaqaajiyay Dhulkii Reerkayagau Daganaa, Isla Markii Aan Gaadhayna Waxa Ila Kulmay Walaalkay Aniis, Iguna Yidhi: Maxaa Dhacay Siday Wax U Dhaceen? Uguna Jawaabay, Waan Islaamay, Walaalkay Markiiba Waxa Uu Yidhi Anna Waan Islaamay Oo Diintaada Ayaan Qaadanayaa, Hooyaday Ayaa Iyana Markii Ay Warkii Maqashay, Ilaahay Waafajiyay Inay Nuurka Islaamka Qaadato, Dad Kale Oo Badan Oo Tolkay Ah Ayaa Iyaguna Qaatay Diinta Islaamka, Ilaa Aanu Salaadana Si Fiican U Oognay, Dhulkayagiina Laga Dareemay Nuurka Imaanka Iyo Ilayska Islaamka.

Abu-Dar Waxa Uu Iska Joogay Oo Ku Sugnaa Miyigii Reerkoodu Daganaa, Waxase Uu Nebigii Dib Ugu Noqday, Markii Ay Dhamaadeen Dagaaladii BEDER, UXUD Iyo KHADAQ, Waayo Waatii Ballantii Nebigu Ahayd, ***Marka Aad Maqasho Inaan Awoodaystayna Ii Kaalay.***Waxa Uu Waydiistay Rasuulka In Uu Gacan Yare U Noqdo, Nebiguna Waa Uu Ka Yeelay, Waxaanu Nasiib U Yeeshay Inuu Adeege U Noqdo, Kuna Ag Noolaado, Shakhsigii Aduunka Ugu Sharafta Iyo Wanaaga Badnaa, Saaxiibka Aduunka Ugu Qaalisanaa Waa Nebigeenii Muxamed Ahaa NNKH.

“Jidkii Hanuunka“ Qisooyinkii ay Ku soo Islaameen Shakhsiyaad Adduunka Caan ka Ah Waa Buug uu Qoray Qoraa Aaden Daahir Cabdilaahi (Aaden Cade) Qaybtii 5aad

Umu-Salama

Magaceedu Waa Hinda Bint Abii Umaya, Aabaheed Waxa Uu Ahaa Nin Caan Ah, Oo Qabiilka Uu Kasoo Jeedo Ee Reer Makhzuum Ay Aad U Karaameeyaan, Waxa Uu Ahaa Nin Deeqsi Ah, Oo Cid Kasta Oo Socoto Ah Oo Dhulka Uu Daganyay Soo Martana Sooryeeya Waliba Sahay Siiya, Waana Sababta Markii Dambe Loogu Naanaysay *Sahayda Qofka Socdaalka Ah* (**Zaad Al-Raakib).** Inantaa Qaaliga Ahayd, Ee Kasoo Jeeday Reerkaa Carbeed Ee Caanka Ahaa Waa Reer Makhzuume, Islamarkaana Uu Dhalay Gadhcasaagaa Deeqsiga Ahaa, Waxa Calaf Ku Yeeshay Oo Xaaskiisa Ay Noqotay Nin La Odhan Jiray Cabdullaahi Bin Cabdi Asad Caanna Ku Ahaa Abu Salama, Oo Isna Ka Soo Jeeday Qabiilka Lagu Magacaabo Reer Cabdi Asad.



Qoyskani Waxa Ay Kamid Ahaayeen Dadkii Ugu Horreeyay Ee Diinta Islaamka Soo Gala, Waxana Ka Soo Gaadhay Dhib, Hagardaamo, Cay Iyo Aflagaaddo Badan Oo Ay Ula Sinnaayeen Dadkii Fara Ku Tiriska Ahaa Ee Qaatay Diinta Nebi Muxamed Nnkh. Markii Dulmigii, Addoonsigii, Iyo Jidh Dilkii Axmaqnimada Ahayd Ee Gaaladu Ku Haysay Muslimiinta Uu Joogsan Waayay Ayuu Nebigu Asxaabtiisa Kula Taliyay Inay Diintooda La Baxsadaan Oo Dhankaa Iyo Dhulkii Lagu Magacaabi Jiray Ardul Xabash (Ethoipia) Ay Naftooda Iyo Diintoodaba Ku Dhowrtaan, Ayaa Umusalama Iyo Abusalama Waxa Ay Ka Mid Ahaayeen Kooxdii U Qaxday Dhulkii Xabashida, Ee Uu Xukumayay Boqorkii Xaqsoorka Ahaa Ee Nagaashe (Najaashi), Inkastoo Boqor Nagaashe Si Aad U Qurux Badan Uu U Soo Dhaweeyay Qaxoontigii Muslimiinta Si Fiicana Ula Dhaqmay, Hadana Qoyskani Waxa Ay Aad Ugu Xiiseen Guryahoodii, Hantidoodii, Iyo Deegaankoodii Makka Oo Ahaa Gegidii Waxyigu Soo Cagadhigtay Ee Ilayska Islaamku Ku Aasaasmay, Waxay Qariibnimada Qurbaha U Adkaystaanba Beri Dambe Ayaa Lasoo Gaadhsiiyay War Sheegaya In Xamse Cabdi Mudalib Iyo Cumar Binu Khadaab Soo Islaameen Islamarkaana Awooddii Muslimiinta Xoojiyeen, Muslimiintuna Ay Hadda Sidii Hore Xaaladoodu Ka Duwantahay Oo Ay U Babac Dhigi Karaan Sanam Caabudkii Gumeysan Jiray. Umusalama Iyo Odaygeedii Iyo Waliba Dhawr Shakhsi Oo Kale Waxa Ay Go’aansadeen Inay Wadankoodii Ku Laabtaan, Waase Qadar Allee Markii Ay Maka Yimaadeenba Waxa Ay Ogaadeen In Warkii Loo Keenay Ee Badhaadhaha Sheegayay Uu

Ahaa War Sidii Uu Ahaa Laga Buunbuuniyay Oo Aan Sidii Loo Sheegayay Ahayn, Gaaladii Qureysheedna Ay Sii Labanlaabtayba Caddibaadii Iyo Jidhdilkii Muslimiinta.

Nebigu Nnkh Waxa Uu Ahaa Mid Aad Ugu Naxariis Badan Asxaabtiisa, Kana Fekeraya Sidii Ay Naftooda Iyo Caqiidadoodaba U Ilaashan Lahaayeene, Waxa Uu Hadana Muslimiintii Kula Taliyay In Magaaladda Maddiina Loo Qaxo Laguna Samatabaxo, Markana Umusalama Iyo Odaygeedi Waxa Ay Go'aansadeen Inay Diintooda Iyo Naftoodaba Ula Cararaan Madiina, Hase-Ahaatee Hadalna Waa Hadal Hawlina Waa Hawle, Tabaabushihii Iyo Hawshii Safarkoodu Sida Ay U Dhacday Umu-Salami Waxay Tidhi:

" Markii Uu Odaygaygii Abu Salama Go'aansaday Inaanu Madiina U Qaxno, Waxa Uu Ii Diyaaray Awr Rakuub Ah, Waanu Nagu Qaaday Awrkii Aniga Iyo Wiilkaygii Yaraa Ee Salama Oo Aan Dhabta Ku Haysto, Awrkii Ayuu Qarqarsiga Ka Jaray Oo Hogaanka U Qabtay, Socodkayagina Sidaas Ayuu Ku Bilaabmay, Waase Nasiib Darro'e Anagoo Aan Makkaba Ka Bixin, Ayay Na Arkeen Niman Qabiilkayga Ahaa, Waanay Na Hor Istaageen Oo Na Joojiyeen, Odaygaygii Abu Salama Ayay Abbaareen Oo Ku Yidhaahdeen: Haddii Aad Adigu Naftaada Ka Adkaatay Oo Aad Tagayso, Xageed Ku Waddaa Inantayada, Sidee Ayaanu Kuu Daynaa Oo Aad Inantayada U Kaxaysataa?, Kaddibna Inta Ay Ku Boodeen Ayay Iga Dhufteen Oo Anigii Iyo Wiilkaygii Yaraa Ila Hadheen, Islamarkii Ay Odaygayga Reerkoodi Na Arkeena Waa Ay Cadhoodeen Oo Yidhaahdeen: Wallaahi Inaanaan Ka Tagayn Ilmahayaga Yar Maadaama Oo Aad Idinkuba Inantiinii Kala Hadheen Inankayagii,Wiilka Yarina Waa Inankayagii Oo Anagaa Xaq Uleh Inaanu Qaadno, Dabadeeto Waa Ay Kala Jiiteen Ilmihii Yaraa Oo Kala Goyn Gaadheen, Ilaa Aakhirkii Ay Qaateen Reerkii Ninkaygu Oo Ay Ku Guuleysteen.

Waxaan Noqday Qof Jab Iyo Hoog U Dhamaaday, Oo Niyad Jabsan, Ninkaygii Waxa Uu U Haajiray Madiina Isagoo Diintiisa La Baxsanaya, Wiilkaygii Yaraana Waxa Qaatay Reer Cabdi Asad, Anna Waanigan Oo Waxa I Haysta Reerkayagii. Muddo Sannad Ah Ayaan Subax Walba Tagi Jiray Goobtii Masiibadu Ka Dhacday Ee Qoyskayga Lagu Burburiyay, Ilaa Uu Bari Dambe Igu Soo Maray Nin Qabiilkayaga Ah, Oo Inta Uu Iga Naxay, Dhibta Iyo Imtixaanka Aan Ku Suganahayna Ka Jidhidhicooday, Tolkay Kusoo Qanciyay In La I Fasaxo, Oo Ku Yidhi Waar Gabadhan Miskiinadda Ah Ee Aad Ninkeedii Iyo Ilmaheedii Ka Kaxayseen Faraha Ka Qaada, Reerkayagina Waa Ay I Fasaxeen.

La Ifasax Laakiin Sideen Ayaan Madiina U Aadaa Oo Ninkaygii Uga Daba Tagaa, Iyadoo Wiilkaygii Salama Oo Beerkaygii Ahaa Ay Makka Ku Haystaan Ninkayga Reerkoodii, Haddana Ilaahay Kolba Wax Ayuu Kuu Bidhbidhiyaaye, Dad Kale Ayaa Arkay Hooyadan Ilmaheedii Iyo Ninkeedii Laga Faquuqay Ee Dhibaatadu Haysato, Islamarkaana Reer Cabdi Asad U Calaacalay Kuna Soo Qanciyay Inay Wiilkayga Iisoo Celiyaan, Waana Ay Ka Aqbaleen Oo Inankaygii Dib Ayaa La Iigu Soo Celiyay.

Waxaan Diyaarsaday Awrkaygii, Ilmahaygiina Dhabta Ayaan Ku Qaatay, Waxaanan U Dhaqaajiyay Dhankii Ay Madiini Iga Xigtay, Anoo Ku Socda Ninkaygii Diintaydana La Baxsanaya, Laakiin Cid Ila Socotay May Jirin Waa Aniga, Wiilkayga Iyo Awrka Aan Watay Oo Kali Ah, Ilaahay Ayuunbaa Na Daalacanaya Oo Aanu Weheshanaynaa. Farajka Alle Badane, Anoon Makaba Wax Badan Ka Socon Ayuu Igu Soo Baxay, Nin La Odhan Jiray Cismaan Bin Dalxa, Waxaanu Igu Yidhi: Waa Xagee Ina Zaad Al-Raakibeey(Naanaystii Aabaheed)?, Waxaan Ugu Jawaabay, Waxaan Ku Socdaa Ninkaygii Oo Madiina Jooga, Waxa Uu Hadana I Waydiiyay:Oo Miyaanay Cidiba Kula Socon?, Waxanan Ugu Halceliyay: May, Walaahi Inankaygan Yar Mooyee Cid Kale Oo Ilaahay Aan Ahayni

Nalama Socoto, Kolkaasuu Igu Yidhi: Walaahi Inaan Kaa Hadhayn Ilaa Aad Madiina Ka Gaadhayso, Dabadeed Awrkii Aanu Saareyn Ayuu Noo Hogaamiyay, Wallaahi Waligay Maan Arag Nin Ka Sharaf Badan Oo Ka Wanaagsan, Waanu Na Kexeeyay Ilaa Iyo Uu Madiina Koonaheeda Meel La Yidhaahdo Quba Oo Ay Dagaan Reer Camar Bin Cawf Uu Na Keenay, Iguna Yidhi:Ninkaagi Tuuladan Ayuu Joogaa, Ee Barakada Alle Ku Gal, Waanu Iska Laabtay Oo Dhankii Makka Ee Aanu Ka Nimid U Dhaqaajiyay". Iyadu Laakiin Waxa Ay Heshay Ninkeedii Waxana Ay Aad Ugu Faraxsanayd In Ilaahay Mar Labaad Usoo Celiyay Isaga Iyo Wiilkeedii Yaraa.

Abu Salama Waxa Uu Intaa Kadib Galay Dagaalkii Beder, Oo Muslimiintu Kusoo Guulaysatay, Kaddib Ayuu Haddana Ka Qayb Galay Dagaal Xaqeedkii Uxud Oo U Kusoo Dhaawacmay, Markii Muddo Guriga Lagu Dhaawicinayay Ee Uu Dhulyaal Ahaa Ayaa Maalintii Dambe Tiisii Ay Noqotay Oo Geeridii U Timid, Waanu Geeriyooday Ilaahay Ha Ka Raalli Noqdee, Nebiga Ayaan Indhaha Isugu Qabtay Markii Ay Naftu Ka Baxday Uguna Duceeyay Ducadan " ***Ilaahayoow U Dambi Dhaaf Abu Salama, Darajadiisana Kor U Qaad, Cidii Uu Ka Baxayna Khayr Ugu Bedel, Qabrigana U Balaadhi Una Nuuri".***

Umu Salama Isla Markii Ay Asayda Dhigtayba Waxa Soo Doonay Rag Badan Oo Ay Ka Mid Ahaayeen, Abubakar Iyo Cumar Bin Khadaab Waanay Diiday Dhamaantood, Kadib Nebiga Nnkh Ayaa Soo Doonay, Waxaanay Ku Tidhi: Rasuulkii Alloow Waxaa Leeyahay Saddex Arrimood Oo Kala Ah:

Waxaan Ahay Gabadh Hinaase Badan, Oo Waxaan Ka Baqanayaa Inaan Kaa Cadhaysiiyo Oo Dabadeed Ilaahay I Cadaabo.

Waxaan Ahay Gabadh Da' Ahaan Weyn.

Waxaan Ahay Gabadh Caruur Wadata.

Rasuulkii Ilaahay Waxa Uu Ugu Jawaabay Sida Tan:

Hinaasahaa Aad Sheegtay Ilaahay Ayaan Ka Baryayaa Inuu Kaa Bogsiiyo.

Da'da Aad Sheegtayna Anba Kaama Yari Oo Nin Weyn Ayaan Ahay.

Caruurta Aad Sheegtayna, Caruurtaadu Waa Caruurtaydii.

Sidaas Ayaanu Nebigu Ku Guursaday Umu Salama, Ilaahayna Ninkeedii Mid Ka Khayr Badan Ayuu Ugu Bedelay Waa Nebigeenee Nnkh, Sidaana Waxa Ay Ku Noqotay Umu Salama Oo Kali Ah Maahee Umul Mu'miniin, Waana Hooyadeen Hinda Bint Abi Umaya.

“Jidkii Hanuunka“ Qisooyinkii ay Ku soo Islaameen Shakhsiyaad Adduunka Caan ka Ah Waa Buug uu Qoray Qoraa Aaden Daahir Cabdilaahi (Aaden Cade) Qaybtii 6aad

Abu-Sufyaan

Xiddiga Qisadu Waa Halyeey Kamid Ahaa Haldoorada Carbeed, Waxay Isku Fil Ahaayeen Nebi Muxamed Nnkh, Waana Inaadeerkii Rumaad Oo Waxaa Dhalay Xaaris Bin Cabdi-Mudalib, Waxay Nebiga Kusoo Wada Koreen Hal Qoys, Dhinac Kale Waxay Ka Ahaayeen Walaalo Oo Waxa Labadoodaba Naaska Soo Nuujisay Xaliimatu Sacdiya, Sidoo Kale Waxay Ahaayeen Saaxiibo Aad Isugu Xidhan, Isku Meelna Ku Soo Barbaaray, Intaaba Waxa Kasii Daran , Waxay Ahaayeen Laba Qof Oo Aad Isugu Eeg Muuqaal Ahaan, Waa Laba Qof Oo Aad Isugu Dhawaa, Waa Laba Ruux Oo Dhiig Iyo Dheecaanba Wadaagay, Waa Laba Shakhsi Oo Dhib Iyo Dheefba Soo Qaybsaday, Waa Laba Ruux Oo Noloshoodu Dhan Kasta Iskaga Dhafnayd, Bal Haddaba Hadii Nebi Muxamed Iyo Inaadeerkii Abu-Sufyaan Sidaa Ul Iyo Diirkeed U Ahaayeen, Markii Dambe Ee Uu Nebi Muxammed Rasuulka Noqday, Ilaahayna Risaaladii Nebinimada Gacanta U Galiyay, Carabina Giddigeed Geeska U Daruurtay, Iskuna Dayeen Inay Curdin-Dhadhiyaan Risaaladdii Curdinka Ahayd, Islamarkaana Caruur Iyo Cirooleba Ay Kusoo Rogeen Cadaadis Iyo Cagajuglayn Joogto Ah, Cay Iyo Aflagaado Aanu Mutaysan, Gardarro Caddaan Ah Oo Aan Geedna Loogu Soo Gabban, Cambaarayn Iyo Eedaymo Masabbid Ah, Caalamkana Ku Wargaliyeen, Inuu Yahay Wiilkoodii Yaraa Oo Ka Fallaagoobay, Diintoodii Iyo Dhaqankii Reerkoodana Ka Baxay, Oo Aan Waxba Laga Qorin, Hadii Ay Sidaas Carabi Samaysay, Abu-Sufyaan Go’aan Noocee Ah Ayuu Qaatay? Ma Inaadeerkii Ayuu Garab Iyo Gaashaanba U Noqday, Oo Tol Iyo Shisheeyaba Ciddii Gardaraysata Geeska U Dhigay?, Mise Is-Bahaysigii Xaqdarrada Ayuu Lasoo Saftay, Oo Isagaaba Kamid Ahaa Nimankii Geed Dheer Iyo Mid Gaabanba U Fuulay Inay Unuun Gooyaan Nebiga, Islamarkaana Isku Dayay Inay Xididada U Siibaan Waxyigii Hada Uun Bilawga Ahaa, Damiyaanna Iftiinkii Shidmayay?.

Qof Waliba Marka Uu Eego, Xidhiidhka Ilmaadeernimo, Walaalnimo Iyo Saaxiibtinimo Ee Ka Dhexeeyay, Nebiga Iyo Abu-Sufyaan, Waxa Uu Filanayaa, In Abu-Sufyaan, Hareer Istaagay Una Hiiliyay Nebiga, Balse Abu-Sufyaan Waxa Uu Qaatay Go’aan Foolxun Oo Naxdin Badan, Oo Ah Inuu Kow Ka Noqday, Dadkii Af Iyo Addinba Ku Dhibay Nebiga, Walaaltinamadoodi Waxay Isu Bedeshay Colaad, Saaxiibtinamadoodi Waxay Isu Bedeshay Cadaawad, Qaraabadii Iyo Tolnimadiina Waxay Isu Rogtay Nacayb Iyo Rixim Goysnimo, Sidoo Kale Dagaal Kasta Oo Qureyshi Ku Hujuunto Nebiga Iyo Asxaabtiisa Abu-Sufyaan Hormood Ayuu Ka Ahaa, Inta Badana Isagaaba Hurin Jiray Colaadaha Iyo Dagaalada Dhex Mara Xaqa Iyo Baadilka, Kaba Sii Darane Waxa Uu Ahaa Gabyaa Aftahan Ah, Oo Murtidiisa Ku Weerara Nebiga, Waxana Uu Noqday Cadow Joog Iyo Jiifba Ka Doorbiday Hadimada Iyo Hagardaamada Rasuulka, Muddo 20 Sano Ahna U Foognaa Sidii Uu U Luri Lahaa Hogaanka Xaqqa.

Dagaalkii Furashada Makka Wax Yar Uun Ka Hor, Ayuu Abu-Sufyaan Garashadiisa Adeegsaday, Maskaxdiisana Ka Shaqaysiiyay, Oo Fikir, Hubsasho Iyo Fiiro Dheer Kadib Iswaydiiyay, Toloow Dhibaatada Inaadeerkaa, Maxaa Dan Ah Ee Kuugu Jira? Mida Kale Sida Inaadeerkaa Wax U Wadaa Si Xun Maahee Maad Indho Caafimaad Qaba Ku Eegtid? Waase Yaabe, Nin Abwaan Ah Oo Garasho Leh Ayaad Tahaye, Maad Maskax Fayow Ku Qiyaastid Diinta Inaadeerkaa Hogaanka Ka Yahay?, Bal Intaa Wixii Ka Dambeeyay, Iyo Su'aalahaa Sidii Uu Uga Jawaabay, Abu-Sufyaan Laftiisu Ha Inooga Sheekeeyo, Isagaa Inooga Habboon, Oo Si Hufan Oo Habsami Leh Inoogu Soo Gudbin Karee, Waana Kan Isaga Hadalkiisa Ku Bilaabay Sidan:

"Markii Islaamku Awoodaystay Ee Isku Dubba-Dhacay, Lana Soo Tebiyay War Sheegaya In Nebi Muxamed Iyo Ciidankiisu Kusoo Wajahanyihiin Makka, Oo Ay Doonayaan Inay Qabsadaan, Ayaa Dhulki Edeg Igu Noqday, Oo Aan Is Waydiiyay, Xageed U Kacdaa? Yaad Garab Iyo Miciin Biddaa?, Waxaan U Imid Xaaskaygii Iyo Caruurtaydii, Waxaanan Ku Idhi: Diyaar Garooba, Makka Waynu Ka Baxaynaa, Oo Waxa Fooda Inagu Soo Haya Maxamed Iyo Ciidankiisiiye, Ileen Haday I Arkaan Sinaba Ii Badbaadin Maayaane, Waxana Ay Iigu Jawaabeen: Miyaanay Kuu Muuqan In Carab Iyo Cajamiba Raacday Oo Diintiisa Qaadatay, Adna Cadaawadiisii Ayuunbaad Dabada Sii Haysaa, Adigoo Ah Ninkii Garabka U Noqon Lahaa?! Waxay Aad Iigu Dhiirigaliyeen Inaan Nebiga La Heshiiyo, Diintiisana Aan Galoba, Islamarkiiba Waxaan U Yeedhay Wiilkaygii Oo Aan Ku Idhi Aabbo Hal Rakuub Ah Iyo Faras Inoo Diyaari, Waa Uu Soo Diyaariyay, Waxanu U Dhaqaaqnay Dhankaa Iyo Meesha Abwa La Yidhaahdo Oo Aan Balaf Ku Hayo Inuu Rasuulka Iyo Ciidankiisu Ku Suganyihiin, Markaanu U Dhawaanay Abwa Ayaan Madaxa Duubtay Si Aan La Ii Garan, Ilaa Mayl Marka Aan U Jirana Inta Aan Ka Dagay Gaadiidkii Ayaan Lugeeyay, Dadka Ayaan Iska Qarinayaa Oo Dhuumaalaysi Ayaan Ku Jiraa, Waxaanan Ka Cabsi Qabaa In La I Garto Oo Nimankii Afkayga Iyo Adinkaygaba Ka Nabad Gali Waayay Marka Ay I Arkaan , Unuunkayga Gooyaan, Iyaga Oo Aan Nebigaba I Gaadhsiin Cadho Ay Ii Qabaan Daraadeed. Waxaan Socdaba Nebiga Ayaan Soo Hor Istaagay Anoo U Muujinaya Inaan Ka Xumahay Waxaan U Gaystay, Markuu Isha Igu Dhuftay Ee I Gartay, Ayuu Dhanka Kale Iiga Jeestay Isagoo Aan Ila Hadlin, Intaan Ka Daba Wareegay Ayaan Hadana Wajigiisa Hor Joogsaday, Marlabaad Ayuu Hadana Iga Jeestay, Dhawr Jeer Markuu Sidaa Iiga Jeestay Ayay Muslimiintii Oo Dhamina Wajigooda Isiin Waayeen, Waxaan Eegay Abu-Bakar Kolkaasuu Iga Waji Dadbay, Waxaan Fiiriyay Cumar Bin Khadaab Markaasuu I Hiifay Oo Iga Jeestay, Waliba Nin Ansaarta Ka Mid Ahaa, Igu Diray, Ninkii Ayaa Igu Yidhi: Cadawgii Ilaahay Ayaad Tahay, Waxaad Tahay Ninkii Nebiga Iyo Asxaabtiisa Dhibi Jiray Ee Ay Ka Nabad Gali Waayeen, Waxaad Tahay Ninkii Cadaawadooda Bari Iyo Galbeedba Gaadhsiiyay…

Waxuu Ninkaasi Si Xun Iigu Qayliyo, Muslimiintuna Indhaha Igu Gubaanba, Waxay Ishaydu Qabatay Adeerkay Cabbaas, Kolkaasaan Ku Farxay Oo Ku Idhi: Adeero, Waxaan Filayay In Nebigu Ku Farxi Doono Islaamnimadayda, Markuu Eego Xigaalnimada Iyo Sharafta Aan Tolka Ku Dhex Lahaa, Ee Igala Hadal Ha Iga Raalli Noqdee, Adeerkay Waxa Uu Iigu Jawaabay: Maya, Walaahi… Lama Hadlayo, Fursad Dambe Oo Timaada Mooyee, Waayo Imika Waxaan Arkaa Sida Uu Kaaga Jeestay, Waanan Ka Xishoonayaa Rasuulka, Kolkaasaan Hadana Ku Idhi: Oo Waayee, Adeer, Yaad Igula Talin Lahayd Inuu Iiga Ergeeyo?, Waxana Uu Iigu Halceliyay: Walle Ayay Iga Tahay, Intaa Aan Ku Idhi Mooyaane Wax Kale Ma Garanayo.

Werwer Iyo Walbahaar Ayaa Ii Dhamaaday, Murugo Iyo Arrin La'aan Ayaan Taagnaan Kari La'ahay, Waxase Hadana Kamaradaydu Soo Qabatay, Inaadeerkay Cali Bin Abii-Daalib, Waan La Hadlay, Isna Waxa Uu Iigu Jawaabay Hadalkii Adeero Cabbaas Oo Kale, Markay

Talo Igu Ciirtay Ee Halkaa Arrini Ila Marayso Ayaan Ku Laabtay Adeerkay Cabbaas Kuna Idhi: Adeero, Hadii Aanad Iga Maslixi Karaynin Nebiga, Ninkan I Caayaya Ee Igu Qaylinaya Uun Igala Hadal, Kolkaasuu Yidhi: Waa Kee, Markaan U Tilmaamay, Ayuu Ku Yidhi: Nuceymaanoow, Abu-Sufyaan Waa Nebiga Inaadeerkii, Waana Wiilkuu Walaalkay Dhalay, Hadii Uu Rasuulku Maanta U Cadhaysanyahay, Maalin Uun Ayuu Saamixi Doonaaye, Iska Daa… Ninkii Idaa Oo Mar Dambe Imuu Aflagaadayn.

Markii La Dagay Meesha Juxfa La Yidhaahdo, Ayaan Aqalkuu Rasuulku Ku Jiray Afaafkiisa Fadhiistay, Wiilkaygii Jacfarna Garabkayga Ayuu Istaagay, Markii Uu Nebigu Qolkiisii Kasoo Baxay Ayuu I Arkay Oo Inta Uu Indhaha Isiin Kari Waayay, Wajiga Iga Dadbay, Kamaan Quusane, Markasta Oo Meel Ciidanku Dagaba, Qolka Nebiga Ayaan Kadinkiisa Kadaloobsanayay, Wiilkayguna Waa Uu I Ag Istaagayay, Nebiguna Marka Uu Soo Baxaba Iskadaa Inuu Ila Hadlee Indhahaba Imuu Siin Karayn, Muddo Markay Arrintu Sidaa Ahayd, Ee Talo Igu Ciirsantahay, Ayaan Xaaskaygii Ku Idhi: Walaahi, Ama Rasuulku Wuu Isaamixi, Amma Intaan Wiilkayga Gacanta Qabsado, Ayaanu Socod Miciinsan, Ilaa Inta Naftu Gaajo Ama Harraad Mid Uun Nooga Baxayso, Markuu Nebigu Hadalkaa Maqlay, Ayuu Iisoo Dabcay, Oo Markuu Teendhadiisii Kasoo Baxay, Ii Soo Eegay Si Waxoogaa Sidii Hore Ka Dabacsan, Balse Aan Dhoola Cadayn Iyo Hadal Toona Lahayn, Kadib Maka Ayaanu Soo Gaadhnay, Anoo Ciidanka Nebiga La Socda, Dhanka Masaajidka Ayuu U Dhaqaaqay, Anna Waan Hor Ordayay Oo Marnaba Kamaan Faaruqayn Dhinaciisa.

Waxay Sidaa Ahaataba Maalintii Dagaalkii Xuneyn, Ayay Carab Oo Dhami Isa Soo Bahaysatay, Dagaalkana Ugu Soo Diyaar Garowday Si Aan Hore Loo Arag, Waxaanay Go'aansatay, In Dagaalkani Noqdo Kii Kala Reebayay, Iyaga Iyo Nebiga, Nebiguna Waa Uu U Diyaar Garoobay Dagaalka, Anna Waxaan La Socdaa Ciidankiisa, Markii Aan Arkay Guutooyinkii Gaalada, Ayaan Idhi: Walaahi, Waxii Lur Iyo Lugooyo Aan Nebiga Usoo Gaystay Ee Af Iyo Adinba Lahaa, Maanta Waa Inaan Iska Tirtiraa, Oo Aan Dagaalka Ka Muujiyaa Wacdaro Ilaahay Iyo Rasuulkiisuba Igaga Raali Noqdaan Oo Igu Saamaxaan. Markay Labadii Ciidan Foodda Is Dareen, Ayaa Cududii Millatari Ee Gaaladu Waxoogaa Naga Awood Badatay, Ciidankii Muslimiintuna Daciifay, Badankoodina Yaaceen, Jab Kii Ugu Xumaana Nagu Dhici Gaadhay, Kolkaasaan Arkay Rasuulkii Oo Baqashiisii **Shahbaa** Ku Taagan, Oo Ku Sugan Badhtamaha Jiidda Hore Ee Dagaalka, Oo Difaacaya Naftiisa Iyo Inta Ku Hareeraysanba Isagoo Aad Moodo Aar Cartamaya, Markaasaa Intaan Faraskaygii Ka Soo Booday, Galkii Seeftaydana Jabiyay, Kuna Dhaartay Inaan Naftayda Rasuulka U Huro Oo Difaaco, Adeerkay Cabbaas Ayaa Baqashii Nebiga Xakamaha U Qabtay, Dhinaciisana Istaagay Isagoo Difaacaya, Anna Dhankii Kale Ayaan Ka Istaagay Anoo Seeftii Midigta Ku Haysta Oo Ku Daafacaya Rasuulka, Bidixdana Baqasha Nebiga Ku Haya, Kolkaasuu, Nebigu Inta Uu Iga Yaabay, Cabbaas Ku Yidhi: Ninkani Waa Kuma? Cabbaas Ayaa Yidhi: Waa Walaalkaa, Waana Inaadeerkaa, Abu-Sufyaan, Ee Saamax Oo Ka Raali Noqo Rasuulkii Alloow, Markaasuu Nebigu Yidhi: ***Waan Saamaxay, Ilaahayna Haka Dhaafo Cadaawad Kasta Oo Uu Isoo Colaadiyay.*** Maankaygiba Wuu Duulay Farxad Awgeed, Waayo Rasuulkii Ayaa I Saamaxay, Oo Inta Aan Ku Booday Ayaan Labadiisa Lugood Dhunkaday, Markaasuu Inta Uu Isoo Jaleecay, Igu Yidhi: ***Walaalo, Hore U Soco Oo Dagaalan,*** Kalmadahaa Kalgacalka Leh Ee Rasuulku Igu Yidhi Ayaa Huriyay Xamaasadaydii, Markaasaanu Aniga Iyo Muslimiinti Weerar Culus Ku Hinjinay Gaaladii, Islamarkaana Eryanay Ilaa Saddex Mayl.

“Jidkii Hanuunka“ Qisooyinkii ay Ku soo Islaameen Shakhsiyaad Adduunka Caan ka Ah Waa Buug uu Qoray Qoraa Aaden Daahir Cabdilaahi (Aaden Cade) Qaybtii 7aad

ERGADII AFADIISA IYO AQBALAADII RASUULKA

Xiddiga Aynu Sheekadan Ku Abbaari Doono Waa Cikrama Bin-Abi-Jahal, Waxa Dhalay Hogaankii Kufriga, Haldoorkii Sanam Caabudka, Iyo Hormoodkii Jahliga Ee Abu Jahal, Cikrama Aabihii Ayuu Hiil Iyo Hooba La Hareer Taagnaa, Waxana Uu Kala Qayb Qaatay Hor-Istaagii Hanuunka Iyo Hanaq Goyntii Muslimiinta, Dagaalkii Kala Haadinta Xaqa Iyo Baadilka Ee BADAR, Abu Jahal Waxa Uu Ahaa Hogaanka Sare Ee Ciidanka Dawladda Sanam-Caabudka, Cikramana Waxa Uu Ahaa Cududda Kali Ah Ee Uu Isku Hallaynayay, Dagaalkaasi Waxa Uu Ahaa Mid Qureyshi Si Hagarla’aan Ah U Gashay, Cudud Iyo Ciidan, Hub Iyo Saanad Midna Aanay La Kala Hadhin, Balse Waxa Ay Kala Kulmeen Jab Aanay Marnaba Talada Ku Darsan, Waxay Ku Waayeen Tiro Lagu Qiyaasay 140 Dagaal Yahan Oo Isugu Jira Dhimasho Iyo Maxaabiis, Waxa Intaa Dheeraa Tiro Kale Oo Badan Oo Dhaawac Ah Oo Aan Gacanta Muslimiinta Galin, Waxa Lagala Wareegay Hub Iyo Saanad Badan, Sidoo Kale Waxa Uu Dagaalkaasi Dhulka Galiyay Dhaqaalihii Guud Ee Xukuumaddii Alle-Diidka Ahayd, Abu Jahal Oo Sidii Aynu Kor Ku Xusnay Ahaa Hogaankii Sare Ee Maamulka Qureysheed Islamarkaana Ahaa Taliyaha Guud Ee Ciidanka Qalabka Sida, Waxa Si Xun U Dilay Oo Dhegta Dhiiga U Daray, Laba Wiil Oo Yaryar Oo Ka Tirsanaa Muslimiinta, Kana Cadhaysnaa Dhibtii, Caydii Iyo Aflagaadadii Uu Nebiga U Gaysan Jiray, Labada Sararood Ayay Seefo Kaga Aaseen, Sidaas Ayaanu Ku Naf Waayay Odaygii Abu-Jahal, Wiilkiisii Cikrama Wuxuu Indhihiisa Ku Arkay Aabihii Oo La Dilay, Dhiiggii Ka Rogmadayna Biyayn Gaadhay Ceelkii Badar, Hasa-Ahaatee Guuldaradii Gaadhay Gaalada Awgeed Fursad Umuu Helin Inuu Raqda Aabihii Qaado Si Uu Aas Qaran Ugu Sameeyo, Uguna Xabaalo Magaalo Madaxdoodii Oo Ahayd Maka, Muslimiinta Ayaa Se Ku Duugay Dhamaan Dadkii Ay Laayeen Goof Wayn Oo Ku Yaalay Jiiddii Dagaalku Ka Dhacay.

Dagaalkaa Beder Kadib, Cikrama Waxa Uu Dawladda Islaamka U Qaaday Cadaawad Hor Leh, Waxa Aan Mar Qudha Maankiisa Ka Bixi Jirin Guuldaradii Badar Iyo Geeridii Aabihii Iyo Waliba Sidii Uu U Haleeli Waayay Inuu Raqdii Aabihii Si Fiican U Xabaalo, Colaadiisii Horena Waxa Ugu Biirtay Colaad Cusub Oo Aargoosi Ah, Sidaa Darteed Ayay Cikrama Iyo Rag Kale Oo Aabayaashood Ku Dhinteen Dagaalkii Badar Waxay Bilaabeen Inay Huriyaan Colaado Cusub Iyo Aargoosi, Qureyshna Waxay Ku Abuureen Nacayb Iyo Xin Kii Hore Ka Daran, Waxaanay Ku Guuleysteen Inay Abaabulaan Dagaalkii Ka Dhacay Buurta UXUD, Dagaalkaas Abu-Sufyaan Ayaa Hogaamiye Guud Ka Ahaa, Khaalid Bin-Waliidna Waxa Uu Hogaaminayay Guutooyinka Dhanka Midig, Halka Cikrama Bin Abi-Jahal Uu Watay Guutooyinka Bidix Ee Ciidanka, Wajigii Hore Ee Dagaalka Waxa Gacan Sareeyay Muslimiinta, Balse Amar-Diido Nebi Oo La Sameeyay Awgeed Ayaa Wajigii Labaad Ee Dagaalka Waxa Muslimiinta Ku Dhacday Dhirbaaxo Culus Oo Ahayd Dhabar-Jabintii Khaalid, Dagaalkina Sidaas Ayuu Ku Dhamaaday, Qureyshina Waxa Ay Iska Dhaadhicisay Inay Aargoosi Ka Sameeyeen Dhacdadii Badar.

Sanadkii 8-Aad Ee Hijrada Markii Militariga Muslimiintu Usoo Gurguurteen Dhanka Maka Iyadoo Ujeedadoodu Ahayd Inay Magaalada Furtaan Islamarkaana Ka Sifeeyaan Shirkiga, Ayaa Cikrama Iyo Cutubyo Ciidamo Ah Oo Uu Watay, Isku Dayeen Inay Difaacaan Magaalada, Balse Dagaal-Yahan Khaalid Bin-Waliid (Waa Cikrama Saaxiibkiisii Dagaalkii Uxud Oo Dagaalkan Muslim Ah) Ayaa Gaashaanka U Daruuray Ciidankii Cikrama Halkaana Kaga Guuleystay Dagaalkii, Maalintaa Intii La Dilay Maahaane Intii Kale Way Yaacday, Firxadkii Baxsadayna Waxa Ka Mid Aha Cikrama, Ciidan La Hor Istaagi Karo Ma Ahayne, Milatarigii Muslimiintu Waxay Toos U Galeen Gudaha Magaalada Barakaysan Ee Maka, Nebiguna NNKH Waa Uu Saamaxay Guud Ahaan Qureysh, Marka Laga Reebo Shakhsiyaad Faro Ku-Tiris Ahaa Oo Uu Amar Ku Bixiyay In Meeshii Lagu Arkaba Lagu Dilo Xataa Hadii Ay Daahyada Kacbada Iska Laalaadiyaan, Shakhsiyaadkaa Waxa Kamid Ahaa Cikrama Bin Abi-Jahal, Sidaa Darteed Cikrame Waa Uu Fakaday, Firxadkiina Waxa Uu Ku Galay Yemen Oo Ahayd Barta Kaliya Ee U Baxsan Karayay, Sababtoo Ah May Jirin Cid Kale Oo Magan Galyo Siyaasadeed Siin Karaysay. Muddo Kadib Ayaa Xaaskii Cikrama Iyo Hinda Bintu Cutba Oo Wada Socdaa Nebiga U Yimaadeen, Iyagoo Raba Inay Islaamaan, Hindi Way Soo Niqaabatay Oo Waxay Ka Qajilsanayd Nebiga, Sababtoo Ah Waa Gabadhii Ka Dambaysay Dilkii Adeerkii Xamse, Nebigu NNKH Wuu Soo Dhaweeyay Labadii Dumar Ahaa, Waanay Islaameen, Xaaskii Cikrama Nebiga Ayay Uga Ergaysay Ninkeedii, Waxayna U Waydiisay Magangalyo Iyo Inuu Ammaan Siiyo, Rasuulkuna Waa Uu Naxariis Badnaa Oo Waxa Uu Ahaa Hogaamiye Dareenka Umaddiisa La Shaqeeyee, Waa Uu Ka Yeelay, Waxana Uu U Sheegay In Ninkeeda Magan Iyo Ammaanba Uu Siiyay Oo Aanu Dilayn.

Xaaskii Cikrama, Intay Kaxaysatay Wiil Addoon Ahaa Oo Reer Ruum Ahaa, Ayay Cagta Wadada Saartay Una Dhaqaajisay Dhanka Yemen, Oo Ahayd Dhulkii Uu Ninkeedu U Fakaday, Mar Ay Meel Dhexe Marayaan Ayaa Addoonkii Ay Wadatay Isku Dayay In Uu Kufsado, Waa Ay Ka Carartay Waxayna Ka Magansatay Reero Carbeed Oo Meel Daggan, Reerihii Ayaa Ka Reebay Oo Isagii Geed Ku Xidhay, Iyadu Se Safarkeedii Ayay Sii Wadatay, Waxay Tallaabada Hoosta Ka Xaddaba, Waxay Ninkeedii Ugu Timid Dhulka Oogada Ah Ee Loo Yaqaano **Tihaama**, Gaar Ahaan Xeebta Badda Cas, Isagoo Nin Naakhuude Ah Oo Muslim Ah Kula Gorgortamaya Inuu Qaado, Ninkuna Uu Ku Leeyahay, Waayee Aan Ku Qaadee Horta Islaam Oo Ashahaado, Cikramana Uu Leeyahay: Waar Diintan Aad Sheegaysaa Waa Tii Aan Kasoo Baxsaday Imikana Kasii Fakanayee I Qaad, Kolkaasay Markay Maqashay Ku Tidhi Ninkeedii: Waxaan Ka Imid Ninka Aduunka Ugu Wanaagsan, Ugu Baarrisan, Uguna Khayrka Badan, Waana Muxamed Bin Cabdulaahi, Waanan Kaaga Ergeeyay Oo Ammaan Ayuu Ku Siiyay, Oo Cid Wax Kuu Sheeganaysaa Majirto'e Ina Keen Naftaada Ha Halaagine, Wax Ay Baridaba Waa Uu Ka Yeelay, Waana Uu Soo Raacay, Intii Ay Jidka Kusii Jireen Ayay Uga Sii Sheekaysay Sheekadii Kala Qabsatay Iyada Iyo Wiilkii Addoonka Ahaa, Markii Ay Reerihii Ag Marayaan Ayuu Ku Leexday Oo Wiilkii Oo Jooga Arwaaxda Soo Dhaafiyay, Goor Gabbal Meel Dhexe Ugu Dumay Oo Ay Dageen, Ayuu Cikrama Isku Dayay Inuu Xaaskiisa U Tago, Balse Waa Ay Diiday, Waxayna Ku Tidhi: Anigu Muslimad Ayaan Ahay, Adna Sanam-Caabud Ayaad Tahay Oo Isu Xalaal Ma Nihin, Cikrama Ayaa Dhabanada Gacmaa Saaray, Lana Yaabay In Xaaskiisu Ku Tidhi, Isu Xalaal Ma Nihin, Waxana Uu Garwaaqsaday In Arrinta Nin Iyo Naagtii Kala Kaxaysay Ay Wax Wayn Tahay, Gabadhiina Codsigii Ayuu Ka Aqbalay Oo Muu U Tagin Habeenkaas, Waxay Soo Socdaanba Markii Ay Maka Kusoo Dhawaadeen, Ayuu Nebigu Asxaabtiisii Ku Yidhi Hadalkan Qiimaha Badan: "*Waxa Idiin Iman Doona Cikrama Bin Abi-Jahal Oo Muumin Ah, Muhaajirna Ah, Ee Aabihii Ha Caayina, Waxna Haka Sheegina, Sababtoo Ah Caydu Qofka Nool Ayay Damqaysaa, Kii Dhintayna Ma Gaadhaysee*", Wax Yar Ka Diba Cikrama Iyo Afadiisii Waxay Soo Gaadheen Halkii Nebigu Degganaa, Markii Nebigu NNKH Uu Arkay Ayaa Inta Uu U Kacay Si Farxad Leh Usoo

Dhaweeyay, Cikrama Oo La Yaabban Ninkii Ay Colka Ahaayeen Oo Soo Dhawaynaya, Ayaa Yidhi: Maxamedoow, Xaaskaygu Waxa Ay Ii Sheegtay Inaad Ammaan Isiisay Oo I Magangalisay, Ee Maxaa Ka Jira? Rasuulka Ayaa Ugu Jawaabay: Waa Runteed Oo Cidi Waxba Kuu Sheegan Mayso, Cikrama Ayaa Haddana Nebiga Waydiiyay: Bal Waa Saxe, Maxaad I Faraysaa? Rasuulkuna Waxa Uu Ugu Halceliyay: Waxaan Ku Farayaa Inaad Qirto In Ilaahay Mooyee Ilaah Kale Oo Xaq Lagu Caabudaa Aanu Jirin, Anna Aan Ahay Addoonkii Alle Iyo Rasuulkiisii, Salaadana Oog, Sakadana Bixi…., Rasuulku Waxa Uu U Tiriyay Dhamaan Tiirarka Islaamka, Kolkaasuu Cikrame Yidhi: Wallaahi Wanaag Mooyaane Wax Kale Maad Sheegin, Khayr Maahaane Wax Kalena Imaad Farin, Waxana Uu Yidhi Waxaan Qirayaa In Alle Mooyee Ilaah Kale Oo Xaq Lagu Caabudaa Uu San Jirin, Adna Aad Tahay Addoonkii Alle Iyo Rasuulkiisii, Markuu Islaamay, Ayuu Nebigu Ku Yidhi: Maanta Waxaad I Waydiisato Waan Ku Siinayaa, Ee Maxaad I Waydiisatay? Cikrame Waxa Uu Yidhi: Waxaad Ilaahay Dambi Dhaaf Iiga Waydiisaa, Colaad Kasta Oo Aan Kusoo Colaadiyay, Goob Kastoo Aynu Ku Kulanay Wixii Aan Kugu Sameeyay, Iyo Xan Kasta Oo Hortaada Ama Gadaashaada Aan Ka Idhi, Rasuulkuna Ilaahay Ayuu Dambi Dhaaf U Waydiiyay, Cikrame Oo Ku Farxay Arrintaas, Ayaa Yidhi: Rasuulkii Alloow, Maanta Laga Bilaabo, Hanti Kasta Oo Aan Ku Bixiyay, Inaan Hor Istaago Xaqa, Jidka Allena Ku Awday Labanlaabkeed Ayaan Ku Bixinayaa Jidka Alle Dartiis, Dagaal Kasta Oo Aan Ugalay Inaan Diinta Islaamka Joojiyana Labanlaabkii Ayaan U Galayaa Si Aan Diinta Islaamka Ugu Taageero.

Cikrama Bin Abi-Jahal, Waxa Uu Ka Qayb Galay Dhamaan Halganadii Barakaysnaa Ee Ka Dambeeyay Xilligaas, Waxana Uu U Diriray Si Hagarla'aan Ah Oo Geesinimo Ah, Wixii Hanti Uu Bixin Karayayna Waa Uu Bixiyay, Waxa Uu Noqday Dagaalyahan Sooma Jeeste Ah Oo Cududda Muslimiintu Isku Hallayso, Waxa Uu Noqday Hogaan Sare Oo Ka Tirsan Ciidanka Qalabka Sida Ee Dawladii Balaadhnayd Ee Islaamka, Halkaas Ayaynu Ku Ekaynaynaa Jidkii Hanuunka Ee Cikrama, Himaladiisa Fogina Waxay Ahayd Inuu Ilaahay Raalli Galiyo, Kuna Guuleysto Jannada, Ilaahay Haka Raali Noqdee, Waxa Uu Ahaa Nin Alle Ka Cabsi Badan, Dagaalyahan Ah, Deeqsi Ah, Islamarkaana Dhibtii Aabihii Nebiga U Gaystay Wax Ka Beddelay Rasuulkana Garab Istaagay.

"Jidkii Hanuunka" Qisooyinkii ay Ku soo Islaameen Shakhsiyaad Adduunka Caan ka Ah Waa Buug uu Qoray Qoraa Aaden Daahir Cabdilaahi (Aaden Cade) Qaybtii 8aad

Fallaadhii Layaabka Lahayd!!

"Waxaan Ahaa Wiil Da' Yar, Waxaan Ahaa Wiil Madow Oo Xabashi (Afrikaan) Ah, Waxaan La Noolaa Umad Carbeed Oo Habeenka Madow La Iga Soo Dhex Garanayo, Waxaan Addoon U Ahaa Oday Kamid Ahaa Madaxdii Iyo Haldoorkii Qureysheed Magaciisana La Odhan Jiray Jubayr Bin Mudcim, Waxaan Ahaa Shiishyahan Aan La Seegin Yoolka, Waxaan Ahaa Nin Waranka Uu Tuuraa Uu Si Qumaati Ah Ugu Qotonsado Abbaarta Uu La Rabo, Waxaan Ahaa Nin Dhugmo Toosan Oo Aan Surmo-Seegto Lahayn, Gamuunkayga Ninka Aan Ku Gano Gartii Ayay Ahayd Hadii Uu Iska Sii Ashahaato, Sidii Dhaqanku Ahaa, Qofka Adoonka Ahi Ma Uusan Lahayn Tasaruf Iyo Maamul Dhamaystiran,

Waxaan Ahaa Adoon Lagu Adeegsado, Waxaan Qaban Jiray Hawlo Culculus Oo Ay Adagtahay In Uu Ruux Bani'aadam Ahi Qabto, Balse Ma Jirin Cid Iga Nixi Jirtay.

Sanadkii Labaad Ee Taariikhda Islaamka (Hijrada) Waxaa Dhacay Dagaalkii Caanka Ahaa Ee Beder, Dagaalkaa Waxa Ku Nafwaayay Odaygii Aan Adoonka U Ahaa Adeerkii Oo La Odhan Jiray Ducayma, Waxana Gacantiisa Ku Dilay Xamse Bin Cabdi-Muddalib Oo Ahaa Nebi Muxamed Adeerkii Rumaad, Sidaa Darteed Jubeyr Isagoo Ku Dhaaranaya Ilaahyadii Samayska Ahaa Ee Uu Caabudi Jiray, Waxa Uu Nidar Ku Galay In Uu Adeerkii U Aaro, Ninkii Dilayna Uuna Sinaba Kaga Nabad Galin.

Mudo Yar Kadib Qureyshi Waxa Ay Go'aansatay In Ay Aargoosato, Waxayna Soo Abaabushay Weerar Iyo Dagaal Aan Loo Kala Hadhin, Waxa Colaadaa Hurinayay, Hormoodna Ka Ahaa, Xubno Kamid Ah Kuwii Aabayaashood, Walaalahood Iyo Ubadkooda Lagu Laayay Dagaalkii Hore Ee Beder, Waxana Kamid Ahaa Jubeyr Iyo Gabadha La Odhan Jiray Hinda Bintu Cutba Oo Aabaheed, Adeerkeed Iyo Walaalkeedba Ay Ku Nafwaayeen Dirirtii Beder, Markii Ciidankii Sahay Iyo Saanadba Loo Dhamaystiray Ayuu Jubeyr Bin Mudcim Isoo Jaleecay Waxana Uu Igu Yidhi: Ma Rabtaa In Aad Xorawdo? Waxaan Ku Celiyay: Yaa I Xoraynaya? Sidee Ayaan Se Ku Xoroobayaa? Waxa Uu Igu Yidhi: Hadii Aad Adeerkay U Aarto Oo Aad Disho Xamse Cabdi-Muddalib, Xor Ayaad Tahay, Sidaas Ayaanad Fasax Ku Noqonaysaa!! Waxaan Ku Idhi: Yaa Ii Damaanad Qaadaya Inaad I Xoraynayso Oo Ka Markhaati Noqonaya? Waxa Uu Yidhi: Cidda Aad Doonto, Waliba Dadka Oo Dhan Ayaan U Wada Sheegayaa Inaad Xoroobayso Hadii Aad Xamse Disho, Waan Ka Aqbalay, Waxaanan U Diyaar Garoobay Sidii Aan U Xoroobi Lahaa, Ee Aan Nebiga Adeerkii U Dili Lahaa, Inkastoo Xamse Ahaa Dagaalyahan Aan Si Fudud Loo Dili Karin, Waxaan Kalsooni Ku Qabay Shiishkayga Iyo Liishaankayga Oo Waan Is Hubay.



Markii La Gaadhay Buurtii Uxud Iyo Goobtii Dagaalku Ka Dhacayay Ee Labadii Ciidan Gorodda Is Dareen, Gammuunka Iyo Falaadhuhuna U Kala Gooshayeen Gacmaha Iyo Gararka Wadnaha Labada Ciidan, Sanqadha Gaashaanka Iyo Codadka Seefuhuna Ahaayeen Laxanka Kaliya Ee Dhegaha Dagaalyahanadu Ku Raaxaysanayeen, Anigu Waxaan Baadi Goob Ugu Jiray Xamse Cabdi-Muddalib, Hore Wajigiisa Waan U Aqaanay, Waxana Uu Ahaa Nin Aan Cidna Ka Qarsoomi Karin Sababtoo Ah Waxa Uu Madaxa Gashan Jiray Baal Gorayo, Si Halyeeyada Dhigiisa Ahi Ay U Arkaan, Waxayna Ahayd Astaan Lagu Yaqaan Geesiga Sooma Jeestaha Ah, Markaan Waxoogaa Raadiyay Ayaan Arkay Isagoo Sidii Awr Baarqab Ah Uga Dhex Muuqda Dagaalka, Oo Seefta La Dhex Qaadaya Safafka Hore Ee Dagaalka, Ciddii Hor Martana Ay Hubaal Ahayd In Ay Nolosha Nabad-Galyaynayso, Markaan Si Fiican U Dhugtay Ayaan Diyaar Garoobay, Kol Geedbaan Isugu Gudbaa Kolna Dhagax Ayaan Ugu Dhuuntaa Anoo Raba Inuu Iisoo Dhawaado, Markuu Meel Ii Toosan Marayo Ee Aan Si Fiican U Arkay Ayaan Intaan Shiishka Saaray Liishaanka Si Fiican Ugu Beegay, Oo Intaan Warankaygii Ruxay Qumaati Ugu Riddeeyay, Waligayba Cid Aan Waran Ku Riddeeyay Lama Seegine, Waxaan Kaga Dhuftay Xundhurta Hoosteeda, Markuu Waranki Ku Dhacay Ayuu Laba Tallaabo Xagayga Usoo Qaaday, Balse Markiiba Waa Uu Dhacay, Warankii Kalamaan Bixin Ilaa Aan Ka Hubsanayay Inuu Dhintay Iyo In Kale, Markaan Ogaaday Inuu Dhintay Ayaan Warankii Kala Baxay Oo Aan Teendhooyinkii Ciidanka Iskaga Laabtay, Waayo Ujeedadaydu Intaas Ayay Ahayd, Waxaanan Dilay Ninkii Xoriyadaydu Ku Xidhnayd, Wajigii Hore Ee Dagaalka Waxaa Gacanta Sare Lahaa Ciidanka Muslimiinta, Balse Wajigii Dambe Waxa Giraanta La

Wareegay Ciidamadii Qureysheed, Waxaan Arkayay Hinda Bintu Cutba Oo Googaynaysa Maydadkii Muslimiinta, Oo Inta Ay Dhegahii Iyo Sanankii Ka Guratay Kuul Iyo Baraarug Kasamaysatay Kuusheedii Iyo Baraarugteedii Dahabka Ahaydna Aniga Ayay Abaal Marin Ii Siisay, Maydkii Xamsena Beerka Ayay Kala Baxday, Markii Uu Dagaalkii Dhamaaday Ee Aanu Maka Ku Laabanayna Jubeyr Ballantii Igagama Bixine Waa Uu I Fasaxay, Sidaas Ayaanan Ku Helay Xorriyadaydii.

Markii Dawladii Islaamku Xoogaysatay, Ciidankii Muslimiintu Awoodaystay, Waxa I Gashay Cabsi Hor Leh, Waayo Waxaan Ahaa Gacan Ku Dhiiglihii Dilay Nebiga Adeerkii, Waxaan Baqasho Iyo Feejignaan Ku Jiroba, Ciidamadii Islaamku Waxa Ay La Wareegeen Maamulkii Iyo Gacan Ku Hayntii Magaalada Maka, Waxaan U Baxsaday Daa'if, Balse Nasiib Darro, Reer Daa'ifna Waxa Ay Qaateen Diinta Islaamka Waxana Ay Wafdi U Direen Nebiga Si Ay U Ogaysiiyaan Inay Dawladiisa Taabacsanyihiin, Dhulkii Ayaa Igu Yaraaday, Waxaan Ku Fekeray Toloow Ma Dhulka Shaam Ayaad U Fakataa Mise Yemen, Waxaan Sidaa Cabsi Ugu Jiraba, Waxa Ila Taliyay Nin Ii Nasteexeeyay Iguna Yidhi: Waar Bi'i Waaye! Muxamed Qofka Diintiisa Gala Ma Dilee, Orod Oo Is Dhiib, Diintiisana Qaado, Taladii Anigoo Qaatay Ayaan U Kicitimay Dhankaa Iyo Magaaladuu Nebigu Joogay, Markaan Gaadhay, Waxaan War Ku Helay In Nebigu Joogo Masaajidka, Intaan Soo Dhuuntay Ayaan Usoo Galay, Waan Dul Istaagay Waxaanan Idhi: *Waxaan Qirayaa In Alle Mooyee Ilaah Kale Oo Xaq Lagu Caabudaa Aanu Jirin, Muxamedna Uu Yahay Rasuulkii Alle*, Markuu Ashahaaddii Maqlay, Ayuu Kor Iisoo Fiiriyay, Waxana Uu Yidhi: Ma Waxshibaa?!!, Waxaan Ugu Halceliyay: Haa Rasuulkii Alloow, Waxa Uu Yidhi: Fadhiiso Oo Iiga Sheekee Sidii Aad U Dishay Xamse, Waan Fadhiistay Waanan Uga Sheekeeyay Sidii Aan U Dilay Iyo Sidii Wax U Jireen Oo Dhan, Markaan Warkii U Dhameeyay, Ayuu Wajiga Iga Dadbay Iguna Yidhi: *Hoogaaga'e Wajigaaga Iga Qari, Maanta Kadibna Yaan Ku Arkin,* Maalintaa Laga Bilaabo Waxaan Iska Qarin Jiray Indhaha Nebiga, Marka Uu Na Xadiisayo Ee Asxaabtu Hortiisa Soo Fadhiisato Anigu Waxaan Fadhiisan Jiray Gadaashiisa, Xaaladdaa Waji Qarsiga Ah Ayaan Ku Jiray Ilaa Uu Nebigu Nnkh Ka Geeriyooday, Inkastoo Aan Ogaa In Islaamku Wixii Ka Horreeyay Tirtiro Oo Aanan Dambi Kulahayn Wixii Aan Sameeyay Markaan Gaalka Ahaa, Balse Hadana Waxa I Hor Iman Jirtay Falkii Foosha Xumaa Iyo Murugadii Aan Nebiga U Gaystay, Waxaan Sugi Jiray Fursad Aan Dambigii Hore Iskaga Maydho.



Kadib Geeridii Nebiga, Waxa Taladii Muslimiinta La Wareegay Saaxiibkii Abu-Bakar, Waxana Diinta Islaamka Ka Baxay Reero Badan Oo Ay Ka Mid Ahaayeen Qabiilka La Yidhaa Banu-Xaniifa Oo Uu Hogaamin Jiray Musaylama Oo Ahaa Nin Beenaale Ah Oo Nebinimo Sheegtay, Abu-Bakar Waxa Uu Ku Qaaday Dagaallo, Anna Dagaaladaas Waxaan U Arkayay Fursadii Aan Iskaga Dhaqi Lahaa Danbigii Waynaa Ee Aan Nebiga Ka Galay, Waxaan Raacay Ciidamadii Islaamka, Waxaan Qaatay Warankii Aan Ku Dilay Xamse Bin Cabdi-Muddalib, Waxaanan Go'aansaday In Aan Qudha Ka Jaro Musaylama Amma Aan Shahiido, Markii Dagaalki Xumaaday Ee Ay Muslimiintu U Daateen Beertii Geerida Ee Ay Ciidamadii Musaylama Gaboodka Ka Dhigteen, Anigu Waxaan Raadinayay Musaylama, Markii Dambe Ayay Ishaydu Qabatay Isaga Oo Seef Gacanta Ku Haysta, Isla Markiiba Waxaan Arkay Nin Ansaari Ah Oo Isaguna U Dhabbacanaya Inuu Dilo Musaylama, Warankii Aan Xamse Ku Dilay Ayaan Liishaanka U Saaray Oo Ku Aaddiyay

Musaylama, Lamaan Seegine Waan Ku Qotomiyay, Balse Isla Markii Uu Warankaygu Ku Dhacay, Waxa Kale Oo Kudhacday Seeftii Ninkii Ansaariga Ahaa, Ilaahay Ayaana Og Labada Nabar Ka Uu U Dhintay.

"Jidkii Hanuunka" Qisooyinkii ay Ku soo Islaameen Shakhsiyaad Adduunka Caan ka Ah Waa Buug uu Qoray Qoraa Aaden Daahir Cabdilaahi (Aaden Cade) Qaybtii 9aad

Dr. Maurice Bucaille

Waxa Dhalay Aabbe Iyo Hooyo Faransiis Ah, Waxa Uu La Barbaaray Qoyskiisa Oo Haystay Diinta Kiristanka, Markii Uu Dhamaystay Waxbarashada Dugsiga Sare Waxa Uu Galay Jaamacada Faransiiska (France University) Oo Uu Ka Bartay Cilmiga Dhakhtarnimada Ama Caafimaadka (Faculty Of Medicine), Waxa Uu Ku Takhasusay Qalliinka, Kadibna Waxa Uu Noqday Dhakhtarka Qalliinka Ee Ugu Caansan Carriga Faransiiska.



Faransiisku Waxa Uu Ku Caanbaxay Inuu Ahmiyad Badan Siiyo Baadhida Raadadkii Iyo Aasaartii Umadihii Hore, Raad-Raacida Taarikhihii Waayadii Tagay Iyo Dabagalka Ilbaxnimooyinkii Hore, Sidaa Darteed Markii Uu Hogaanka Dalka Faransiiska Qabtay Madaxwaynihii Shuuciga Ahaa Ee Geeriyooday Faransuwa Mitran Hillaadii 1981-Kii, Ayuu Faransiisku Ka Codsaday Dalka Masar In Faransiiska La Keeno Raqdii Fircoon Si Ay Ugu Sameeyaan Qalliino Iyo Baadhitaano Cilmiyeed. Raqdii Fircoon Waa Lasoo Qaaday, Kolkii Ay Diyaaradii Siday Soo Gaadhay Gegida Diyaaraduhu Ka Haadaan Ee Faransiiska Ee Raqdii Lagasoo Daadajinayay Jaranjarada Dayuuradda Ayay Madaxwaynihii Faransiiska, Ciidamadii Iyo Masuuliyiintii Kale Ee Soo Dhawaynaysay Raqda Fircoonku Madaxa Hoos U Dhigeen Iyagoo Ixtiraamaya Raqda Boqorkii Kaligii Taliyaha, Macangaga Iyo Alle-Diidka Ahaa, Markay Dhamaatay Munaasabadii Soo Dhawaynta Ahayd Ayaa Raqdii Waxa Tuurta Ku Qaaday Cutub Ka Tirsan Ciidanka Qaranka Faransiiska Si Ay Ugu Gudbiyaan Waax Gaar Ah Oo Ka Tirsan Xarunta Aasaarta Iyo Cilmi Baadhista Faransiiska, Kadib Waxa La Isugu Yeedhay Culimadii Ugu Caansanayd Faransiiska Ee Ku Takhasustay Culuumta Aasaarta Iyo Dhakhaatiirtii Qalliinka Si Ay Cilmi Baadhis Xeel-Dheer Ugu Sameeyaan Taariikhda Raqda Fircoon Iyo Siraha Ku Duugan Jiritaankeeda, Waxa Masuulka Guud Iyo Madaxa Cilmi Baadhistan Laga Dhigay ***Prof. Maurice Bucaille.***

Dhakhaatiirtu Waxay Ku Mashquulsanaayeen Baadhid Guud Oo Ay Ku Sameeyaan Raqda, Balse Madaxooda Oo Ahaa Maurice Bucaille Waxa Uu Isku Hawlay Inuu Wax Ka Ogaado:

Sidee Ayuu Boqorkani Udhintay?, Maxay Se Raqdani Kaga Gedisantahay Boqoradii Kale Ee Masaarida Ee La Daweeyay Markay Dhinteen? Waa Maxay Sababta Gaarka Ah Ee Raqdani U Tirtirmi Wayday Sidii Kuwii Kale Daawaynta Mudo Kadib?, Habeenkii Oo Dhan Ayuu Ka Fekerayay Su'aalahan, Goor Dambe Oo Habeenkii Ah Ayuu Soo Saaray War-Bixin Kama Dambays Ah Oo Uu Ku Yidhi: *"Raqda Fircoon Isla Markii Badda Laga Soo Saarayba Waa La Daaweeyay"* Yacnii Waxa La Mariyay Dhirtii Iyo Dawooyinkii Masaaridii Hore Ku Dhamuuqi Jireen Boqorada Ka Geeriyooda Si Raqdoodu Mudo Usii Taallo, Markuu Intaa Sheegay, Ayuu Mid Ka Mid Ah Dadkii La Joogay Dhegta U Saaray Weedhahan Kaga Yaabiyay Dhakhtarka "*Ha Dagdagin Muslimiinta Ayaa Ka Sheekeeya Sida Uu U Qarqoomay Boqorkaniye…"* Dhakhtar Morris Waxa Uu Wax Aan Macquul Ahayn Ku Tilmaamay Hadalkan Isagoo Xusaya In Aan Cilmi Baadhis Noocan Oo Kale Ah La Ogaan Karin Iyadoo Aan La Adeegsan Culuumta Sayniska Iyo Qalabka Tiknoolojiyadda Casriga Ah Kuwaasina May Jirin Waagii Hore, Balse Waxa Uu Dhakhtar Maurice Amakaag Sii Qaaday Markuu Ninki Marlabaad Ku Yidhi: *"… Quraankooda Ay Rumaysanyihiin Ayaa Usoo Tebiyay Qiso Dheer Oo Kusaabsan Sidii Uu Fircoonkani U Geeriyooday Iyo Sirta Ka Dambaysa Inaan Raqdiisu Baabi'in…"* Dhakhtarkii Oo La Dawakhsan Warkan Layaabka Leh Ee Loo Sheegay, Ayaa Iswaydiiyay, Sidee Ayay Suurtogal U Tahay Arrintani Iyadoo Raqdanba La Ogaaday 1898-Kii Oo Markaa Ahayd 200 Oo Sano Ka Hor Iyadoo Quraanka Muslimiintuna Uu Soo Dagayay 1400 Oo Sano Ka Hor, Waase Yaabe Sidee Ayay Arrintani U Dhici Kartaa Iyadoon Waayadii Hore Wax Badan Laga Ogayn Daawadii Masaaridii Hore Marin Jirtay Cidda Ka Dhimata!!!


Habeenkii Oo Dhan Morris Bukai Waxa Uu Dul-Fadhiyay Raqdii Isagoo Indhaha Ku Gubaya Si Xeel-Dheerna Uga Fikiraya Hadaladii Maanta Saaxiibkii Ku Yidhi Ee Ahaa In Quraanka Muslimiintu Aqristaan Sheegay Sida Uu Fircoon U Dhintay Iyo Sida Raqdiisu Uga Badbaaday Inay Tirtiranto, Dhakhtarku Waxa Kale Oo Uu Maskaxda Ku Hayay In Kitaabka Kiristanku Sheegay In Fircoon Badda Ku Qarqoomay Isagoo Eryanayay Nebi Muuse Balse Kitaabka Kiristanku Aanu Sii Faahfaahin Xikmada Ka Dambaysa Waarida Raqda Fircoon, Waxana Uu Markale Is Waydiiyay: Toloow Imika Raqdan I Hortaalaa Ma Fircoonkii Isagoo Nebi Muuse Eryanaya Qarqoomaybaa? Macquul Se Ma Tahay In Muxamed Ogaado In Ka Badan 1000 Sano Ka Hor Anna Aan Hadda Uun Ogaado?!

Dhakhtar Maurice Habeenkii Oo Dhan Il Iyo Baal Isuma Uu Keenin, Waxana Uu Codsaday In Loo Keeno Nuqul (Nuskhad) Ka Mid Ah Kutubta Tawraat Oo Ah Kutubta Ay Haystaan Dadyawga Yuhuuda Ahi, Waa La Yaabe Waxa Uga Soo Baxday Aayad Kitaabkaas Ka Mid Ah Oo Macnaheedu Yahay: *"Biyihii Badda Ayaa Dib Usoo Noqday Waxayna Qarqiyeen Dhamaan Gaadiidkii Iyo Fardoolaydii Ciidamadii Fircoon Ee Muuse Ka Daba Galay Badda, Haba Yaraatee Hal Qofna Kama Badbaadin",* Aayadani Waxay Dawakhaad Xad Dhaaf Ah Kusii Riday Dhakhtar Maurice, Sababtoo Ah Saddexda Kitaab (Quraan, Injiil Iyo Tawraat) Waxa Ay Isku Raaceen, In Fircoon Badda Ku Qarqoomay Isagoo Muuse Eryanaya, Balse Labada Kitaab Ee Injiil Iyo Tawraat Faahfaahin Intaa Dheer Kuma Uu San Arag, Halka Kitaabka Quraanku Si Qoto-Dheer Uga Waramay Sida Uu Fircoon U Dhintay Iyo Sababta Ay Raqdiisu Ilaa Hadda U Tirtirmi Wayday!.

Dawladii Faransiisku Intay Raqdii Ku Riday Quraarad Qaali Ah Ayay U Celisay Masar, Laakiin Dhakhtar Morris Waxa Uu Ka Fadhiyi Waayay Warkan Layaabka Leh Ee Muslimiintu Tebinayaan, Waxyar Ka Dibna Waxa Uu Shandadihiisa U Xidh-Xidhay Dhankaa Iyo Dalka Sucuudiga, Si Uu Uga Qayb Galo Shir-Wayne Caafimaad Oo Ay Kasoo Qayb Galayeen Dhakhaatiir Qalliin Oo Muslimiin Ah, Isla Markii Uu Dhakhaatiirtii Muslimiinta La Kulmayba Dhakhtar Maurice Waxa Uu Uga Sheekeeyay, Mucjisooyinkii

Taariikheed Ee Fircoon Iyo Cilmi Baadhistii Uu Ku Sameeyay Raqdiisii, Markiiba Nin Dhakhtar Ah Oo Muslim Ah Ayaa Inta Uu Kacay Oo Uu Kitaab Quraan Ah (Musxaf) Soo Qaaday U Akhriyay Aayadan Macnaheedu Yahay: *"Maanta Ayaanu Jidhkaaga Badbaadinay Si Aad Aayad Iyo Wax Kuqaadasho Ugu Noqoto Cidda Kaa Dambaysa, Inbadan Oo Dadka Ka Mid Ahina Aayadahayaga Waa Ay Moogyihiin"* ***Suuratu Yuunis 92.***

Aayaddani Si Wayn Ayay Qalbigiisa Ugu Dhacday, Wadnihiisana U Ruxday, Hore Ayuu Ilaahay U Yidhi "Waxa Iga Cabsada Adoomahayga Cilmiga Lehe" Maadaama Oo Uu Ninkani Ahaa Nin Cilmi Leh, Waxa Uu Is Barbardhigay Macluumaadka Iyo Xogaha Saddexda Kitaab, Waxa Kale Oo Uu Fiirsday Sida Cilmi-Baadhistiisii Ay U Waafaqday Xogaha Hore Quraanku U Sheegay, Sidaa Darteed Inta Uu Istaagay Ayuu Dad-Waynihii Shirka Fadhiyay U Sheegay In Uu Islaamay Oo Diinta Nebi Muxamed Qaatay!! Allaahu Akbar! Ilaahay Qofka Uu Hanuuninayo Si Fiican Ayuu Xaqa Ugu Ifiyaa.



Dhakhtarku Waxa Uu Ku Laabtay Dalkiisii Faransiiska Isagoo Aan Ahayn Kii Ka Yimid, Isagoo Nadiif Kasoo Noqday Wasakhdii Kufriga, Isagoo Xaq Iyo Baadil Usoo Kala Cadaadeen, Isagoo Muslim Ah, Muddo 10 Sano Ah Oo Dambe Waxa Uu Ku Hawlanaa Inuu Wax Ka Ogaado Heerka Isku-Aadka Xaqiiqooyinka Sayniska Iyo Quraanka, Midhihii Tobankaa Sano Ee Aqoon-Baadhista Ahaa Waxa Kamid Ahaa Kitaab Caalamka Gaalada Gilgilay Oo Uu Soo Saaray Dr.Morris, Kitaabku Waxa Uu Ku Salaysanyahay Runta Iyo Xogaha Ku Duugan Musxafka, Kitaabka Magaciisa Waxa Uu U Bixiyay: *"Quraanka, Injiil, Tawraat Iyo Sayniska… Diraasaynta Kutubta Dahiran Iyadoo Loo Eegayo Aqoonta Casriga Ah"*, Magacan Si Kale Ha U Arkin, Waayo Dhakhtarku Waxa Uu Aqoon U Lahaa Aqoonta Casriga Ah Balse Aqoon Hore Uma Uu San Lahayn Kutubta Dahiran, Kitaabkaas Waxa Daabacaadiisa Lagu Celiyay Dhawr Jeer (More Editions), Waxa Lagu Turjumay Afaf Dhawr Ah Oo Ay Kamid Yihiin, Faransiis, Carabi, Ingiriisi, Faarisi, Turki, Jarmal Iyo Af Indunuusi, Waxana Lagu Faafiyay Rugaha Akhriska Ee Bariga Iyo Galbeedkaba.

Culimadii Reer Galbeedku Aad Ayay Uga Soo Horjeesteen Kitaabkan, Waxana Ay Geed Gaaban Iyo Geed Dheerba U Fuuleen Sidii Ay Kitaabkan Xididada Ugu Siibi Lahaayeen, Waxay Ka Qoreen Kutub Kale Oo Ku Lidi Ah, Culimadii Kutubta Ka Qortayna Waxa Kamid Ahaa, Dr. William Campbell Oo Ka Qoray Kitaab Uu U Bixiyay *"Quraanka Iyo Kitaabka Dahiran Oo Lagu Eegay Ilayska Taariikhda Iyo Sayniska",* Kuwo Kale Oo Ka Mid Ahaa Culimada Reer Galbeedku Waxay Isku Dayeen Inay Kitaabkan Ceebihiisa Baadhaan Dabadeed Inta Ay Aad Ugu Fiirsadeen Ayay Akhriyeen, Balse Talada Allaa Lehe, Halkii Ay Ceeb Ka Raadinayeen Waabay Ku Islaameen. Hadaladii Uu Dr.Morris Kitaabkiisa Ku Xusay Waxa Kamid Ahaa: *"Waxa Ugu Horeeya Ee Qofka Quraanka Akhriyaa Uu La Yaabayaa*

Waa Hodantinimada Mawduucyada Cilmiga Ah, Sidoo Kale Halka Aannu Kitaabka Tawraat Ku Aragnay Qaladdo Cilmiyeed Oo Sayniska Kasoo Horjeeda, Quraanka Kuma Aanu Arag Hal Qalad, Hadii Quraanku Ahaan Lahaa Hadal Qof Insaan Ah, Sidee Ayay Ugu Suurto Gashay Ruux Noolaa Qarnigii Todobaad Inuu Ogaado Xogo Iyo Aqoon Aan La Gaadhin Casrigii Uu Noolaa?!", Akaadamiyada Faransiisku Waxay Abaal Marin Ku Siisay Dr.Morris 1988-Kii Kitaab Uu Qoray Oo La Yidhaa ***"Quraanka Kariimka Ah Iyo Aqoonta Casriga Ah".***

"Jidkii Hanuunka" Qisooyinkii ay Ku soo Islaameen Shakhsiyaad Adduunka Caan ka Ah Waa Buug uu Qoray Qoraa Aaden Daahir Cabdilaahi (Aaden Cade) Qaybtii 10aad

.

Musa Tcheir Antonio

Waxa Uu Hadda U Shaqeeyaa Jananka Caalamiga Ah Ee Iqra, Gaar Ahaan Qaybta Afka Ingiriisida Kula Hadasha Muslimiinta Waqooyiga Maraykanka, Ustareeliya Iyo Aasiya, Waa Diin-Fidiye Reer Ustareeliya Ah, Fogaan-Aragga Amma Muuq-Baahiyaha Caalamiga Ah Ee Iqra Waxa Uu Ku Leeyahay Barnaamij La Yidhaa "Waydii Sheekha" Waxana Uu Kaga Jawaabaa Su'aalaha Dadka Dhawaan Diinta Soo Galay Iyo Su'aalaha Ku Saabsan Fahanka Diinta.

Wargeyska Al-Ahraam Al Masriya Ayaa Waraysi Ka Qaaday Sheekh Musa, Su'aalihii La Waydiiyayna Waxa Kamid Ahaa:

S: Bal Hadda Nooga Waran Noloshaadii Islaamka Ka Hor Iyo Tan Hadda?

J: Aabahay Asal Ahaan Waxa Uu Kasoo Jeedaa Talyaaniga, Hooyadayna Ireland, Waxaan Ku Dhashay, Ku Barbaaray, Noloshaydana Ku Qaatay Dalka Ustareeliya, Markii Aan Yaraa Waxa Maskaxdayda Ku Wareegi Jiray Su'aalo Kusaabsan Diinta, Waxaan Kutub Ka Akhriyay Islaamka, Ma Aan U Akhriyaynin Inaan Soo Galo Balse Waxay Iga Ahayd In Aan Kula Murmo Wiil Aanu Saaxiib Ahayn Oo Ahaa Muslim Reer Boosniya Ah, Wiilkaas Oo Mar Kasta Igu Odhan Jiray, Diinta Islaamku Waa Diinta Ugu Wanaagsan Caalamka, Markaan Diinta Islaamka Wax Ka Akhriyay Waxa Iisoo Baxday Inay Jirto Waxyaabo Ay Wadaagaan Diinta Masiixiga Iyo Tan Islaamku, Qofka Muslimka Ahi Waxa Uu Rumaysanyahay Ilaahay, Waxa Kale Oo Uu Rumaysanyahay Ciise, Nuux, Ibraahim, Muuse Iyo Nebi Muxamed Nnkh. Markaan Diinta Islaamka Diraasaynayay Maan Filayn Inaan Ku Arki Doono Wax Sax Ah Ama Caqliga Galaya, Sidee Ayay Sax U Noqon Kartaa Diin Ay Haystaan Soomaalida, Af-Gaanistaanida Iyo Carabta Lama-Degaha Ku Nooli, Balse Markii Dambe Waxaan Arkay In Arrin Kasta Oo Islaamku Farayaa Yahay Sax Iyo Caqli-Gal, Hasayeeshee Islaamka Waxa Si Xoog Ah Iigu Soo Jiiday Carinta Iyo Cajsi-Galinta Cilmiyeed Ee Quraanku Cadeeyay, Imay Se Soo Jiidan Dhaqanada Wanaagsan Iyo Mucaamalo Wanaaga Uu Islaamku Dadka Farayo, Sababtoo Ah Diin Kasta Iyo Qof Kasta Oo Wanaagsani Waxa Uu Jecelyahay Dhaqan Samaanta Iyo Mucaamalo Wanaaga, Sidaa

Darteed Xeel-Dheerida Cilmiyeed Iyo Xogaha Sayniska Casriga Ahi Hadda Uun Uu Sheegay, Quraankuna Hore U Xusay, Ayaan Ku Ogaaday, In Quraanku Aanu Ahayn Hadal Uu Nebi Muxamed Yidhi Balse Uu Yahay Waxyi Iyo Aqoon Ilaahay Usoo Dhiibay.

Markii Aan Islaamay Da'daydu Waxay Ahayd 17 Jir, Waxaanan Ku Jiray Sanadkii Ugu Dambeeyay Ee Dugsiga Sare, Haddana Waxaan Ahay 26 Jir, Kolkaan Islaamay Waqtigayga Waxaan U Qaybiyay Laba Qaybood Oo Kala Ahaa, Xilli Aan Diinta Islaamka Wax Ka Barto Iyo Waqti Aan Aqoontayda Iskuulka Ku Mashquulo, Intii Aanan Islaamin Ka Hor Waxaan Ahaa Sida Dhalinyarta Ila Filka Ah Ee Wadankayga Ku Nool, Waxaan Lahaa Gabadh Saaxiibad Ah, Khamriga Ayaan Cabbi Jiray, Sanad Dhamaystiran Ayaanay Igu Qaadatay Inaan Hab-Dhaqankayga Bedelo, Inantii Aanu Saaxiibka Ahaynna Waan Iskaga Tagay Inkastoo Aan Aad U Jeclaa Sababtoo Ah Waxay Iga Diiday Inay Diinta Islaamka Ila Soo Gasho, Waxaan Joojiyay Khamrigii, Waxaan Iska Mamnuucay Hilibkii Doofaarka, Waxaanan Bilaabay Salaadaha Shanta Ah.

S: Maxay Ahayd Jawaab-Celinta Aad Labadaada Waalid Kala Kulantay Kadib Markaad Islaamtay?

J: Runtii Markii Hore Waan Ka Qariyay, Balse Waxay Ka Dheehdeen Dhalan-Gediska Ku Yimid Hab-Dhaqankayga Oo Dhan Iyo Isbedelka Tasarufkayga, Waxay Arkeen Shakhsiyadaydii Oo Dhanka Fiican Isu Gediday, Anigoo Khamrigii Joojiyay, Anigoo Farxaan Noqday Rabshadiina Yareeyay, Tusaale Ahaan Waxa Ay Layaabeen Quraankan Aan Akhriyo, Reer Galbeedka Iyo Ustareeliyaanka Badankooda Diintu Waxay La Tahay Aqoon Korodhsi Guud (Saqaafad), Layaabna Ma Laha Hadii Aad Akhrisato Diin Aan Taada Ahayn, Hooyaday Iyo Aabahay May Ahayn Dad Ehlu Diin Ah Oo Diintooda Kiristanka Ku Ad-Adag.

S: Sidee Ayay Asxaabtaadii Iskuulku Iyagu U Arkeen Islaamidaada?

J: Dhamaantood Way Igu Farxeen, Xataa Wiil Ka Mid Ahaa Asxaabtaydu Diinta Islaamka Ayuu Soo Galay Laba Todobaad Kadib Markii Aan U Sharaxay Diinta Islaamka, Islamarkaana Aan Siiyay Kutub Uu Ka Aqristo Xogaha Diintan Islaamka, Macalimiinti Se Waxay Arkeen Isbedel Muuqda Oo Dhanka Shakhsidayda Ah, Waxaan Noqday Wiil Aad U Edaab Badan Kadib Markii Aan Ahaa Qalqaali Rabshad Badan, Mid Ka Mid Ah Macalimiintayda Ayaa Igu Yidhi: Xataa Waxaa Isbedelay Habkii Iyo Usluubkii Aad U Hadli Jirtay!!!

S: Maxaad Kaga Jawaabaysaa Tuhunka Reer Galbeedku Islaamka Iyo Muslimiinta U Tuhmeen Argagixiso?

J: Markii Ay Dhacday Dhacdadii 11-Kii September Maan Ahayn Muslim, Balse Waxaan Dareemay Waxoogaa Farxad Ah Maadaama Oo Cid Uun Maraykanka Garaacday, Laakiin Waxaan Xusuustaa Markii Aan Islaamay Ayaan Dareemay Foolxumada Falkaasi Lahaa, Sababtoo Ah Islaamka Ayaa Ii Diidaya Inaan Xasuuqo Dadka Barida (Dambilaawaha) Ah, Islaamka Ayaa I Tusay Saxa Iyo Qaladka, Waxaan Xusuustaa Mid Ayaa Maalin Igu Yidhi Muslimiinta Oo Dhami Waa Argagixiso, Waan La Yaabay Waxaan Ku Idhi: Ma Muslimiintoo Dhan Xataa Habarta Wadada Maraysa?!, Waxaanan Waydiiyay Maxaad Daliil Haystaa?, Mida Kale U Fiirso Taariikhda, Miyaanay Dawladii Spanishka Ku Wada Noolayn Muslimiin Iyo Masiixiyiin, Miyaanu Salaaxu-Diin Al-Ayuubi Masiixiyiinta Kula Dhaqmin Cadaalad Iyo Wanaag, Diinta Islaamku Waxay Qabtaa Cadaalada, Wanaaga, Samo Ku Wada

Noolaanshaha Iyo Is-Xaqdhawrka, Waase Qalad In Gef Uu Hal Qof Oo Muslim Ahi Sameeyay Umada Muslimka Ah Oo Dhan Guudka Laga Saaro, Taasi Waxay I Dareensiinaysaa Oo Aan Tebayaa Kaalintii Al-Azhar Al –Shariif Ay Ku Lahaan Lahayd Fahanka Iyo Wax Ka Bedelka Aragtida Reer Galbeedku Islaamka Ka Qabaan.

S: Sidee Ayuu Isu Bedelay Dareenkaaga Ku Aaddan Xorriyada Markii Aad Islaamtay, Islaamku Xoriyadaadii Ma Cidhiidhi Ayuu Galiyay?

J: Intii Aanan Islaamka Galin Ka Hor Waxaan Is-Waydiin Jiray Manhajka Saxda Ah Ee Xorriyadda, Ma Shuuciyadaa Mise Waa Marxism-Ka?, Balse Waxaan Ogaaday Inaanu Jirin Mad-Hab Diini Ah, Fikir Iyo Aragti Siyaasadeed Oo Leh Xorriyad Furan Oo Aan Xadlahayn, Aragtiyaha Fikir Kasta Ama Mabda' Kasta Waxay Leeyihiin Xeerar Iyo Qodobo Kuu Xaddidaya Wixii Aad Samayn Lahayd Iyo Waxyaabaha Kaa Reeban, Xataa Dadka Fawdada Jecel Ee Ku Andacoonaya Waxa Jira Xorriyad Furan Waxay Leeyihiin Xeerar Aan La Dhaafi Karin, Hadii Xoriyada Laga Dhigi Lahaa Wax Aan Xad Lahayn Oo Furan Ma Uu San Jireen Sax Iyo Qalad.

Ka Muslim Ahaan Waxaan U Arkaa In Islaamku Yahay, Nidaam Toosan Oo Habeeyay Xorriyadaha Qofeed Iyo Kuwa Guudba, Waayo Shay Kasta Waxa Uu U Sameynayaa Sabab Iyo Cudur Daar, Xorriyada Dhabta Ah Waxaan Ka Helay Islaamka Waana Xorriyada Qalbiga Iyo Caqliga, Markaad Sidaa Islaamka U Soo Gashaba Waxaad Ka Xoroobaysaa Werwerka Iyo Walaaca, Markaad Salaada Tukanayso Waxaad Dareemaysaa Nabadgalyo, Xasilooni Iyo Xorriyad, Waxana Kaa Tirmaya Dhamaan Cabsida Iyo Baqaha, Qofka Muslimka Ah Ayaa Haysta Xorriyad Dhab Ah Sababtoo Ah Aragti Sax Ah Ayuu Caalamka Ka Haystaa, Faraq Wayn Ayaana U Dhexeeya Inaad Dhex Socoto God Ama Waddo Dhulka Hoos-Marta Oo Madow Oo Aanad Garanayn Meel Ay Ku Dhamaanayso Iyo Inaad Socoto Wado Iftiin Leh Oo Aad Garanayso Waxa Dhamaadkeeda Kugu Sugaya.

S: Ka Waran Waxqabadkaagii Dhanka Dacwadda Ee Ustareeliya?

J: Waxaan Shaqada La Bilaabay Urur Diineed Islaami Ah Oo Ka Jiray Melbourne, Ururku Waxa Uu Ka Shaqayn Jiray Baridda Dadka Ee Diinta Islaamka Iyo Sharaxaadda Macnaha Iyo Xaqiiqada Islaamka, Waxaan La Shaqeeyay Ururo Diineed Oo Badan Oo Uu Kamid Yahay Ururka Al-Turaath Al Islaami, Waxaan Ka Qayb Galay Aqoon Is-Waydaarsiyo, Shirar Iyo Kulano Badan Oo Islaamka Ah, Waxaan Tagay Dubay, Qadar, Kuwayt, Hindiya, Koonfurta Filibiin Iyo Meelo Kale.

S: Maxaa Ka Mid Ah Mushkiladaha Kahoryimaada Qofka Soo Islaamaya? Sidee Ayaana Loo Yarayn Karaa?

J: Hadaan Anigu Tusaale Isu Soo Qaato, Qofka Marka Uu Islaamka Ku Cusubyahay Iimaankiisu Waa Daciif, Waxa Dhici Karta Inuu Diinta Ka Noqdo, Aniga Hal Sano Ayay Igu Qaadatay Inaan Muslim Sax Ah Noqdo Oo Salaada Iyo Waajibaadka Alle Bilaabo, Hadii Se La Helo Hay'ado Islaamiya Ama Ururo Diini Ah Oo Dadka Markiiba Gacan Qabta Dhib May Lahaateen, Sidoo Kale Qofka Diinta Ku Cusubi Ma Kala Garan Karo Sunniga Iyo Shiicada Mana Kala Saari Karo Madaahibta Islaamka, Sidaa Darteed Waxa Uu U Baahanyahay Tilmaamid Iyo Hagid Sax Ah, Qoysaska Qaarkood Dan Kama Galaan Haday Ubadkoodu Islaamaan Iyo Hadii Kale, Balse Waxa Jira Qoysas Xataa Hablahooda Erya Hadii Ay Diinta Islaamka Galaan, Waa Ilaahay Mahadii Oo Hadda Waxa Jira Guryo Ay Dhiseen Ururo Islaamiya Oo La Geeyo Hablaha Soo Islaamay Ee Reerahoodu Soo

Dayriyeen, Qofkasta Oo Muslim Ah Waxa Looga Baahanyahay Inuu Gacan Qabto Qofka Soo Islaamay Fahansiiyana Xaqa, Inuu Baro Walaalihiisa Muslimiinta Ah, Inuu Soo Tuso Xarumaha Diinta Lagu Barto, Inuu U Keeno Kutub Uu Akhristo, Inuu Ka Dhaadhiciyo Inuu Salaada Iyo Waajibaadka Islaamaka Dhawro, Diintana Aanu Sinaba Dib Uga Laaban.



Musa Tcheir Antonio

“Jidkii Hanuunka“ Qisooyinkii ay Ku soo Islaameen Shakhsiyaad Adduunka Caan ka Ah Waa Buug uu Qoray Qoraa Aaden Daahir Cabdilaahi (Aaden Cade) Qaybtii 11aad

Sidaan Filayay May Noqon!!



Gabadhani Waxay Ahayd Wariye Ama Saxafiyad Firfircoon Oo U Shaqayn Jirtay Jariidad Laga Leeyahay Carriga Ingiriiska Lana Yidhaa

Sunday Express, Waxay U Tabaabushaysatay Safar Halis Badan Oo Ay Rabtay Inay Magac Iyo Sumcad Wariye-Nimo Ku Hesho, Waxay Timid Dalka Pakistan Si Ay Uga Sii Gudubto Wadanka Afghanistan Oo Ahaa Faran Iyo Jiid Colaado Ka Aloosnaayeen, Soohdinta U Dhaxeysa Pakistan Iyo Afghanistan Waxa Ku Dhaqan Reero Dan Yar Ah Oo Noloshoodu Ku Xidhantahay Xoolaha Nool Iyo Beeraha, Waa Reero Dadnimadoodu Wanaagsantahay Oo Sharafta, Deeqsinimada, Geesinimada, Marti-Soorka Iyo Raganimada Hidde U Leh, Waa Dhul Qarfo Ah Oo Hawkar Badan, Waa Buuraley Iyo Jeex-Jeexyo Safarka Ku Adag, Gabadhani Iyadoo Ka Waramaysa Sidii Ay Kusoo Gudubtay Iyo Safarkeedii Layaabka Lahaa Waxay Tidhi: "Waxaan Kasoo Tallaabay Soohdinta U Dhaxaysa Pakistan Iyo Afghanistan Iyadoo Mararka Qaarkood Uu Gaadiid Ii Ahaa Dameer Marar Kalena Aan Ku Tacabirayay Baabuur Inbadan La Adeegsanayay Oo Shantii Daqiiqaba Mar Xumaanayay, Waxaan Ku Labisnaa Dharka Asturan Ee Dhaqanka U Ah Haweenka Reer Afgaanistaan, Kabahaygu Waxay Ahaayeen Caag".

Yvonne Ridley Way Ku Guulaysatay Inay Iyadoo Nabad Qabta Kasoo Gudubto Xuduudka, Waxay La Yaabanayd Dadkii Degganaa Dhulkaa Ay Soo Martay Oo Ahaa Dad Noloshoodu Fududahay, Bulsho Furfuran Oo Dabeecad Dabacsan, Dhibaatooyinka Iyo Waayaha Noloshana Ku Wajahay Daganaan Iyo Iimaan-Qab, Waxa Kale Oo Ay Lasoo Amakaagtay Deeqsinimada Dadkaasi Lahaayeen Iyadoo Hayntoodu Aad U Yartahay.

Waxay Guuro Bahallayn Iyo Kallahaad Arooryo Ku Jirtaba, Iyadoo Badhtanka Kaga Jirta Safarkeedii Ku Aaddanaa Kaabuul Oo Ah Caasimada Dalka Afgaanistaan, Ayay Ku Weecatay Tuulo Yar Si Ay Ugu Sii Nasato, Sahayna Uga Sii Qaadato, Habeenkii Tuuladaas Ayay U Dhaxday, Waxay Habeenkaana Si Dhab Ah U Sii Ogaatay Nolosha Layaabka Leh Ee Dadka Reer Afgaanistaan Sababtoo Ah Waxay La Seexatay Siddeed Dumar Ah, Waxa Loo Goglay Dhulka, Waxay U Fiirsatay Dumarka Afgaanistaanta Ah Oo Midiiba Laga Yaabo Inay Dhashay 15 Carruur Ah Iyagoo Ku Nool Wadan Ay Aafeeyeen Dagaallo Sokeeye Iyo Kuwo Shisheeye Muddo Aan Ka Yarayn Rubcu Qarni, Halka Iyadu Ay Ahayd Hooyo Dhashay Ilmo Kali Ah, Waxay Si Aad Ah Ugu Dhugmo Yeelatay Dadnimo Wanaaga Iyo Martisoorka Dadkan.

Markii Ay Gaadhay Kaabuul Ee Ay Hawsheedii Ka Dhamaysatay Ayay Damacday Inay Ku Laabato Pakistan 10-Kii September 2001-Dii, Nasiib Darro Se Maalintii Ku Xigtayba Waxa Dhacay Qaraxyadii Lagu Burburiyay Aqaladii Maraykanka 11-Kii September 2001-Dii, Dhacdadaasi Markii Ay Dhacday Ayuu Maraykanku Go'aansaday Inuu Weerar Ku Qaado Afghanistan Iyo Xukuumadii Islaamka Ahayd Ee Ka Talinaysay (Daalilbaan), Markuu Taliskii Daalibaan Ogaaday Shirqoolka Iyo Colaadda Uu Maraykanku Soo Amaamurayo Ayay Heegan Adag Galeen, Waxay Adkeeyeen Isu-Socodka Iyo Dhaqdhaqaaqa Xuduuda, Waxa Kale Oo Ay Baadhitaan Adag Ku Samaynayeen Dadka Si Looga Feejignaado Sirdoonka Iyo Basaaska U Adeegaya Reer Galbeedka, Sidoo Kale Xukuumada Pakistan Ayaa Iyaduna Joojisay Dhaqdhaqaaqa Xuduuda Ay La Wadaagto Afghanistan, Gabadhii Jiq Ayay Talo Ku Noqotay, Meel Kastana Waxa Laga Dhigay Dhaabad Adag Iyo Lama Dhaafaan, Cabbaar Markii Ay Ka Fekeraysay Sidii Ay Waddankan Uga Bixi Lahayd Ee Ay Pakistan Ugu Tallaabi Lahayd Ayay Go'aansatay Inay Ka Gudubto Waddooyinka Dacalada Iyo Jidadka Aan Aad Loo Ilaalin Iyadoo Iskadhigaysa Gabadh Afgaanistaaniyad Ah Magaceeduna Yahay Shamiim Lana Socota Ninkeeda Jalaal Abaad Oo Booqasho Ugu Tagaya Hooyadii Oo Xanuunsanaysa Islamarkaana Daggan Tuulo Aan Fogayn, Talo Allaa Leh Arrimuhuna Waxay U Socdaan Tabta Uu Isagu Rabo'e, Waxa Dhacday Nasiib Darro Labaad, Gabadhii Iyo Ninkii La Socday Oo Fuushan Dameer Ay Is-Lahaayeen Ku Tallaaba Ayaa Waxa Kusoo Baxay Askar Ka Tirsan Xukuumadii Daalibaanka Oo Baadhitaan Iyo

Hubin Waday, Gabadhii Naxdin Iyo Farsamo-Xumo Ka-Haysatay Habka Iyo Hanaanka Dameeraha Loogu Safro Waxay Ka Ahaydba Dameerkii Ayay Ka Ciirtay Oo Ka Dhici-Gaadhay, Kamaradii Ayaa Ka Duushay Oo Kala Daadatay, Markiiba Waxay Ku Calaacashay Erayo Af Ingiriisi Ah Oo Malahayga Aan Filayo Inay Ahaayeen, Oh My God!, Shit, Iwm, Waxa Maqlay Askartii Daalibaanka Oo Markiiba Fahmay Inaanay Gabadhani Ahayn Afgaanistaaniyad, Iyadoo Ka Hadlaysa Dhacdadaa Fashilaadda Ahayd Waxay Tidhi: "Ma Illaabo Jalleecadii Askari Ka Tirsan Ciidanka Daalibaan Oo Markiiba Arkay Kamarada, Argagax Iyo Naxdin Ayaa La Igaliyay, Waxaan Niyada Ka Tamaniyay Inuu Kamaradda Iska Dhaafo Balse May Dhicin, Ninkaasi Cadho Ayuu Qarxi Gaadhay, Wuu Isoo Dhuftay Oo Dameerkii Aan Fuushanaa Ayuu Iga Soo Tuuray, Kamaradii Ayuu Jajabiyay, Isla Il-Bidhiqsigiiba Waxa Igu Soo Ururay Koox Dhan Oo Askar Ah Iyagoo Ku Celcelinaya: "Basaasad Maraykan Ah … Basaasad Maraykan Ah", Dhacdadani Waxay Igu Ahayd Khalkhal Iyo Riyo Xun Markii Aan Maqlay Dhamaantood Oo Ku Sheekaysanaya Ha La Xidho Si Loo Baadho".

Ilbidhiqsiyadii La Qabtay Waxay Ahaayeen Kuwo Aragagax Iyo Culays Badan Ku Abuuray, Waxay Bilawday Inay Ka Fekerto Mustaqbalkeeda Madow, Waxa Maskaxdeeda Kusoo Ururay Wararkii Ay Warbaahintoodu Soo Tebin Jirtay Ee Ka Sheekayn Jiray Naxariis Darrada Xukuumada Daalibaan Ee U Harraadan Dhiiga Bani'aadamka, Daalibaantii Ay Warbaahinta Reer Galbeedku Ku Tilmaami Jireen Nidaamkii Ugu Bahalsanaa Ee Soo Mara Taariikhda Insaanka, Sidaa Darteed Waxay Sawiratay Inay Ula Dhaqmi Doonaan Sidan: Inay Kula Kici Doonaan Kufsi Wadareed Arxan Darro Ah, Inay U Gaysan Doonaan Jidh Dil Iyo Ciqaab Aan Naxariis Lahayn, Ama Waa Hadii Ay U Naxariistaane, Ay Dhagax Ku Dili Doonaan Kadib Markay Dhowr Cesho Waraystaan Waxoogaana Ciqaabaan, Balse Waxa Is-Waydiin Leh, Toloow Ma Ula Dhaqmeen Sidii Ay Sawiratay Mise Waxay Ula Dhaqmeen Si Ka Xun?, Ma Xidheen Mise Halkii Ayay Ku Khaarajiyeen? Waa Su'aalo Qofka Warbaahinta Reer Galbeedka U Dhuun Daloolaa Uu Si Uga Jawaabi Lahaa Qofka Muslimka Ah Ee Wax-Garadka Ahina Si Kale Uga Faalloon Lahaa.

Ciidamadii Daalibaan Gabadhii Way Xidheen, Wax Yar Markii Ay Xidhnaydba Waxa Maankeeda Kusoo Laabtay Daganaantii Iyo Xasiloonidii, Waxa Kala Duwanaaday Sidii Ay Filaysay In Loola Dhaqmi Doono Iyo Sidii Xaqiiqadu Noqotay, Sawirkii Qaldanaa Ee Ay Ka Haysatay Daalibaan Oo Ahaa Sawir Ay Maskaxdeeda Ku Qortay Warbaahinta Reer Galbeedku Ayaa Mar Kaliya Isu Bedelay Muuqaal Kale, Waxay Aragtay Askartii Daalibaanka Oo Ah Rag Akhlaaq Iyo Dhaqan Leh, Rag Waxyaabo Badan Xeerinaya Oo Xuduud Iyo Xeerar Ay Xidhayaan, Rag Xuquuqda Bani'aadamka Dhawraya Gaal Iyo Muslimba, Raggu Muu Baadhin Ee Waxay U Direen Gabadh Hubisa In Ay Hub Sidato Iyo Inkale, Waayo Diinteena Suubani Ma Ogola In Raggu Dumarka Taataabto Ama Baadho Iyadoo Dumar Kale La Helayo, Intaa Kadib Waxay U Qaadeen Meel Aan La Garanayn, Waxa Se Layaab Noqotay Meeshii La Geeyay Ee Lagu Xidhay Oo Ahayd Meel Qaboojiyeyaal Ku Xidhanyihiin (Air Conditioner), Meel Leh Xamaam Iyo Musqul Nadiif Ah, Goob Iftiimaysa Oo Aan Mugdi Ahayn, Yvonne Ridley Waxay Sheegtay In Gaadhkii Ilaalin Jiray, Turjumaankii Iyo Dambi-Baadhuhuba Ula Dhaqmeen Si Xushmad Leh Oo Naxariis Iyo Dhibirsanaani Ku Jirto, Waxa Loola Dhaqmay Si Ka Gedisan Sida Reer Galbeedkoodu Ula Dhaqmaan Maxaabiista Muslimiinta Ah Oo Isugu Jirta: Jidh-Dil, Qolal Madow Oo Cidhiidhi Ah, Aflagaado Diimeed Iyo Mid Qofeed, Kufsi, Dhaqan Xumo Iwm.

Mudadii Ay Xidhnayd Ayay Mar Cuntada Ka Soontay, Waxay Sheegtay In Ilaaliyihii Iyo Turjumaankeedi Ku Yidhaahdeen: "Kuma Faraxsanin Inaad Aad U Tacbaansantahay", Waxay Ugu Yeedheen Dhakhtar Hubiya Xaaladeeda Caafimaad, Daalibaan Gabadhii Waxay

Ku Yidhaahdeen: “ Diintayada Ayaa Na Faraysa In Bani’aadamka Loo Samo-Falo”, Waxa La Go’aamiyay In Lasii Daayo Kadib Markii Dambi-Baadhiddu Ku Wayday Dambigii Lagu Soo Eedeeyay Ee Ahaa Basaasnimada, Balse Intii Aan Lasii Dayn Waxa Loogu Yeedhay Nin Wadaad Ah Oo Wacdiya Kuna Waaniya Inay Diinta Islaamka Wax Ka Ogaato, Sheekhu Waxa Uu Gabadhii Ku Dhiiri Galiyay Inay Diinta Islaamka Gasho, Halkaasna Waxa Ay Ku Ballanqaadday In Ay Diinta Islaamka Wax Ka Ogaan Doonto, Kutubna Ka Akhriyi Doonto Si Ay Wax Uga Fahamto, Iyadoo Ka Waramaysa Markii Ay Cuntada Ka Soontay Waxay Tidhi: “Waan Diiday Inaan La Hadlo, Cuntadiina Waan Ka Soomay, Markasta Oo Aan Ku Adkeeyo Diidmadana Waxay Iila Hadli Jireen Si Dhibirsan, Waxaanay Igu Odhan Jireen: Waxaad Tahay Walaashayo, Waxaad Tahay Gabadh Marti Noo Ah, Waxaanu Jecelnahay Inaad Farxad Dareento, Balse Hadalkooda Maan Rumaysan Jirin, Waxaanan Is Odhan Jiray, Hadii Aad Si Dabacsan Ula Hadasho Iyaga Ayaa Si Qallafsan Kuula Dhaqmaya, Waxa Aan Sawiran Jiray In Ay Iila Dhaqmi Doonaan Sida Maraykanku Ula Dhaqmo Muslimiinta Ku Xidh-Xidhan Xabsiga Guantanamo, Hasa-Ahaatee Hal Nina Iima Soo Eegin Si Xushmad Darro Ah Igumana Xadgudbin”.

Markii Maamulkii Daalibaan Gabadhii Sii Daayay Ee Ay Dalkeedii Hooyo Ku Guryo-Noqotay Ayay Xusuusatay Ballankii Ay La Gashay Sheekhii Afgaanistaaniga Ahaa, Ballankaas Oo Ahaa In Ay Islaamka Wax Ka Ogaato Taas Oo Ay Ka Ballanqaaday Sheekha Intii Aan Lasoo Dayn Ka Hor, Waxay Bilawday Inay Quraanka Akhrido Iyo Inay Diinta Islaamka Wax Ka Ogaato, Waxay Diinta Islaamka Diraasaynaysay Mudo 2 Sanno Iyo Badh Ah, Muddadaas Gudaheeda Waxa Ay Gashay Jawi Rawxaani Ah Iyo Nolol Qabow, Waxay Dareentay Inay Joogto Figta Sare Ee Calool-Xaadhnaanta, Niyad-Wanaaga, Shafaafiyadda, Dabci Dabacsanaanta, Nafis-Dareenka Iyo Wanaag Jaceylka, Waxa Kale Oo Ay Xustay In Kutubtii Ugu Horreysay Ee Ay Akhriday Uu Kamid Ahaa Kitaab Uu Qoray Sheekh Sayid Qudub Ilaahay Ha U Naxariistee, Kitaabkaas Oo La Yidhaa: Macaalim-Fi-Dariiq, Mudo Yar Kadibna Gabadhani Waxay Gashay Diinta Islaamka.

“Jidkii Hanuunka“ Qisooyinkii ay Ku soo Islaameen Shakhsiyaad Adduunka Caan ka Ah Waa Buug uu Qoray Qoraa Aaden Daahir Cabdilaahi (Aaden Cade) Qaybtii 12aad


Jawaab Celintii Laga Sameeyay Islaamidii Yvonne Ridley:

Markii La Maqlay Ee Uu Baahay Warka Sheegaya Inay Yvonne Ridley Gashay Diinta Islaamka Ayay Warbaahintii Galbeedku Gaar Ahaan Tii Ingiriisku Bilawday Weeraro Toos Ah Oo Ay Wax Kaga Sheegayso Shakhsiyadda Inantan, Waxay Ku Tilmaameen Inuu Asiibay Cudur Maskaxda Ku Dhaca Oo Dadka Haleela Marka La Afduubto Kadib, Cudurkaas Oo Ah Inuu Qofku Ku Xidhmo Lana Tacaadufo Dadkii Afduubtay, Balse Yvonne Ridley Waxay Caddaysay Inaanay La Xidhiidhin Si Gaar Ahna Aanay Ugu Tallaalmin Cid Ka Tirsan Askartii Xidhay Ee Daalibaanka, Sidoo Kale Waxa Jiray Hanjabaado Iyo Cago-Juglayn Badheedh Ah Oo Loogu Sheegay Yvonne Ridley In La Dili Doono, Waxaasoo Dhib Iyo Goodis Ahi Waxba Kamay Bedelin Majirihii Nololeed Ee Yvonne Ridley, Waxana Ay Ku Tilmaamtay Wax Inta Badan Loo Gaystay Hablaha Qayrkeed Ah Ee Islaamka Ah Kuna Nool Dunida Reer Galbeedka.

Waxqabadkii Yvonne Ridley:

Yvonne Ridley Kuma Ay Koobnaan In Ay Iyadu Islaamtay Oo Kali Ah Balse Waxay Bilawday Inay Fidiso Diinta Islaamka, Inay Wacdi Iyo Waano U Jeediso Haweenka Muslimiinta Sidoo Kale Waxay Maqaalo Iyo Qoraallo Dhaadheer Ka Diyaarisay Qaddiyado Islaamka La Xidhiidha Oo Ay Kaga Soo Horjeeddo Dadkana Uga Digayso Warbaahinta Reer Galbeedka Iyo Dhaqamada Silloon Ee Gaalada, Yvonne Ridley Waxay Ka Qayb Gashay Bandhigii Waxqabad Ee Tobnaad Ee Shirwaynaha Ururka Caalamiga Ah Ee Dhalinyarta Islaamka, Maalintaas Waxay Tidhi: "Maanta Waxaan Akhriyay Qaar Kamid Ah Wargeysyada Masar, Waxaan Ku Arkay Wasiirka Dhaqanka Iyo Saqaafada Oo Ku Tilmaamay Dumarka Xijaabka Xidhaa Inay Yihiin Kuwo Dambeeya Oo Aan Caalamka La Socon, Sidee Ayuu Wasiir Muslim Ahi Ugu Dhiiradaa Hadaladan Oo Kale? Sidee Ayay Se Ragga Masar Uga Aamusaan Oo Ay U Damqi Waydaa Arrintani, Maxay Wasiirka U Deedafayn Waayeen Oo Ugu Hiilin Waayeen Sunnada Iyo Hablaha Xijaaban Ee Sharaftooda Meel Lagaga Dhacay", Yvonne Ridley Sidoo Kale Waxa Ay Cambaaraysay Dawlada Tuunis Oo Ay Ku Sheegtay Inay Xidh-Xidhay Dumarka Xijaabka Qaata Iyo In Ay Suuqa Kaga Xayuubiso Hablaha Asturan Xijaabka, Arrintaana Waxay Ku Tilmaantay Warbaahintana U Sheegtay Inay Tahay Meel-Kagadhac Iyo Sharaf-Rid Kasoo Horjeedda Bani'aadanimada Iyo Xorriyadda, Waxa Kale Oo Ay Aad Gaashaanka Ugu Daruurtay Islamarkaana Deedafaysay Haweenka Gaalada Ah Ee Dalxiiska U Yimaada Dalka Tunis Oo Qaawanaan, Anshax-Xumo, Sino Iyo Khamri La Yimaada Xeebaha Dalka, Dawladuna Ku Taageersantahay Oo Aanay Waxba Ka Odhan.

Yvonne Ridley Waxay Aad Uga Hadashay Waxna Uga Qortay Qaddiyada Falastiin Iyo Dulmiga Ay Yuhuudu Ku Hayso, Waxay Maqaalo Kale Ka Qortay Xasuuqii Iyo Dabargoyntii Ay Dawlada Ruushku U Gaysatay Shacabka Jeejniya Iyo Sawiradii Kartoonka Ahaa Ee Ay Saxaafada Denmark Ku Aflagaadaysay Nebi Muxamed Naxariis Iyo Nabadgalyo Korkiisa Ha Ahaatee, Maadaama Oo Ay Ahayd Saxafiyad Aad U Firfircoon, Waxa Ay Maqaaladeeda Iyo Qoraaladeedaba Ugu Hiilisay Diinta Islaamka Iyo Qaddiyadaha Muslimiinta.



Yvonne Ridley Waagii Ay Islaamtay Kadib

“Jidkii Hanuunka“ Qisooyinkii ay Ku soo Islaameen Shakhsiyaad Adduunka Caan ka Ah Waa Buug uu Qoray Qoraa Aaden Daahir Cabdilaahi (Aaden Cade) Qaybtii 13aad

Cat Steven

(Yuusuf Islaam)

Kat Steven Demetri Waxa Uu Dhashay July 1947-Kii, Waxa Iska-Dhalay Aabe Giriig Ah Iyo Hooyo Swedish Ah, Waxa Uu Ku Koray Xaafadda **West-End** Ee Magaalada London Kadibna Waxa Uu Noqday Hoobal Amma Fannaan Caan Ah Oo Si Aad Ah Looga Qaddariyo Carriga Ingiriiska, Inkasta Oo Aabihii Ahaa Oday Giriig Ah Oo Haystay Diinta Kiristaanka Gaar Ahaan Mad-Habka Otodhogos (Orthodox) Laakiin Kat Steven Waxa Uu Waxbarashadiisa Ka Bilaabay Iskuul Ama Madarasad Haysatay Mad-Habka Kale Ee Kaatoolik (Catholic), Mr.Steven Waxa Uu Ku Koray Nolol Fiican Iyo Jawi Faneed, Waxa Uu Aad U Xiisayn Jiray Fanka Iyo Heesaha Waxana Uu Noqday Hoobal La Jecelyahay, Waxa Uu Soo Saaray 8 Album Oo Dahabi Ah Oo Isku Xiga, Heesihiisuna Waxay Caan Ka Noqdeen Ingiriiska Iyo Maraykanka, Qoyskiisa Oo Dhami Waxay Haysteen Diinta Kiristaanka, Kat Steven Markii Uu Islaamay Kadib Isagoo Ka Warramaya Diintii Uu Kusoo Barbaaray Waxa Uu Yidhi: “Diinta Kiristanku Waxay Ahayd Diinta Kali Ah Ee Aan Bartay, Sida Aynu Ognahayna Qofku Waxa Uu Dhashaa Isagoo Toosan Balse Aabihii Iyo Hooyadii Ayaa Kiristan Ka Dhiga Ama Yuhuudi Ama Dab-Caabud, Sidaa Darteed Diinta Kiristanku Waxay Ahayd Diinta Kali Ah Ee Aabahay Iyo Hooyaday Igu Barbaariyeen Ee Aan Ku Soo Koray, Waxa La I Baray In Ilaahay Jiro Laakiin Aan Si Toos Ah Loola Xidhiidhi Karin, In Aanay Suurtogal Ahayn In Alle Lala Xidhiidho Hadii Aan Loo Sii Marin Ciise, Waana Albaabka Kali Ah Ee Aynu Ilaahay Kula Xidhiidhi Karno, Inkastoo Aan Qayb Ahaan Ku Qanacsanaa Fikradan Hadana Si Dhamaystiran Caqligaygu Ugumuu Bogin, Waxaan Fiirin Jiray Taallooyinka Ama Sanamada Lagu Matalay Ciise Kolkaas Ayaan U Arki Jiray Dhagxaan Aan Nolosha Waxba Ka Ogayn, Fikradda Saddexda Ilaah Ama Saddexaynta Ilaahay Ee Aannu Aaminsanayn Ayaan Ku Dawakhi Jiray Oo Aan La Yaabi Jiray Sida Ay Macquul U Noqon Karto, Laakiin Kuma Aan Murmi Jirin Doodna Kamaan Keeni Jirin Anoo Qadarinaya Ama Xaqdhawraya Aabahay Oo Diintan Haystay, Balse Si Tartiib Tartiib Ah Ayaan Uga Fogaanayay Diintan Iyo Waxyaabaha Ay Rumaysantahayba Anoo Ku Wareeray Awgeed, Kadib Waxaan Isaga Leexday Dhanka Fanka, Heesaha Iyo Muusikada, Noloshan Cusubi Waxay I Muquursiisay Badwaynteeda Quruxda Iyo Fitnada, Waxana Ay Noqotay Waxa Kaliya Ee I Mari Jiray,Hantida, Maalka Iyo Lacagtuna Waxay Noqdeen Yoolkayga Kali Ah Anoo Ku Dayanaya Nin Kamid Ahaa Abtiyaashay Oo Maalqabeen Ahaa Maalkana Aad U Jeclaa, Dabcan Dadka Aan La Noolaana Waxay Si Dadban Uga Qaybqaateen Inaan Sidan U Lacag Jeclaado Sababtoo Ah Waxay Ahaayeen Dad Waxa Kali Ah Ee Ay Aaminsanyihiin Yahay Lacag Iyo Hanti.

Intaa Kadib Waxaan Doortay Jidkaygii, Waxaan Go’aansaday In Maalku Noqdo Hadafkayga Kali Ah, Noloshaydanina Noqoto Tii Aan Ku Gaadhi Lahaa Meel Sare, Markii Aan Marxaladdan Marayay Waxaan Ku Dayan Jiray Fanaaniinta Waawayn Ee Dunida Kuna Caanbaxday Qoob-Ka-Ciyaarka (Pop Music), Waxaan Dhex Muquurtay Noloshan Aduunyo

Anoo Adeegsanaya Awoodayda Oo Dhan, Waxanan Soo Saaray Oo Soo Bandhigay Heeso Badan, Balse Markii Aan Lacagaystay Waxa Iga Dhex Bixi Jiray Dhawaaq Bani'aadanimo Oo Igu Dhiirigalinaya Inaan Dadka Danyarta Ah Caawiyo, Waase Bani'aadam Iyo Caadadii'e Waxa Aan Marnaba Iga Madhnayn Korodhsi Iyo Damac, Mashruucan Aan Galay Ee Fanka Waxaan Ka Gaadhay Guul Aad U Balaadhan 19-Kii Sano Ee Ugu Horreeyayba, Warbaahinta Ayaa Sawirkayga Iyo Warkayga Qaadaa Dhigi Jirtay, Waxay Iga Dhigeen Mucjiso Xilliga Ka Wayn,Iskadhaaf Xilliga'e Mucjiso Nolosha Ka Horreysa, Habka Kali Ah Ee Aan Kaga Gudbi Karayay Xudduda Xilliga Islamarkaana Aan Ku Gaadhi Karayay Awoodaha Xad-Dhaafka Ahi Waxay Ahayd Inaan Dhex Muquurto Badwaynta Khamriga Iyo Maandooriyeyaasha".

"Jidkii Hanuunka" Qisooyinkii ay Ku soo Islaameen Shakhsiyaad Adduunka Caan ka Ah Waa Buug uu Qoray Qoraa Aaden Daahir Cabdilaahi (Aaden Cade) Qaybtii 14aad

MaroodiJeex 07 July 2014 Buugan Jidka Hanuunka Ee Uu Qoray **Qoraa Aaden Daahir Cabdilaahi (Aaden Cade)** Ayaa Qoraagu Ku Soo Koobay Qisooyinkii Ay Ku Soo Islaameen Shakhsiyaad Adduuka Caan Ka Ah .

Buuga Ayaa Ka Kooban 226 Bogg Oo Qoraagu U Qeybiyey Tusmadda Buuga , Hibayn, Mahadnaq , Odhaahda Buuga Laga Yidhi, Gogol Dhig Iyo Iyo Cutubyada Buugu Ka Kooban Yahay..

Buuga Ayaa Haatan Qoraagu Daabacay Si Aad Macluumaad Dheeraad Ah Uga Hesho La Xidhiidh Qoraaga Oo Telefankiisa Gacantu Yahay **63 44 15 022 .**

© Xuquuqda Daabacaada Iyo Qoraalku Waxay Gaar U Tahay Qoraaga Buuga.

Baadhiddii Xaqiiqada:

Kadib Markii Uu Kat Steven Horumar Balaadhan Ka Gaadhay Noloshii Maaddiga Ahayd, Guulo Badana Uu Ka Soo Hooyay Fankii Iyo Heesihii Ayuu Xanuunsaday Waxana Ku Dhacay Xanuunka Loo Yaqaano Qaaxada (Tb), Waxa La Dhigay Cusbitaalka Halkaas Oo Uu Muddo Dhul-Yaal Ku Ahaa, Intii Uu Dhakhtarka Jiifay Ayuu Ka Fekeray Xaaladda Uu Haatan Ku Suganyahay Iyo Noloshii Uu Soo Maray, Waxana Uu Iswaydiiyay Su'aalahan: Ma Waxaan Ahay Jidh Kali Ah? Ma Waxa Uu Xil Iga Saaranyahay Inaan Jidhka Oo Kali Daryeelo?, Maxaan Sariirtan U Dul Jiifaa?, Isagoo Ka Hadlaya Xaaladdan Waxa Uu Yidhi: "Waxaan Is Waydiiyay Su'aalahan Iyo Kuwo Kale, Xanuunkan Iyo Musiibadan Igu Dhacdayna Waxay Ii Noqotay Nasteex Aan Kaga Fekero Noloshayda Iyo Sida Ay U Socotay Oo Dhan, Waagaa Waxa Ay Dadku Aad U Galayeen Caqiidooyinka Bariga Eeshiya, Waxaan Bilaabay Inaan Wax Ka Akhriyo Caqiidooyinkaas, Waa Markii Ugu Horreysay Ee Aan Ka

Fekero Geerida Waxaanan Ogaaday In Nafaha Ama Ruuxuhu Ay U Gudbayaan Nolol Kale Ee Aanay Ku Koobnaanayn Noloshan Aduunyo Oo Kali Ah, Waxaan Bilaabay Inaan Kasbado Caadooyin Iyo Dhaqamo Rooxaani Ah Sida Fekeridda Iyo U Fiirsiga, Waxaanan Rajo Wayn Ka Qabay Inaan Ku Suganahay Bilawgii **Jidkii Hanuunka**, Waxaan Noqday Qof Nabaat-Cune Ah Oo Jecel Khudradda Iyo Maxsuulka Dhirta (Vegetarian) Si Jidhkaygu Ugu Naaxo , Waxanan Daawan Jiray Ubaxa Si Naftaydu Ugu Dagto Uguna Nasato, Balse Waxa Ugu Muhiimsan Ee Aan Xilligaa Ka Faaiiday Waxa Uu Ahaa Inaan Ogaaday Inaanan Ahayn Jidh Oo Kali Ah Ee Aan Leeyahay Ruux Iyaduna U Baahan In La Daryeelo.

Heesahaygii Aadbay U Shaaceen, Caanimadaydii Iyo Fankaygiina Aadbay U Tisqaadeen, Dhanka Kalena Waxa Gudahayga Ka Jiray Dareen Xaqiiqo Raadis Ah Iyo Anoo Noloshayda Iyo Aayahayga Diineed Ku Mashquulsanaa, Waagaa Waxaan Ku Qancay Diinta Buudiyiinta (Budism) Oo Aan U Arkayay Inay Tahay Diin Fiican Oo Heer-Sare Ah Balse Waxa Ii Cuntami Wayday Inaan Aduunyada Ka Dhex Baxo Oo Aan Cibaado Kaliya U Go'o, Markastana Aan Dhex Fadhiyo Macbadka Iyo Mixraabka Buudiyada Naftaydana Aan Ka Xidh-Xidho Caalamka Sababtoo Ah Waxaan Ahaa Nin Aduun Jecel Oo Raba Inuu Shaqaysto Dhana Caqiido Sax Ah Helo, Waxaan Isku Dayay Inaan Baadidii Iga Maqnayd Oo Ahayd Caqiido Sax Ah Oo Aan Ku Dago Aan Ka Raadiyo Cilmi Falagga, Burjiga Iyo Caqiidooyinka Kale, Xilligaa Se War Kamaan Hayn Islaamka, Waxase Aan Diinta Islaamka Ku Ogaaday Hab Mucjiso Ah,Walaalkay Ayaa U Safray Qudus, Waxa Uu Soo Arkay Masjid Al-Aqsa Iyo Dhaqdhaqaaqa Rooxaaniga Ah Ee Ka Socda, Waxa Uu La Yaabay Masaajidkan Oo Ahaa Goob Mawjado Dad Ahi Ay Usoo Cibaado Tagaan, Hadh Iyo Habeena Aan Laga Faaruqin, Taasina Waxay Ahayd Mid Uu Kaga Duwanaa Macbadadii Kiristaanka Iyo Yuhuuda Oo Ahaa Kuwo Inta Badan Iska Faaruq Ah Ama Laba Saddex Wadaad Iska Dhex Fadhiyaan, Walaalkay Markii Uu Soo Noqday Waxa Uu Hadyad Ahaan Iigu Keenay Kitaab Quraan Ah, Inkastoo Aanu Islaamin Hadana Waxa Cajabiyay Kitaabkan Waxana Uu Dareemay Inaan Ka Heli Doono, Markii Aan Kitaabkii Quraanka Ahaa Helay Waxaan Ka Dhex Helay Hanuun, Waxa Uu Iiga Waramay Xaqiiqada Jiritaanka, Hadafka Nolosha, Ujeedada Ka Dambaysay Abuuridaydii Iyo Halkii Aan Ka Imi!!!

Markii Aan Hubsaday Ee Aan Yaqiinsaday In Diintani Tahay Mid Dhab Ah, Xaqiiqadeeduna Ka Duwantahay Fikradaha Reer Galbeedka, Inay Tahay Diin Waxqabad Ah (Practical) Ee Aanay Ahayn Khuraafaad Qofku Iska Aamino Marka Uu Gaboobo Sida Diimaha Kale, Waxaan Aad Ugu Mashquulsanaa Xidhiidhka Ka Dhexeeya Ruuxda Iyo Jidhka Waxaanan Ogaaday Inaanay Kala Maarmin, Waxa Kale Oo Aan Ogaaday In Ay Innagu Waajib Tahay In Aynu U Hogaansano Rabitaanka Ilaahay, Inaad Noqoto Qof Diin Leh Oo Cibaadaysanaya Adoo Nolosha Aduunyadana Aan Ka Faquuqmin, Waxaan Fahmay In Wax Kastaa Yahay Abuurkii Alle Iyo Farsamadiisii, In Aan Ilaahay Hurdo Iyo Lulo Toona Qabanin, Waxaan Ka Tanaasulay Kibirkii Iyo Islawaynidii Igu Jirtay Sababtoo Ah Waxaan Ogaaday Cidii I Abuurtay, Waxaanan Garwaaqsaday Sababta Dhabta Ah Ee Ka Dambaysay Jiritaankayga, Kitaabkii Quraanka Ahaa Ayaan Aad U Akhriyay Xataa Waxaan Ogaaday Shanta Salaadood, Sakada , Soonka, Xajka Iwm, Sidaa Darteed Gudaha Waxaan Ka Ahaa Muslim Maadaama Oo Aan Ilaahay Jiritaankiisa Iyo Kalinimadiisa Ogolaaday Balse Cidna Uma Aan Sheegin Inay Diintani I Qancisay Oo Aan Aad Uga Helay".

“Jidkii Hanuunka“ Qisooyinkii ay Ku soo Islaameen Shakhsiyaad Adduunka Caan ka Ah Waa Buug uu Qoray Qoraa Aaden Daahir Cabdilaahi (Aaden Cade) Qaybtii 15aad

Islaamiddii Kat Steven:

Kat Steven Waxa Uu Yidhi: “Intaa Ka Dib Waxaan Isu Diyaariyay Inaan Sidii Walaalkay Oo Kale Qudus U Safro, Anoo Masaajidka Agtiisa Fadhiya Ayuu Nin Ii Yimid Waxa Uu I Waydiiyay, Maxaad Ahayd? Waxaan Ugu Halceliyay, Waxaan Ahay Stevens, Isagoo La Yaaban Ninkan Cadaanka Ah Ee Kalidii Masaajidka Hor Fadhiya, Ayuu Mar Labaad I Waydiiyay, Oo Maxaad Doonaysaa?, Markanna Waxaan Ugu Jawaabay, Waxaan Ahay Muslim!, Waxyar Kadiba Waxa La Galay Salaad, Safafkii Muslimiinta Ayaan Galay Anigoo Isku Dayay Inaan Sameeyo Fal Kasta Oo La Sameeyo Kuna Dayanaya Dhaqdhaqaaqa Dadka Waayo Salaadda Waxba Kama Aan Aqoonin Kolkaas, Kadib Markii Aan Dhamaystay Safarkaygii Qudus Waxaan Ku Soo Laabtay Magaalada London, Waxaan Kula Kulmay Gabadh Muslimad Ah Oo La Yidhaahdo Nafiisa, Waxaanan U Sheegay Inay Lexo-Jeclo Iga Hayso Diinta Islaamka Islamarkaana Aan Danaynayo In Aan Si Toos Ah Usoo Galo, Nafiisi Waxa Ay I Tustay Masjidka La Yidhaa New Richnet, Masaajidkii Ayaan Imid Maalin Jimce Ah Kadib Markii Salaadii Laga Baxay Ayaan Imaamka U Tagay Waxaanan U Sheegay Inaan Si Dhab Ah Diinta Islaamka Ugu Soo Biirayo, Imaamki Waa Uu Isoo Dhaweeyay, Halkaas Ayaana La Iigu Laqimay Ashahaadda Oo Aan Si Qumaati Ah Ugu Islaamay, Xilligaa Aan Islaamay Waa Sannad Iyo Badh Kadib Markii Kitaabka Quraanka Ah Aan Akhriskiisa Iyo Wax-Ka-Fahankiisa Bilaabay Waana 1977-Kii, Halkaas Ayaan Kusoo Gaba-Gabeeyay Kibirkii Iyo Islawaynidii, Halkaas Ayaan Kaga Fakaday Shaydaankii I Watay, Waxaanan Noloshayda U Jiheeyay Dhinac Kali Ah Oo Ah Dhanka Alle, Shayga Kaliya Ee Igu Dhiirigaliyay Sababtana U Ahaa Inaan Islaamo Waa Quraanka Oo Aan Akhriyay, Markasta Oo Aan Akhriyana Aan Fahmi Jiray Inaanu Ahayn Hadal Ama Qoraal Dad Sameeyeen, Quraanku Waxa Uu Ka Waramayaa Xaqiiqooyin Dhab Ah Iyo Waxyaabo Macquul Ah Oo Maanka Dadka Si Qumman Ula Jaanqaadaya, Diimihii Kale Ee Aan Soo Tijaabiyay Oo Dhan Waxa Ilaahay Loo Sii Mari Jiray Cid Kale (Tawasul), Hasa-Ahaatee Quraanku Waxa Uu Si Toosa Oo Aan Cidi Idiin Dhaxayn Kuugu Xidhayaa Allaha Kawnka Abuuray, Cid Kasta Oo Laga Dhigto Jaranjaro Iyo Isku-Xidhe Makhluuqa Iyo Ilaahay Ahna Waxa Uu U Yaqaanaa Daaquut.

Dhamaan Acmaashayda Ilaahay Oo Kali Ah Ayaan Wax Kaga Rabaa, Qisadaydan Aan Kusoo Islaamayna Waxaan Rabaa Inay Waano Iyo Wax-Ku-Qaadasho U Noqoto Dadka, Waxa Kali Ah Ee Iga Xusuusin Ah Inaanan Qof Kaliya Oo Muslim Ah La Kulmin Kahor Intii Aanan Ku Qancin Dhabnimada Quraanka, Quraankuna Ahaa Sababta Kali Ah Ee Ka Dambaysa Hanuunkayga, Ilaahay Ha Ina Waafajiyo Raacida Jidka Rasuulka Nnkh, Sidaas Ayay Nolosheena Aduunyo Iyo Tan Aakhiraba Ku Badbaadayaan.

*** *** ***



Kat Steven Xilligii Uuhoobalka Ahaa



Kat Steven Waagii Uu Soo Islaamay Kadib

“Jidkii Hanuunka“ Qisooyinkii ay Ku soo Islaameen Shakhsiyaad Adduunka Caan ka Ah Waa Buug uu Qoray Qoraa Aaden Daahir Cabdilaahi (Aaden Cade) Qaybtii 16aad

Adiga Yaa Kuu Dambi-Dhaafi?!

Isxaaq Waxa Uu Ahaa Wadaad Haysta Diinta Kiristanka, Waxa Uu Dhashay 3/5/1953-Kii, Magaciisa Oo Saddexani Waa Isxaaq Hilaal Masiixa, Waxa Uu Dhalasho Ahaan Kasoo Jeedaa Dalka Masar, Waxa Dhalay Laba Waalid Oo Haystay Mad-Habka Kaatoliga, Aabihii Iyo Hooyadii Waxa Ay Qalbigiisa Ku Beereen Nacaybka Iyo Ximinta Islaamka Iyo Muslimiinta.

Isxaaq Waxa Uu Diraaseeyay Noloshii Nabiyada, Baadhitaankaas Uu Ka Sameeyay Noloshii Nabiyadu Waxa Ay Maankiisa Ku Dhalisay Su'aalo Aanu Hore Isu Waydiin Iyo Shaki Badan, Taas Oo Keentay In Uu Masalooyin Shaki Abuuraya Dhex Keenay Ardaydii Kiniisadda Wax Kala Baran Jirtay.

Kadib Markii Uu Si Fiican U Bartay Diinta Kiristanka Waxa Loo Magacaabay Madaxa Kiniisadda Suuhaaj (Suuhaaj Waa Tuulo Masar Ku Taalla), Waxa Kale Oo Loo Magacaabay Madax Sharafeed Ka Tirsan Urur Caan Ah Oo Dadka Kiristaameeya Islamarkaana Ka Shaqeeya Dalalka Carabta Gaar Ahaan Wadamada Khaliijka, Sidaas Oo Ay Tahay Hadana Isxaaq Waxa Uu Cilmi-Baadhis Ku Sameeyay Diinta Islaamka, Waxa Uu Xidhiidh Qarsoon La Lahaa Shaqsiyaad Muslimiin Ah.

Markii Uu Diyaarinayay Buuggii Qalinjabinta Ee Uu Ku Qaadanayay Shahaadada Masterta Waxa Loo Diray In Uu Wax Ka Qoro Mawduuca Ah "Is-Barbar-Dhigga Diimaha", Buuggani Waxa Uu Ku Qaatay Muddo Afar Sano Ah, Macalinkii Ka Saxayay Buuggu Dhowr Jeer Ayuu Ku Celiyay Sababta Oo Ah, Waxa Uu Buuggiisa Ku Xusay In Nebi Muxamed Uu Ahaa Qof Aan Waxxna Qorin Waxna Akhriyin Hadana Nebinimadiisu Run Tahay, Sidoo Kale Waxa Uu Buugga Ku Sheegay In Diinta Islaamku Sii Sheegtay In Nebi Ciise Iman Doono, Markii Dambe Buuggiisii Waxa Loo Gudbiyay Kiniisadda Angalikaanka Ee Qaahira Halkaas Oo Baadhitaan Iyo Sixitaan Sagaal Saacadood Qaatay Kadib Uu Baadarigii Kiniisadda Haystay Ku Go'aamiyay In Buugga Laga Qaado Islamarkaana La Kansalo.

Wixii Intaa Ka Dambeeyay Waxa Uu Bilaabay In Uu Raadiyo Xogo Dheeraad Ah Oo Islaamka Ku Saabsan, Waxa Uu Baadigoobay Kutub Badan Oo Muslimiintu Qortay Si Uu U Ogaado Xaqiiqada, Laakiin Baadarigii Kiniisadda Joogay Aad Ayuu U Daba-Gali Jiray Dhaqdhaqaaqiisa Waana Lagu Adkeeyay In Xoriyad U Helo Baadhitaanka Xaqiiqada, Isagoo Ka Warramaya Dhacdadii Koowaad Ee Ku Dhiirrigalisay Islaamka Waxa Uu Yidhi: "6/8/1978-Kii Anigoo Ku Socda Xuska Dhalashadii Maryam (Waa Nebi Ciise Hooyadii) Oo Ka Dhacayay Magaalada Al-Iskandariya Oo Aan Markaas Uun Baska Taga Al-Cabbaasiya Ka Fuulay Istaanka Al-Cataba Islamarkaana Aan Xidhanahay Dharka Baadariyadu Caanka Ku Yihiin, Ayuu Baskii Soo Galay Wiil Yar Oo Kow Iyo Toban Jir Ahi, Wiilku Waxa Uu Iibinayay Kutub Yaryar, Dhammaan Dadkii Baska Saarna Kutubtii Ayuu U Qaybiyay Aniga Mooyaane, Runtii Aad Ayaan U Xiisaynayay Kutubtaa Uu Qaybinayay, Wiilkii Ayaan Waydiiyay: Maxaad Aniga Iigu Dhiibi Wayday Kutubtan?, Waxa Uu Af Buuxa Iigu Hal Celiyay: Dee Baadari Ayaad Tahay, Wiilkii Baskii Waa Uu Ka Dagay, Anna Waan Ka Daba

Dagay, Kolkaasuu Isagoo Iga Cabsanaya Cararay, Anna Waan Ka Daba Cararay Aniga Oo Is Ilawsan, Waxoogaa Markii Aan Eryanayay Ayaan Gaadhay Waxaanan Kasoo Qaatay Laba Kitaab Oo Kuwii Uu Dadka U Dhiibiyay Ah.

Markaan Gaadhay Kiniisaddii Ee Aan Qolkaygii Galay Ayaan Soo Saaray Mid Kamid Labadii Kitaab, Mise Waa Juz Camma, Waxay Ahayd Markii Iigu Horraysay Ee Aan Gacanta Ku Dhigo Si Fiican Islaamka U Khuseeya, Waan Furay Waanan Akhriyay Islamarkiibana Waxa Ay Ishaydu Ku Dhacday Quluwallaha (Suurat Al-Ikhlaas), Markii Aan Suuraddan Akhriyay Naftaydu Waxa Ay Dareentay Deggenaansho Iyo Raaxo, Afkayguna Aad Ayuu U Macaansaday, Waan Ku Celceliyay Illaa Aan Ka Xifdiyay, Anigoo Sidaa Ugu Celcelinaya Ayuu Ii Yeedhay Mid Ka Mid Ah Baadariyadii Kiniisaddu, Waan Soo Baxay Anoo Ku Qaylinaya **"Qul Hu Wallaahu Axad"** Oo Aan Is Ogayn, Baadarigii Waxa Uu Igu Yidhi: Maxaad Tidhi?, Waxaan Ugu Jawaabay: Waxba Maan Odhan".

Sida La Ogyahay Wadaadada Kiristaanku Waa Ay Kala Sarreeyaan Waxaanay Kala Leeyihiin Darajooyin Waxayna Ku Kala Qaybaan Hawlo Kala Duwan, Waxa Ugu Sarreeya Boobka (Pop) Waxana Ugu Hooseeya Wadaadka Caadiga Ah Ee Kiniisada Ka Adeega, Noocyada Wadaadada Kiristaanka Waxaa Kamid Ah Wadaad Kiniisada Fadhiya Oo Dadka Caadiga Ah Ee Dambaaba U Dambi Dhaafa, Todobaadkiiba Hal Maalin Ayaa Loo Yimaaddaa Oo Loo Sheegtaa Dunuubtii La Galay Iyadoo Laga Rabo Dambi Dhaaf, Isaguna Intuu Qiiq Shito Oo Maro Cad Oo Biyo Saafi Ah Uu Ku Qooyay Qofka Cagaha Iyo Meelo Jidhka Kamid Ah Kaga Masaxo Mucatabkana Ku Wareejiyo Waxna Uu Akhriyo Ayuu Qofkii Ku Yidhaahdaa Sidaa Ayaa Dambigaagii Lagu Dhaafay, Hadda Waxaad Tahay Nadiif Bilaa Dambi Ah, Sidaas Oo Kale Wadaadkani Kiniisadii Uu Joogay Waxa Uu Ka Ahaa Wadaadka Dadka U Dambi-Dhaafa, Isagoo Mar Kale Ka Sheekaynayana Dhacdadii Labaad Ee Uu Islaamka Ugu Soo Dhawaaday, Waxa Uu Yidhi: "Maalin Maalmaha Kamid Ah Ayaa Waxa Ii Timid Gabadh Murugaysan Oo Calaacalaysa, Waxay Tidhi Wadaadoow Saddex Jeer Ayaan Gefay, Maantana Hortaada Ayaan Ka Qiranayaa Dambiga Aan Galay, Waxaanan Ballan Qaadayaa Inaanan Dib Ugu Laabanayn Ee Ii Dambi Dhaaf! Sida Caadiga Ahi Waxay Ahayd Inaan Kaco Oo Birta Mucatabka Wajigeeda Dhawr Jeer Kuwareejiyo Oo Aan U Dambi Dhaafo, Balse Gacantaydiba Mucatabkii Ayay Kor U Qaadi Kari Wayday, Waxa I Galay Cabsi Iyo Dareen Igu Cusub, Waxanan Is Waydiiyay, Bal Waatan Oo Adigu Dadka Ayaad U Dambi-Dhaaftaaye Adiga Yaa Kuu Dambidhaafaya Oo Gefafka Aad Gasho Kaa Nadiifinaya?, Waxa Markiiba Maskaxdaydu Isugu Jawaabtay, **Ilaaha Kalida Ah,** Waxaan Dareemay In Cid Kasta Oo Sarreysa Ay Ka Sarreyso Cid Kale Oo Ka Wayni, Waa Ilaah Kali Ah Oo Isaga Uun La Caabudo.

Waxaan U Tagay Wadaadkii Aniga Iga Sarreeyay, Waxaan Ku Idhi: Wadaad Waatan Oo Anigu Dadka Ayaan U Dambi-Dhaafaaye, Aniga Yaa Ii Dambi-Dhaafaya?, Waxa Uu Iigu Jawaabay, Waxa Kuu Dambi –Dhaafaya Boobka Wayn (Papa), Waxaan Mar Labaad Waydiiyay, Oo Boobka Isaga Laftiisu Marka Uu Dambaabo Yaa U Dambi-Dhaafaya?, Su'aashaasi Wadaadkii Way Gubtay Aadna Wuu Uga Xanaaqay, Si Kulul Inta Uu Iigu Qayliyay Ayuu Yidhi: Boobku Maba Dambaabo Oo Waa Macsuum, Sidee Su'aashan Oo Kale Maskaxdaada Ugusoo Dhacdaa?.

Intaa Kadib Warkaygii Waxa Uu Gaadhay Boobkii Waynaa, Boobkina Waxa Uu Amar Ku Bixiyay In Kiniisada Dhexdeeda La Igu Xidho, Indhaha Ayaa La Iga Xidhay, Waa La I Kexeeyay Markii La I Geeyay Qolkii La Igu Xidhayay Wadaad Kasta Oo Meeshaa Joogay Dhangad Ayuu Ila Dhacay Isagoo Ku Dhawaaqaya "Diintiisii Iyo Kiniisadiisii Ayuu Iibsaday… Diintiisii Iyo Kiniisadiisii Ayuu Iibsaday", Waxay Ii Adeegsadeen Dhamaan

Hababka La Isu Jidh-Dilo, Aad Ayay Ii Cadaabeen, Nabaradii Iyo Boogihii Ay Igu Dhigeenna Illaa Hadda Dushayda Ayay Ka Muuqdaan, Waxay Ii Direen Inaan Doofaarada Raaco Oo Aan Daryeelo, Taa Lafteedu Waxay Ahayd Dullayn Iyo Yasid, Saddex Bilood Markii Aan Xidhnaa, Ayaa Maalintii Dambe La Ii Gudbiyay Wadaad Wayn Oo Dadka U Edbiya Hab Diineed, Markaan Wadaadkii U Galay, Waxa Uu Si Lamafilaan Ah Iigu Yidhi: Wiilkaygiiyoow, Ilaahay Ma Dayaco Abaal-Marinta Iyo Ajarka Qof Wanaag Sameeyay Ee Samir Oo Dhibaatada Kugu Dhacdayna Ilaahay Ajar Kaga Dalab, Waxaan Naftayda Hoos Ahaan U Waydiiyay, Niyaw Hadalkani Kitaabka Dahiran (Bible) Kumuu Oolin Horena Wadaad Kiristan Ah Ugamaad Maqline Xaguu Ka Keenay?, Anoo Taa La Yaabban Ayuu Ii Sii Raaciyay Hadal Kii Horeba Igaga Daran Waxana Uu Igu Yidhi: Waxaan Kugula Talinayaa Inaad Sir Yeelato, Afkaagana Aad Ilaashato Ilaa Inta Aad Xaqa Maruun Muujisan Doonto Haba Dheeraatee!!!

“Jidkii Hanuunka“ Qisooyinkii ay Ku soo Islaameen Shakhsiyaad Adduunka Caan ka Ah Waa Buug uu Qoray Qoraa Aaden Daahir Cabdilaahi (Aaden Cade) Qaybtii 17aad

Toloow Muxuu Wadaadku Uga Jeeday Hadaladan?!!!

Anoo Fahmi La’ Ujeedada Wadaadka Iyo Halka Uu Hadaladan Fiican Ka Keenay, Ayaan Maalin Dambe Oo Ay Salaad Hore Tahay Albaabkiisa Garaacay, Markii La Ila Hadli Waayay Cidina Hore Iiga Furi Wayday Ayaan Idan La’aan Kugalay, Waxaaban La Kulmay Wadaadkii Oo Salaadii Subax Tukanaya!! , Naxdin Awgeed Halkii Aan Taagnaa Ayaan Ku Qallali Gaadhay, Markaan Cabbaar Layaabbanaa Ee Aan Eegaayay, Ayaan Markii Dambe Is Idhi Yay Wadaadadii Kiniisada Joogay Arkin Kolkaasaan Albaabkii Usoo Xidhay, Waxyar Kadiba Waxa Uu Ii Yimid Isagoo Gaatamaya Oo Isqarinaya, Isaga Oo Indhihiisa Ilmo Ka Muuqato, Waxana Uu Igu Yidhi:

“*Cuntadaydu Waa Quraanka, Cidlada Waxaan Ka Garabsadaa Tawxiidka Allaha Raxmaanka Ah, Kalinimadana Waxaan Ka Weheshadaa Cibaadada Allaha Kalida Ah Ee Awooda Leh”* Show Wadaadkuba Hore Ayuu U Islaamay Oo Islaamnimada Ayuu Qarsan Jiray!, Waxa Uu Igula Taliyay In Aan Qarsado Baadhitaankan Xaqa Ee Aan Wado Si Aanan Ula Kulmin Ciqaab Iyo Xadhig, Waxana Uu Ii Bixiyay Ibraahiim, Islamarkiibana Waxa Uu La Hadlay Boobkii Waynaa Isagoo U Sheegaya In Aan Ka Noqday Arrintii La Igu Soo Xidhay.

Boobkii Kiniisaddu Waa Uu Aqbalay Codsigii Wadaadka Islamarkaana Waa La I Saamaxay, Waxana La Ii Magacaabay Madaxa Guddiyada Kiristaamaynta Afrika Iyo Galbeedka Eeshiya, Waxa Bishii September Ee 1979-Kii La Ii Diray Dalka Suudaan Si Aan Diinta Kiristanka Ugu Dhex Fidiyo, Waxa Aan Dalka Suudaan Joogay Saddex Bilood, Sida Caadayadu Ahayd, Qof Kasta Oo Naga Aqbala In Uu Kiristan Noqdo Waxa Aannu Siin Jirnay 35,000 Oo Giniga Masar Ah, Marka Laga Tago Kaalmooyinka Kale Ee Agabka Ah, Saddexdaa Bilood Ee Aannu Suudaan Joognay Waxa Aannu Kiristaamaynay 35 Qof Oo U Dhashay Gobolka Waaw Ee Koonfurta Suudaan, Kolkii Dhamaantood Aaan Siiyay Kaalmadii Iyo Lacagtii Loogu Talo-Galay Ayaan La U Sheegay Boobka Ummu-Durmaan (Umm-Durmaan Waa Degmo Ka Tirsan Caasimadda Suudaan Ee Khartoum), Boobkii Waxa Uu Igu Yidhi: Kexee Oo Soo Tusa Goobaha Dahiran (Muqaddasaadka) Kiristanka Ee Masar,

Dhammaan 35-Kii Qofba Waxa Aannu U Samaynay Dal-Kugallo (Visas) Been Ah, Waxa Aannu Laamaha Socdaalka Ee Suudaan Ugu Sheegnay In Ay Yihiin Shaqaale Heshiis Lala Galay Oo Dalka Masar Ku Raaci Doona Geela, Adhiga Iyo Doofaarrada, Sidii Ayaannu Uga Saarnay Dalka Suudaan. Kolkii Safarku Noo Dhamaaday Ee Aannu Masar Nimid Ayaan Is Idhi Bal Nimankii Fiiri, Markii Aan Galay Khankii Ay Ku Jireen, Waxaan Arkay Wax Iga Yaabiyay, Waxa Aan Arkay Nin Kamid Ah Dadkii Aannu Soo Kiristaamaynay, Magaciisana Aannu U Bixinnay Cabdi Masiix Markii Horena La Odhan Jiray Maxamed Aadam Oo Tukanaya Salaaddii Muslimiinta, Waan La Hadlay Waxaan Ku Idhi: Cabdi Masiixoow, Maxaa Kugu Dhacay Sow Tii Aad Diinta Kiristanka Qaadatay?, Waxa Uu Iigu Jawaabay Erayo Qalbigayga Galay, Erayo Cajiib Ah Oo Ah Go'aan Adag Xambaarsan, Waxa Uu Igu Yidhi:

"Waxa Aan Idinka Iibiyay Jidhkayga, Laakiin Qalbigayga, Ruuxdayda Iyo Caqligayga Waxa Iska Leh Ilaaha Kalida Ah Ee Awoodda Leh, Kumana Iibiyo Hantida Aduunyada, Hortiinnana Waxa Aan Ka Qirayaa In Aanu Jirin Ilaah Xaq Lagu Caabudaa Alle Mooyee, Muxammedna Waa Rasuulkii Ilaahay"

Kaddib Saddexdaa Dhacdo Ee Muhiimka Ah Iyo Kuwo Kale, Kadib Markii Aan Arrintan Inbadan Ka Fekeray, Kadib Baadhitaan Xoog Leh Iyo Diraaso Wax-Ku-Ool Ah Oo Aan Ku Sameeyay Diinta Islaamka, Waxa Aan Si Xor Ah Ugu Qancay Inaan Diintan Islaamka Soo Galo, Waanan Islaamay, Balse Inaan Islaamnimadayda Caddaysto Waxa Iga Soo Gaadhay Dhibaatooyin Badan, Sababtoo Ah Waxaan Ahaa Wadaad Kiristaan Ah Taasina Ceeb Ayay Ku Tahay Qolada Kiristanka Ah In La Yidhaahdo Wadaadadiinii Ayaaba Islaamka Galay, Dhib Badan Ayay Ii Geysteen, Xataa Waxa Ay I Kala Dooransiiyeen Inaan Diintan Islaamka Dib Ugasoo Noqdo Iyo In Wixii Hanti Aan Lahaa Lala Wareego, Waanan U Daayay Oo Sidaas Ayay Hantidaydii Oo Dhan Kula Wareegeen, Hantidaydu Xilligaa Waxa Ay Ahayd, 4 Milyan Oo Giniga Masar Ah, Saddex Goobood Oo Dahabka Lagu Iibiyo, Hal Xarun Oo Dahabka Lagu Shiilo Kuna Taallay Xaafadda Yuhuudda, Iyo Fooq Kow I Yo Toban Dabaq Ah Oo Qaahira Ku Yaallay; Intaa Waxa Ii Dheerayd Hanjabaad Iyo Caga-Juglayn Joogto Ah Oo Ay Igu Haysay Kiniisaddu, Waxa Aan Ka Badbaaday Saddex Shirqool Oo La Iigu Talo-Galay In La Igu Dilo, Shirqoollada Waxa Samaynayay Walaalkay Iyo Ilma-Adeerraday, Maalin Maalmaha Kamid Ah Ayay Igu Toogteen Badhtamaha Qaahira, Xabbaddu Waxa Ay Igaga Dhacday Kallida Bidix, Kallidiina Waa La Iga Soo Saaray 7/1/1987-Kii, Intaa Waxa Ka Darnayd Markii Ay Labadaydii Waalid Maqleen In Aan Islaamay, Waa Ay Is Gubeen, Waana Ay Dhinteen, Anigana Waxa Ila Soo Gudboonaaday Dhibaato Caafimaad Darro Oo Iga Haysatay Kallida, Waxa La Igu Sameeyay In Ka Badan 15 Qalliin Oo Aan Midna Lagu Guulaysan, Waana Ilaahay Mahaddii Oo Wax Iila Dhigmaa Ma Jiraan Maalintii Aan Ku Fadhiyay Kursiga Dambi-Dhaafka Ee Gabadhu Ii Timid.

“Jidkii Hanuunka“ Qisooyinkii ay Ku soo Islaameen Shakhsiyaad Adduunka Caan ka Ah Waa Buug uu Qoray Qoraa Aaden Daahir Cabdilaahi (Aaden Cade) Qaybtii 18aad

Michael Sharobezki

“Dood Wanaagga Wiil Muslim Ah Ayaa Sabab U Ahaa Islaamidayda”, Erayadan Ayuu Michael Sharobezki Kusoo Koobay Sababtii Uu Kusoo Islaamay, Lakin Waxa Iswaydiin Mudan, Yuu Ahaa Michael Sharobezki?, Diintee Ayuu Se Haystay? Sidee Se Dooddu U Dhexmartay Isaga Iyo Wiilkan Muslimka Ah?.

Michael Sharobezki Waxa Uu Ahaa Wiil Kasoo Jeeda Azerbaijan , Waxa Uu Ka Dhashay Qoys Haysta Diinta Yuhuuda, Waxa Uu Noqday Wiil Xag-Jir Mitida Ku Ah Yuhuudnimada, Waxa U Hillaaci Jiray Dhiiga Muslimiinta, Isagoo U Hamuumaya Xasuuqa Falastiiniyiinta Ayuu Isku Dayay Dhowr Hawl-Gal Oo Isqarxin Ah Iyo Kuwo Kale Oo Lagu Laynayay Dad Muslimiin Reer Falastiin Ah, Dhanka Mitidnimada Waxa Uu Kala Mid Ahaa Ninkii La Odhan Jiray Baruch Goldishtine Oo Ahaa Ninkii Fuliyay Xasuuqii Ka Dhacay Masjid-Al-Ibraahiimi Ee Caanka Ahaa 1994-Kiina Lagu Laayay Tobanaan Falastiiniyiin Ah Iyagoo Salaad Ku Jira, Wiilkani Waxa Uu Soo Raacay Hawlgaladii Daad-Guraynta Yuhuuda Laga Soo Rarayay Wadamada Aduunka Si Loogu Beero Dhulka Falastiiniyiinta, Waxa La Dajiyay Xero (Camp) La Yidhaa Kurayaat Arbac 1993-Kii, Halkaas Ayuuna Doorbiday Sababtoo Ah Kaamkani Waxa Uu Ahaa Kaamka Ugu Khatarsan Ee Dadka Lagu Baro Sahyuuniyadda Iyo Yuhuud Jaceylka Sidoo Kale Lagu Dhigo Muslim Nacaybka Iyo Carab Diidka, Xerada Ayuu Guri Ka Kiraystay, Michael Sharobezki Intabadan Waxa Uu Ku Mashquulsanaan Jiray Tababar Jidheed Iyo Jimicsi, Waxana Uu Kamid Noqday Dadka Ugu Firfircoon Kaamka, Waxa Uu Ku Biiray Mid Ka Mid Kooxihii Ama Naadiyadii Islaam Nacaybka.

Michael Sharobezki Isagoo Ka Warramaya Waxyaabo Ka Mid Ah Colaaddii Uu Muslimiinta U Hayay Intii Uu Ku Noolaa Kaamka Kurayaat Arbac Waxa Uu Yidhi: *“Maalmahaa Waxaan Rabay Inaan Fuliyo Hawl-Gallo Muslim Nacayb Iyo Carab Diid Ah, Taasina Waxay Ahayd Fikrad Aan Kusoo Koray Intii Aan Joogay Dalkaygii Azerbaijan Islamarkaana Aan Ku Barbaaray Intaan Ku Sugnaa Kaamka Kurayaat Arbac, Kahor Intii Aanan Soo Islaamin, Oo Ahayd Xilli Ay Falastiiniyiintu Hawlgalo Ka Fuliyeen Israel Gudaheeda, Waxaan Dadkii Kaamka Ila Daganaa Kula Taliyay, Hadaad Carabta Guryihiinna Iyo Tuulooyinkiinna Ku Laysaan Wax Macno Ah Ma Samaynayso Ee Hadaad Rag Tihiin Inamariya Aynu Dhulkooda Kusoo Laynee, Ina Keena Aynu Magaalada Khaliil-Ibraahiim Dhamaanteed Soo Xasuuqnee”.*

“Jidkii Hanuunka“ Qisooyinkii ay Ku soo Islaameen Shakhsiyaad Adduunka Caan ka Ah Waa Buug uu Qoray Qoraa Aaden Daahir Cabdilaahi (Aaden Cade) Qaybtii 19aad

Sidee Ayuu Kusoo Islaamay Michael Sharobezki ?
!

Michael Sharobezki Waxa Uu Sheegay Intii Uu Yuhuudiga Ahaa Inkastoo Uu Muslimiinta Iyo Carabta Aad U Necbaa Uguna Qanacsanaa Yuhuudinimada, Hadana Waxa Jiray Shakiyo Badan Oo Maankiisa Ku Jiray Islamarkaana Ay Ka Shaafiyi Waayeen Culimadii Yuhuuddu, Arrimaha Inta Badan Uu Jawaabta U La’aa Ee Uu Iswaydiin Jiray Waxa Kamid Ahaa, Xaqiiqada Kawnka. Mar Kale Isagoo Ka Sheekaynaya Sidii Uu Kusoo Islaamay Waxa Uu Yidhi: *“Markii Aan Soo Islaamay Saddex Sano Kahor Waxaannu Magaalada Khaliiliya Isku Barannay Wiil La Odhan Jiray Waliid Zaluum, Wiilkani Waxa Uu Ahaa Farsamo Yaqaan Baabuurka Ii Hagaajinayay, Markii Aan Ogaaday Inuu Muslim Yahay Ayaan Isagoo Baabuurkaygii Hagaajinaya Baaskoolad Madaxa Kaga Qabtay Uguna Hanjabay Inaan Dilayo, Wiilkii Si Daggan Oo Aan Baqashoba Lahayn Ayuu Iigu Sheegay Bal Horta Inta Aanan Dilin Inaannu Doodno Oo Wax Iswaydiino, Waan Ka Ogolaaday, Dood-Wanaagiisii Iyo Sidii Uu Hadalkiisu Runta Iyo Xaqiiqada Ugu Salaysnaa Ayaa I Qancisay, Waxa Uu Ahaa Wiil Deggan Oo Geesi Ah Islamarkaana Dood Cad, Dhaqankiisuna Wanaagsanyahay.*

Doodii Wiilkani Waxay Igu Abuurtay Inaan Qayb Ahaan Diinta Islaamka Ka Helo, Waxaan Soo Iibsaday Qaamuusyo (Dictionaries) Si Aan U Barto Luqadda Carabida, Wiilkii Saaxiib Ayaanu Noqonay, Maalmihii Dambena Waxaaban Ka Codsaday Inuu I Baro Salaadda, Mudo Kaddibba Waxaan Is Arkay Anoo Dhexdabaalanaya Badwaynta Xaqiiqada, Waxa Aan Ka Bogsooday Shakigii, Waxaabad Mooddaa Waxan Diinta Islaamku Sheegaysaa Inuu Ahaa Wax Aan Ku Dhashay Macnaha Waa Dareemo Iyo Xaqiiqooyin Markasta Maankayga Ku Jiri Jiray, Ugu Dambayntiina Waxa Uu Carrabkaygu Ku Dhawaaqay Ashahaadda Iyo Kalmadda Tawxiidka”.

Michael Sharobezki Markii Uu Islaamay Dhibaatooyin Badan Iyo Cidhiidhi Ayuu Kala Kulmay Dadkii Uu Kaamka La Degganaa, Waxa Uu U Safray Dalkiisii Azerbaijan Oo Ahaa Halkii Qoyskiisu Ku Noolaa Ee Uu Kasoo Jeeday, Hasa Ahaatee Markii Uu U Tagay Qoyskiisii Kalama Uu Kulmin Naxariis Iyo Nolol Ka Fiican Tii Uu Uga Yimid Kaamka, Sababtoo Ah Qoyskiisu Sidii Aynu Hore Usoo Sheegnayba Waxay Ahaayeen Yuhuud Mana Ay Jeclaysan Inay Soo Dhawaystaan Wiilkoodan Muslimka Noqday, Michael Sharobezki Waxa Uu Go’aansaday Maadaama Oo Ay Taladiisu Noqotay Kud Ka Guur Oo Qanjo U Guur Inuu Hadana Kusoo Laabto Dhulkii Uu Ka Tagay, Markan Se Waxa Uu Dagay Magaalada Al-Juush Oo Ah Magaalo Ku Dhex Taala Khadka Cagaaran Una Dhaw Qudusta La Haysto.

Michael Sharobezki Markii Uu Islaamay Waxa Uu Iska Bedelay Magacan Hore Waxana Uu La Baxay MAXAMED AL-MAHDI, Maxamed Al-Mahdi Hadafka Kaliya Iyo Ididiilada Kaliya Ee Uu Ku Raad Joogay Waxa Ay Ahayd Inuu Baasaboorkiisa Iyo Dukumantiyadiisa Ka Bedelo Magacii Hore Ee Ahaa Michael Sharobezki Sababtoo Ah Waxa Uu Rabay Inuu

Xajka Tago, Xukuumada Sucuudiguna Ma Ogola In Dalkeeda Lagusoo Galo Baasaboor Uu Ku Yaalo Magac Yuhuudi.

“Jidkii Hanuunka“ Qisooyinkii ay Ku soo Islaameen Shakhsiyaad Adduunka Caan ka Ah Waa Buug uu Qoray Qoraa Aaden Daahir Cabdilaahi (Aaden Cade) Qaybtii 20aad

Jeffrey Lang



Jeffrey Lang Waxa Uu Ku Dhashay Degmada Bridgeport Ee Gobolka Connect-Cut State Ee Carriga Mareekanka Markii Ay Taariikhdu Ku Aaddanayd 1954-Kii, Waxa Uu Bartay Cilmiga Xisaabta Oo Uu Ka Gaadhay Darajada Phd (Doctor Of Philosophy), Sanadihii U Dambeeyayna Waxa Uu Bare (Professor) Ka Ahaa Jaamacada Kansas.

Waxa Uu Ku Dhex Koray Qoys Kiristan Ah Oo Haysta Diinta Masiixiga, Waagii Uu Ku Jiray Dugsiga Sare Ayuu Maalin Maalmaha Ka Mid Ah Macalinkiisii Xisaabtu Dhigay Cashar Ku Saabsan Sidii Jiritaanka Ilaahay Xisaab Loogu Soo Saari Lahaa, Kaasina Waxa Uu Ahaa Cutub La Dhigi Jiray Oo Caadi Ka Dhex Ahaa Iskuulka, Jeffrey Launch Oo Arrintan Ku Qanci Waayay Islamarkaana Ay U Cuntami Wayday Ayaa Macalinkii Waydiiyay Su’aalo Badan, Kolkii Uu Macalinkii Ku Qancin Kari Waayay Dooddina Dheeraatay Ayuu Macalinkii Eryay Waliba Inta Uu Aad Ugu Hanjabay Ayuu Digniin Culusna Siiyay, Kolkii Uu Gurigoodii Tagay Ee Uu Waalidkii U Sheegay Sidii Wax U Dhaceen Iyo Sababta Looga Soo Eryay Dugsigii Ayay Hooyadii Iyo Aabihiiba Naxeen Aadna Uga Calool-Xumaadeen Wiilkooda Iyagoo U Sheegay Inuu Diintii Ka Baxay Maadaama Oo Uu Arrimaha Noocan Oo Kale Ah Muran Ka Keenay.

Jeffrey Lang Muddo Toban Sano Ah Ayuu Ku Sugnaa Xaaladdii Mulxidnimada Ahayd Ee Waalidkii Ku Tilmaameen Sababtoo Ah Ma Uu Ku Qanacsanayn Diinta Kiristaanka, Waxa Uu Qoray Kitaab La Yidhaa **“U Halgamidda Sidii Iimaan Loo Heli Laha”,** Mudadaa Dhexdeeda Waxa Uu Ogaaday In Marnaba Iimaan Dhab Ahi Aanu Ku Sugnayn Diintan Dadka Kiristanka Ahi Ay Haystaan, Kitaabkiisan Kore Waxa Uu Ku Xusay Mushkilad Uu Sheegay Inay Tahay, Dadkii Reer Galbeedka Ahaa Oo Diinta Islaamka Aad Ugalaya, Waxa Uu La Yaabay Iimaan Xumaanta, Nolol Cidhiidhiga Iyo Nafsad Xumaanta Haysata Dadka Reer Galbeedka Ah Iyagoo Dhaqaale Ahaan Haysta Hanti Iyo Lacag Fiican.

Bari Dambe Ayuu Jeffrey Lang Hadyad Ka Helay Qoys U Dhashay Dalka Sucuudiga Oo Ay Isyaqaaneen, Hadyaddu Waxay Ahayd Kitaab Quraan Ah Oo Tarjuman, Kitaabkii Ayuu Akhristay Aadna Wuu Uga Helay, Isagoo Kitaabka Quraanka Ah Ka Warramaya Waxa Uu Yidhi: *"Markii Aan Quraanka Akhrinayay Waxaan Dareemay Inaan Hor Taaganahay Macalin Cilmi Nafsiga Ku Fiican Oo Iftiin Iyo Fallaadho Ilays Ah Ku Ifinaya Dhamaan Dareemadayda Qarsoon, Waxaan Isku Dayaa Inaan Mushkiladaha Qaar Naaqisho Oo Aan Ka Faalloodo Kolkaasaan Hortayda Ku Arkaa Isagoo Kitaabku Iiga Horreeyay Oo Naaqishay, Quraanku Waa Uu I Dhexgalay, Jidhkayga Ayaanu Ku Fiday, Waxana Uu Banaanka Iigu Saaray Xaqiiqada Iyo Dhabta".*

Jeffrey Lang Markuu Quraankii Akhriyay Ee Uu Ku Qancay Xaqiiqooyinka Iyo Iimaanka Uu Kitaabkani Ka Warramayo Ayuu Sidaas Ku Galay Diinta Islaamka Iyadoo Cidina Aan Ku Qasbin, Xilligan Uu Islaamay Waxay Ku Beeganayd 1980-Kii Oo Da'diisu Noqonayso 26 Jir.

"Jidkii Hanuunka" Qisooyinkii ay Ku soo Islaameen Shakhsiyaad Adduunka Caan ka Ah Waa Buug uu Qoray Qoraa Aaden Daahir Cabdilaahi (Aaden Cade) Qaybtii 21aad

.

Chris Jackson



Chris Jackson Waa Muwaadin Maraykanka Madow Ah, Waxa Uu Magac Ku Lahaa Kuna Caanbaxay Ciyaarta Kubbadda Kolayga (Basket Ball), Sida Inta Badan La Arko Dadka Madow Ee U Dhashay Dalka Maraykanku Waxa Ay Ka Cawdaan Cunsuriyad, Midab-Takoor, Yasid, Hayb-Sooc, Isir-Nacayb Iyo Addoonsi, Dhamaan Dhaqamadani Waa Kuwo Ku Dhisan Jahli Iyo Aqoon-Darro Waana Kuwo Abuuraya Nacayb Bulshada Dhexdeeda Ah Iyo Insaaniyad Darro, Waa Dhaqamo Ka Suurto Gala Bulshooyinka Aan Muslimka Ahayn Sababta Oo Ah Diinta Islaamku Waa La Col Dhaqamadan Hayb-Sooca Iyo Isir-Nacaybka Ah, Waxana Ay Ku Dhisantahay In Bani'aadamku Siman Yahay Balse Uu Ku Kala Fiicanyahay Alle-Ka-Cabsiga Oo Kali Ah, Diinta Islaamku Dadka Kuma Qiimayso Jinsiyadda, Midabka, Hantida Iyo Muuqaalka, Diinta Islaamku Waa Middii Walaalaysay Bilaal Oo Xabashi Ahaa, Suhayb Oo Roomaan Ahaa Iyo Salmaan Oo Faarisi Ahaa Islamarkaana Xidhiidh Walaaltinimo La Wadaajisay

Bulshadii Carbeed Ee Uu Nebigu Nnkh Ka Dhashay, Waa Diin Ku Caan Ah Cadaalad, Sinnaan, Xaq-Soor, Walaalayn, Ilaalinta Karaamada Qofka Muslimka Ah, Is-Xaq-Dhawrka Iyo Ilaalinta Xuquuqda Ay Isku Leeyihiin Bani'aadamku.

Chris Jackson Intii Aanu Galin Diinta Islaamka Ka Hor Waxa Uu Dareensanaa In Dadka Madow Ee Maraykanka Ahi Inkastoo Ay Caan Noqdaan Ama Aqoonsi Ka Helaan Bulshada Mareekan Dhexdeeda Kuna Badanyihiin Fanka Iyo Ciyaaraha Inaanay Lahayn Nidaam Isku-Xidhan Oo Xuquuqdooda U Dooda, Una Jihaysa Sidii Ay Ugu Noolaan Lahaayeen Nolol Fiican, Taasina Ay Sababtay Inay Noqdaan Dadka Ugu Badan Ee Ka Ganacsada Ama Isticmaala Daroogooyinka, Mukhadaraadka Iyo Wax-Tahriibinta, Sidaa Darteed Chris Jackson Waxa Uu Talo U Arkayay In Dadka Madow Ee Maraykanka Ahi Ay Naftooda Wanaajiyaan Una Halgamaan Sidii Ay Nafahooda U Karaamayn Lahaayeen Una Gayn Lahaayeen Meel Sare Kadibna Bulshadooda Ugu Horseedi Lahaayeen Horumar Una Jihayn Lahaayeen Dhanka Wanaagsan, Sidoo Kale Waxa Uu Ku Taliyay In Madaxda Madowga Ahi Ay Dadkooda Rajo Ku Abuuraan, Ku Dhiirigaliyaan Shaqada, Inay Ku Waaniyaan Dhaqamada Wanaagsan Iyo Akhlaaqda San, Ka Fogaanta Daroogooyinka Iyo Anshax-Xumada, Si Ay Door Wax-Ku-Ool Ah Ugu Yeelan Lahaayeen Bulshada Dhexdeeda, Sababahaas Ayaa Chris Jackson Ku Dhiirigaliyay In Uu Raadiyo Diin Ku Hagta Jidka Toosan, Si Uu Jawaabo Sax Ah Ugu Helo Su'aalaha Maskaxdiisa Dawakhiyay Ee Ku Saabsan Sinnaanta Iyo Cadaalada Ijtimaaciga Ah.

Chris Jackson Halkaas Ayuu Ka Bilaabay Baadigoobka Diin Xaq Ah, Waxa Uu Cilmi Baadhis Ku Sameeyay Diimaha, Waxa Cajabisay Oo Soo Jiidatay Diinta Islaamku Sida Ay Uga Sheekaynayso Sinnaanta, Cadaaladda, Xorriyadda Iyo Karaamada, Waxana Uu Gartay In Wixii Uu Raadinayay Oo Dhami Ay Diintan Ku Jiraan, Waxa Uu Ku Sii Sameeyay Cilmi Baadhis Dheeraad Ah Taasoo Markii Dambe Keentay Inuu Ku Qanco Ilaahayna Qalbigiisa Ku Sharraxo Iimaanka Waxana Uu Si Toos Ah Diinta Islaamka U Galay Sanadkii 1991-Kii, Magaciisiina Waxa Uu U Beddelay Maxamuud C/Ra'uuf.

Maxamuud C/Ra'uuf Waxa Uu La Kulmay Hanjabaado Iyo Caga-Juglayn Badan, Bishii March 1996-Kii Ayuu Midawga Kubbadda Kolayga Ee Qaranka Maraykanku U Diiday Inuu Ka Qayb Galo Ciyaar Muhiim Ahayd Kadib Markii Uu U Kici Waayay Ama Qaadi Waayay Heesta Calanka Maraykanka Oo Sida Caadiga Ah Ciyaaraha Lagu Furfuro, Taasina Dood Kulul Ayay Dhalisay, Saxaafadda Ayaa Qaaadaa Dhigtay Warkiisa, Dhacdadani Waxay Isaga Usii Caddaysay Halka Ay Kala Taaganyihiin Diinta Islaamka Iyo Wadaniyada Maraykan, Waxa Uu Sii Aqoonsaday In Wali Mareekanka Uu Ka Jiro Midab-Kala-Sooc Iyo Cunsuriyad Aan Ka Yarayn Tii Galaafatay Awowyaashii, Intaa Wixii Kadambeeyay Maxamuud C/Ra'uuf Garoonka Dibaddiisa Ayuu Joogi Jiray Ama Qolka Labiska Ayuu Ku Jiri Jiray Inta La Qaadayo Heesta Calanka Mareekan, Isagoo Calanka Mareekan U Arkayay Inuu Yahay Astaanta Dulmiga Iyo Haybsooca.

Maxamuud C/Ra'uuf Dakhligiisa Sanadlaha Ah Waxa Lagu Qiyaasay 2.6 Million Dollar (Laba Milyan Iyo Badh Doolarka Maraykanka Ah), Iyadoo Sidaas Ah Ayuu Yidhi: *"Diintayda Ayaa Igala Muhiimsan Wax Kasta, Kalgacalka Iyo Jacaylka Aan Ilaahay U Hayo Ayaa Igala Horreeya Wax Kasta",* Maadaama Oo Uu Heesta Calanka Qaadi Waayayna Waxa Ciyaar Kasta Looga Goosan Jiray $31.707, Isagoo Tan Ka Hadlayana Waxa Uu Yidhi: *"Waajibka Iga Saaran Dhanka Alle Ayaa Igala Wayn Igalana Qiimo Badan Waajibka Wadanka Iyo Wadaniyadda".*

Maxamuud Saaxiibbadii Way Ku Kala Qaybsameen Aragtiyaha Ay Ka Qabeen Islaamidiisa, Kuwo U Garaabay Iyo Kuwo Kasoo Horjeestayba, Mid Kamid Ah Saaxiibbadiisii Ay Isku Kooxda U Ciyaari Jireen Ayaa Yidhi: “Dadku Waxay Leeyihiin Caqiidooyin Kala Duwan Mid Kastana Waa In Tiisa Loo Ixtiraamaa”, Saaxiib Kale Ayaa Yidhi: “Haddaynu Kiristanka Nahay Waa In Aynu Diinteena Daacad U Noqonaa Sida Maxamuud Diintiisa Daacad Ugu Yahay”, Sidaas Ayuu Maxamuud Ku Maray Jidkii Hanuunka Ilaahayna Ugu Fududeeyay Waddada Xaqa Iyo Toobiyaha Toosan Islamarkaana Uu Ku Helay Xorriyadii Iyo Sinaantii Uu Raadinayay.



Chris Jackson (Maxamuud C/Ra’uuf): Midig

“Jidkii Hanuunka“ Qisooyinkii ay Ku soo Islaameen Shakhsiyaad Adduunka Caan ka Ah Waa Buug uu Qoray Qoraa Aaden Daahir Cabdilaahi (Aaden Cade) Qaybtii 22aad

Dr.Gary Miller

Waa Aqoonyahan Xubin Ka Ah Guddida Waxbarashada Ee Jaamacadda Boqor Fahad Ee Shidaalka Iyo Macdanta Gaar Ahaan Waaxda Culuumta Xisaabta (King Fahad University Of Petrolium And Minerals, Department Of Mathematics), Waxa Kale Oo Uu Ahaa Xubin Aad U Firfircoon Oo Ka Tirsan Fidiyeyaasha Diinta Kiristanka (Missionery), Waxa Uu Aad U Yaqaanay Kitaabka Baybalka (Bible), Sidoo Kale Waxa Uu Aad U Jeclaa Abateed Badanna U Hayay Culuumta Xisaabta Gaar Ahaan Sunsunka Mandiqa Ah Ee Arrimuhu Ku Socdaan.

Dharaar Dharaaraha Ka Mid Ah Ayuu Dr.Gary Miller Akhriyay Kitaabka Quraanka Ah, Ujeedadiisuna Waxa Ay Ahayd Inuu Kitaabka Quraanka Ah Ka Helo Waxyaabo Qalad Ah Ama Hadallo Is-Daba-Marsan Si Uu Dadka Muslimiinta Ah Ugu Shaki Galiyo Kadibna Ugu Bandhigo Diinta Kiristanka, Waxa Uu Filanayay In Quraanku Yahay Kitaab Qadiimi Ah Islamarkaana Ka Sheekaynaya Kaliya Carabtii Hore Iyo Saxarihii Ay Ku Noolaan Jirtay Maadaama Oo Ay Da’diisu Gaadhay 14 Qarni, Sidoo Kale In Uu Ka Warramayo Caadooyin Iyo Dhaqammo Gaboobay Oo Aan La Jaan-Qaadi Karin Heerka Noloshu Marayso, Caqiidooyin Duug Ah Iyo Khuraafaad Aan Waqtiga La Joogo La Shaqayn Karin, Inuu Yahay Kitaab Culuumta Kale Iyo Diimaha Kale Aan Wax War Ah Ka Sheegin, Waxa Uu Filanayay Inuu Noqon Doono Kitaab Ku Dhisan Casabiyad Islamarkaana Si Qotodheer Uga Sheekaynaya Noloshii Nebi Muxamed Iyo Qoyskiisa, Inuu Yahay Kitaab Aad Ugu Dheeraanaya Khadiija, Caa’isha, Faadumo Bintu Muxamed, Abu-Daalib, Caruurtii Nebiga Ee Geeriyootay Iyo Kuwo Kale, Balse Muxuu Kala Kulmay Quraanka?, Ma Noqday Sidii Uu Filayay?, Hadii Se Uu Noqonwaayay Siduu U Maleynayay Ma Aqbalay Xaqiiqada Quraanka?.

Gary Miller Markii Uu Quraanka Akhriyay Waxa Uga Soo Baxay Wax Ka Geddisan Waxii Uu Filanayay, Waxa Uu Yaabay Markii Uu Ka Waayay Tafaasiil Dheer Oo Kusaabsan Qoyskii Nebi Muxamed Iyo Noloshiisii Gaarka Ahayd, Markii Uu Ka Waayay Magacyada Caasha, Khadiija, Faadumo Iyo Reer Bani-Mudalib Toona, Waxa Se Uu Sii Amakaagay Kolkii Ay Kusoo Baxday Suurad Dhan Oo Loogu Magac Daray Maryam Oo Ahayd Nebi Ciise NNKH Hooyadii, Suurad Lagu Sharfayo Maryam Islamarkaana Lagaga Sheekaynayo Wanaageedii, Suurad Si Qoto-Dheer Uga Warbixinaysa Dhalashadii Ciise Iyo Sidii Alle Uurka Hooyadii Ugu Abuuray, Inuu Ciise Ahaa Addoon Wanaagsan Oo Waynuhu Doortay, Inuu Ahaa Nebi Rabbi U Igmaday Xilka Nebinimada Kuna Aaminay Risaalad Iyo Waxyi, Inuu Ahaa Addoon Alle Jecelyahay Isaguna Rabbi Jecel, Inuu Ahaa Nebi Aan Aabbo Lahayn

Balse Uu Ahaa Ruux Ilaahay Ku Afuufay Uurka Hooyadiisii Dahirnayd Ee Maryama Bintu Cimraan, Waxa Kale Oo Yaabka Yaabkii Ku Noqotay Markii Uu Ogaaday In Magaca Nebi **Ciise** Quraanka Lagu Xusay **25 Jeer** Halka Magaca Nebi **Muxamed** Lagu Xusay **5 Jeer** Oo Kali Ah.

Gary Miller Waa Uu Sii Waday Akhrintii Kitaabka Quraanka Isagoo Si Xeel-Dheeri Ah Ugu Fiir-Fiirsanaya Macnaha Buuxa Ee Uu Xambaarsanyahay, Waxa Fajac Iyo Filanwaa Ku Noqotay Aayadda **82aad** Ee Suuratu Al-Nisaa, Aayadaas Oo Macnaheedu Yahay Sidan: *"Miyaanay Quraanka U Fiirsanayn Oo Aanay Macnihiisa Dhuuxayn, Hadii Uu Quraanku Ka Iman Lahaa Cid Aan Alle Ahayn Waxay Ku Arki Lahaayeen Is-Dhaaf Iyo Iskahor-Imaad Badan",* Gary Miller Isagoo Arrintan Ka Hadlayana Waxa Uu Yidhi: *"Waxa Kamid Ah Mabaadi'da Aqoonta Ah Ee La Yaqaano Waqtigan Aynu Joogno Mabda'a Qaladka, Taas Oo Macnaheedu Yahay Aragti Kasta Oo Sayniska (Scientific Fact) Ahi Waxay Noqon Kartaa Sax Ama Qalad Lagana Yaabaa Inay Qalad Tahay Oo Waayada Dambe La Ogaado Lana Saxo, Waxase Layaab Ah In Quraanku Dadka Muslimka Ah Iyo Kuwo Aan Ahaynba Uu Ku Dhiirigalinayo Inay Ka Baadhaan Qaladdo Iyo Waxyaabo Is-Dhaaf Ah Waxana Uu Quraanku Si Hubaal Ah Usii Xusay Inaanay Ka Heli Karin"* Isagoo Hadalkiisa Sii Wata Waxa Uu Yidhi: *"Lama Helayo Qof Qoraa Ama Curiye (Mu'alif) Ah Oo Inta Uu Kitaab Qoro Ku Dhiirranaya Inuu Yidhaahdo Kitaabkan Wax Qalad Ahi Kuma Jiraan Lagamana Soo Heli Karo, Balse Quraanku Sidaa Lidkeeda Waxa Uu Tilmaamayaa Inaan Wax Qalad Ahi Ku Jirin, Waxana Uu Waliba Inoo Sheegayaa Bal Inaynu Ka Eegno Waxyaabo Iswaydaar Ah Maba Ka Helaynee".*

Aayadaha Kale Ee Sida Layaabka Leh Usoo Jiitay Gary Miller Waxa Kamid Ahaa Aayadda **30aad** Ee Suuratu Al-Anbiyaa (Suurada Nebiyada), Aayaddaas Oo Macnaheedu Noqonayo Sida Tan: *"Miyaanay Arkaynin Kuwa Gaaloobay In Cirarka (Samooyinka) Iyo Dhulalku Isku Dhegganaayeen Kadibna Aanu Kala Fujinay, Shay Kasta Oo Noole Ahna Aanu Biyo Ka Ahaysiinnay, Miyaanay Ilaahay Rumaynayn?",* Gary Miller Isagoo Ka War Bixinaya Aayaddan Waxa Uu Yidhi: *"Aayaddani Waaba Cilmi Baadhistii Lagu Helay Abaal-Marinta Ugu Sarraysa Ee Loo Yaqaan* ***Noble Price*** *Sanadkii 1973-Kii, Cilmi Baadhisatani Waxay Ku Saabsanayd Aragtidii Loo Bixiyay* ***Qaraxii Waynaa*** *(The Great Explosion Or The Great Bigbang), Aragtidani Waxay Sheegaysaa, In Kawnku Ahaa Wax Isku Wada Dheggan, Cirarka, Dhulalka Iyo Ka-Koobanayaasha Kale Ee Kawnkuba Ay Ahaayeen Walax Kaliya, Kadib Uu Dhacay Qarax Wayn Islamarkaana Ay Kala Fuqeen Una Habaysmeen Sidan Uu Hadda Kawnku Yahay",* Ogoow Oo Waa Ilaahay Ka Kala Fujiyay Cirarka Iyo Dhulalka, Waa Isaga Uun Midka Awood U Leh Dhacdadan Cajiibka Ah, Ilaahay Habkuu Doono Ha U Isticmaalo Sida Uu Rabana Ha U Kala Fujiyee Waa Isaga Ka Inoo Sheegay In Kawnku Isku Dhegganaa Oo Uu Kala Fujiyay, Ilaahay Dhacdadan Waxa Uu Inoo Sheegay 14 Qarni Kahor Halka Culimada Sayniska Ee Reer Galbeedku Ogaadeen, Abaalmarinna Ku Bixinayeen 1973-Kii Dhawaa… Subxaanaka Yaa Caliim!!!

Qaybta Dambe Ee Aayadu Waxay Farta Inoogu Fiiqaysaa In Ay Biyuhu Yihiin Isha Nolosha, Inay Yihiin Seeska Nolosha, La'aantoodna Aanay Noloshu Suurtogalba Ahayn, Waa Kan Markale Gary Miller Oo Ka Waramaya Sidii Uu Arkayay: *"Arrinkani Waa Layaab ! Sababtoo Ah Sayniska Casriga Ahi Dhawaan Ayuunbuu Ogaaday In Unugu (The Cell) Qayb La Yidhaahdo Cytoplasm Oo Unuga Ka Ah 80% Iyada Lafteedana Waxa Aasaas U Ah Biyo, Taas Oo Macnaheedu Yahay Cytoplasm-Tu Waxay U Badantahay Biyo, Bal Haddaba Sidee Ayay Suurtogal U Tahay In Qof Waxna Aan Qorin Waxna Aan Akhriyin Islamarkaana Jiray 1400 Oo Sano Ka Hor Macluumadan Ama Cilmigan U Ogaado Hadii Aanu Waxyi Xagga Alle Uga Yimid U Sheegin?!!".*

Gary Miller Waa Uu Islaamay, Si Xor Ahna Waa Uu Ugu Qancay Diinta Islaamka Sanadkii 1977-Kii, Intaa Wixii Kadambeeyayna Waxa Uu Galay Muxaadarooyin Badan, Waxa Uu Doodo La Galay Rag Badan Oo Kiristan Ahaa, Ogoownoo Waa Raggii Ay Diinta Kiristanka Wada Faafin Jireen, Waxa Uu Qoray Kutub Badan Oo Ay Kamid Ahaayeen:

Quraankii Mucjisada Ahaa

Faraqa U Dhexeeya Quraanka Iyo Kitaabka Muqadaska Ah

Hababka Kiristan Fidiyeyaashu Adeegsadaan Oo Lagu Eegay Aragti Islaami Ah.

Intaa Waxa Sii Dheer Waxa Gacantiisa Kusoo Muslimay Dad Badan Sababtoo Ah Waxa Uu Khibrad U Lahaa Habka Dacwada Iyo Diin Fidinta.



Dr. Garry Miller (Waa Sawirka Hadda U Yaalla Bogga Facebook-Giisa).

“Jidkii Hanuunka“ Qisooyinkii ay Ku soo Islaameen Shakhsiyaad Adduunka Caan ka Ah Waa Buug uu Qoray Qoraa Aaden Daahir Cabdilaahi (Aaden Cade) Qaybtii 23aad

Yusuf Estes (Skip Estes)



Sheekh Yuusuf Estes Waa Diinfidiye Muslim Ah, Waxa Uu Hadda Degganyahay Magaalada Alexandria Ee Gobolka Virginia, Waxa Se Uu Asal Ahaan U Dhashay Kana Soo Jeedaa Gobolka Texas(Teksas), Waa Sheekh Haybad Iyo Sharaf Leh, Markaad U Fiirsato Muuqaalkiisa Iyo Habka Dharxidhashada Waxaad Moodaa In Uu Shabbaho AUN Sheekh Albaani.

Sheekh Yusuf Estes Hore Waxa Uu Ahaan Jiray Diin-Fidiye Kiristan Ah, Waxa Uu Ahaa Wadaad Masiixi Ah Oo Ka Tirsan Kiniisada Protestant-Ka, Hasa-Ahaatee Waagii Dambe Ayuu Rabbi SWT Waafajiyay Diinta Islaamka Islamarkaana Tusay **Jidka Hanuunka**, Haddaba Aynu U Ogolaano Sheekh Yusuf Estes In Uu Si Faahfaahsan Inooga Warramo Dhacdadii Uu Kusoo Islaamay Iyo Sidii Uu Ugu Soo Dhacay Jidka Toosan.

“ Waxa Aan Waxbarashada Ka Bilaabay Kiniisadda Kadib Markii Aan Ogaaday In Aanan Waxba Ka Garanaynin Diinta Aan Haystay Ee Kiristanka, Waxaan Is-Waydiiyay Su’aalo Badan Oo Aan Jawaab Waafi Ah U Waayay, Sidaa Darteed Ayaan U Bartay Diinta Kiristanka Ilaa Aan Noqday Wadaad Diin-Fidiye Ah Oo Kiniisadu Ku Xisaabtanto, Sidoo Kale Ayuu Aabahayna Ahaa Wadaad Kiristan Ah Oo Diin-Fidiye Ah, Waxase Intaa Dheerayd Aniga Iyo Aabahay Waxaanu Lahayn Ganacsi, Waxaanu Ka Ganacsan Jirnay Qalabka Muusikada Iyo Agabka La Tumo, Waxana Aanu Ka Iibin Jirnay Kiniisadaha Iyo Goobaha Cibaado Ee Kiristanka, (Kiinasadaha Waxa Laga Qaadaa Heeso Laxan Iyo Muusig Leh Oo Ay Cibaado U Haystaan Dadka Kiristanka Ahi).

Waxa Aan Aad U Necbaa Islaamka Iyo Muslimiinta, Sawirka Aan Ka Haystayna Waxa Uu Ahaa In Ay Muslimiintu Yihiin Dad Aan Ilaahay Aqoonsanayn Oo Caabuda Sanduuq Ama Seexaarad Madow Oo Dhex-Taalla Lamadegaanka Carabta (Waxa Uu U Jeedaa Xajar Al-Aswadka), In Ay Yihiin Dad Bahaloobay Oo Argagixiso Ah Islamarkaana Arwaaxda Dhaafiya Cid Kasta Oo Kasoo Horjeeda Ama Aan Haysan Caqiidadooda; Hase-Ahaatee Muddo Laba Bilood Ah Oo Uu Marti Noo Ahaa, Gurigayagana Joogay Nin Muslim Ah Oo Uu Dhashay Dalka Masar Ayaa Wax Ka Bedeshay Fikirkii Aanu Ka Aaminsanayn Islaamka

Iyo Aragtidii Aanu Ka Haysanay Muslimiinta Kadib Markii Aanu Aragnay Ninkan Dhaqankiisa, Hab-Nololeedkiisa Iyo Nidaamkiisa Oo Dhan Islamarkaana Aanu La Lafagurnay Qodobo Badan, Ugu Dambayntiina Waxaanu Ogaanay Arrimo Badan Oo Ku Saabsan Islaamka Oo Aanaan Hore Waxba Uga Aqoon".

Sheekh Yusuf Estes Oo Ka Faalloonaya Sidii Ninkan Masriga Ahi Kuyimid Gurigooda Ayaa Sheegay In Maalin Maalmaha Ka Mid Ah Aabihii Ku Yidhi: Waxa Inoo Imanaya Nin Masri Ah Oo Aynu La Galayno Heshiis Ganacsi, Yuusuf Aad Ayuu Ugu Farxay Warkan Waxana Uu Humaag Ahaan U Sawirtay In Ganacsigoodi Balaadhanayo Isuna Bedelayo Ganacsi Caalami Ah, Waxase Yusuf Amakaag Ku Noqotay Markii Aabihii U Sheegay In Ninku Yahay Ganacsade Muslim Ah, Isagoo Cadho, Ciil Iyo Rajo-Beel Qarxaya Ayuu Aabihii U Sheegay Inaanu Marnaba Iyo Sinaba Toona Ula Kulmayn Ninkan Ganacsadaha Ah Maadaama Oo Uu Yahay Muslim, Aabihiina Dhaar Iyo Xilo-Fur Ayuu Lasoo Istaagay, Waxaanu Ku Adkeeyay Inuu La Kulmayo Ninkan Muslimka Ah Si Tijaaradooda Iyo Ganacsigoodu U Hano-Qaado; Marlabaad Aynu Majaraha Iyo Hogaanka Qisada Ku Wareejino Sheekh Yusuf Estes Si Uu Innooga Warramo Waxa Ay Ku Heshiiyeen Isaga Iyo Aabihii Iyo Sida Uu Dhacay Kulankii Ganacsaduhu.

"Markuu Aabbahay Ku Adkaystay Go'aankiisii Ahaa Inaan La Kulmi Doono Ganacsadaha Muslimka Ah, Ayaan Anigu Tanaasulay

"Jidkii Hanuunka" Qisooyinkii ay Ku soo Islaameen Shakhsiyaad Adduunka Caan ka Ah Waa Buug uu Qoray Qoraa Aaden Daahir Cabdilaahi (Aaden Cade) Qaybtii 24aad

Sheekadu Waxay Inoo Maraysay "Markuu Aabbahay Ku Adkaystay Go'aankiisii Ahaa Inaan La Kulmi Doono Ganacsadaha Muslimka Ah, Ayaan Anigu Tanaasulay….

"Markuu Aabbahay Ku Adkaystay Go'aankiisii Ahaa Inaan La Kulmi Doono Ganacsadaha Muslimka Ah, Ayaan Anigu Tanaasulay Sababtoo Ah Waxaan Degganaa Guriga Aabahay Waxaanan Ka Cabsaday In Arrintani Ay Nakala Gayso Aniga Iyo Aabbahay, Waxaanan Ogolaaday In Aan Anigu La Kulmi Doono Ninkan Muslimka Ah; Kolkii Uu Yimi Ninkii, Ayaan U Diyaar Garoobay Inaan La Kulmo, Waxaan Soo Gashaday Koofiyad Ay Ku Qorantahay " Ciise Waa Ilaahay", Waxaan Soo Xidhay Mucatab Wayn Oo Ah Astaanta Kiristanka, Waxa Kale Oo Aan Gacanta Kusoo Qaatay Nuqul Ka Mid Ah Kitaabka Baybalka (Bible), Anigoo Muuqaalkan Leh Ayaan Imi Miiskii Wada-Hadalka, Markiiba Waxaan Bilaabay Inaan Kala Hadlo Diintiisa, Inaan Aflagaadeeyo Islaamka Iyo Muslimiinta Oo Aan Ku Tilmaamo Sawirkii Qarribnaa Ee Aan Ka Haystay, Hasayeeshee Ninkii Muslimka Ahaa Isagu Muu Cadhoon Waxana Uu Ku Jiray Xaalad Caadi Ah, Xamaasadii Iyo Qiiradii I Haysayba Waxa Nuugay Daganaantiisii. Intaa Kaddib Aabbahay Ayaa Ku Martiqaaday Inuu Gurigayaga Noo Raaco, Guriga Markaa Waxaanu Ku Degganahay Aniga, Aabahay Iyo Xaaskayga, Waxa Nasoo Afareeyay Ninkan Masriga Ah, Waxa Kale Oo Aannu Soo

Martiqaadnay Wadaad Kale Oo Haysta Mad-Habka Kaatoliga (Catholic) Sidaana Waxa Aannu Ku Noqonnay Shan Qof, Afar Wadaad Oo Diin-Fidiyeyaal Kiristan Ah Iyo Nin Muslim Ah Oo Caadi Ah, Aniga Iyo Aabahay Waxa Aanu Haysanaa Mad-Habka Protestant-Ka, Ninka Kale Ee Aanu U Yeedhnayna Waxa Uu Haystaa Mad-Habka Catholic-Ka Halka Xaaskayguna Ka Haysato Mad-Hab Kale Oo Kiristanka Ah Lakin U Janjeedha Dhanka Yuhuuda, Intaa Waxa Dheer, Aabahay Injiil Waxa Uu Bartay Isagoo Da' Yar Waxana Uu Ku Noqday Wadaad Ay Kiniisadu Qaddariso, Ninka Kale Ee Kaatoliga Ahina Waxa Uu Leeyahay Khibrad 12 Sano Ah Oo Uu Dacwada Kusoo Fidiyay Labada Mareekan (Ka Koonfureed Iyo Midka Waqooyi), Xaaskaygu Se Mad-Habka Ay Haysataa Waa Mad-Hab Injiil Ah Oo Cusub Una Janjeedha Dhanka Yuhuuda, Halka Anigu Aan Ka Dhigtay Injiil Oo Dhan Balse Aan Ku Takhasusay Madaahib Gaar Ah, Waxaan Shahaadada Ugu Sarreysa Ee ***Phd*** Ka Haystaa Culuumta Theology-Ga (Waa Cilmi Ay Kiristanku Ku Bartaan Wixii Ilaahay Ku Saabsan Iyagoo Adeegsanaya Maskaxdooda Iyo Xisaab).

Intayadan Kiristanka Ah Midba Waxa Uu Sitaa Nuqul Baybalka Ah Oo Ka Geddisan Midka Ay Kuwa Kale Sitaan, Waxa Aanu Miis Wareegsan Dushiisa Ku Lafa-Guraynaa Kala-Duwanaanshaha Iyo Iswaydaarka Ku Jira Diinta Kiristanka Iyo Injiiladan Kala Duwan, Ninkii Muslimka Ahaana Wuu Fadhiyaa Waxana Uu Aad Ula Yaabanyahay Isdhaafka Iyo Kala-Duwanaanshaha Kutubtayada … Aabahay Markaa Waxa Uu Haystaa Nuqulkii Boqor Jiimis (King James) Aniguna Waxaan Sitaa Nuqulkii **Reyfaas** Edition (Waa Dib-U-Habayn Iyo Dib U Qorid Lagu Sameeyay Nuqulka Boqor James), Nuqulka Aan Haystaa Waxa Uu Odhanayaa: *Nuqulka King James Waxa Ku Jira Qaladdo Waawayn Iyo Khuraafaad Badan, Dadka Kiristanka Ahina Markii Ay Arkeen Qaladdadan Waxay Ku Qasbanaadeen In Ay Dib U Qoraan Kana Saaraan Qaladdada Ku Jira,* Nuqulka Saddexaad Ee Ay Xaaskaygu Sidatana Waxa Qoray Wadaad Cusub Oo La Odhan Jiray **Jimmy**, Waxa Wax Lagu Qoslo Ah Jimmy Waa Ninkii Isagoo La Doodaya Sheekh Axmed Diidaat Yidhi: *Anigu Diinta Kiristanka Aqoon Fiican Uma Lihi,* Waayaabe Sidee Ayuu Nuqul Dhan Oo Injiil Ah U Qoraa Nin Yidhi Anigu Aqoonba Uma Lihi !!! Ninkan Kale Ee Kaatoliga Ahi Isagu Waxa Uu Haystaa Nuqul Mad-Habkiisa Ah Oo Ka Kooban 73 Jis Halka Annaga Mad-Habkayaga Ay Injiili Tahay 66 Jis, Dhamaan Kutubta Injiili Way Kala Duwantahay Gudaheedana Waxa Ku Jira Iswaydaar Badan".

Marka Laga Yimaaddo Kala-Duwanaanshaha Madaahibta Kiristanka, Marka Laga Yimaado Iswaydaarka Kujira Nuqulada Mad-Hab Kasta, Marka Laga Yimaado Doodda Iyo Sheekada Arrintan Ku Saabsan Ee Dhex Martay Afartooda, Door Noocee Ah Ayuu Ninkii Muslimka Aha Aka Qaatay, Isagu Ma Ka Faalooday Diinta Islaamka Iyo Quraanka?, Mise Iyaga Uun Ayuu Dhagaysanayay?, Iyagu Se Su'aalo Ma Waydiiyeen Ku Saabsan Diintiisa?! Bal Hadda Qalinka Aan Ku Wareejiyo Sheekh Yusuf Estes Si Uu Faalo Kale Inooga Siiyo Doorkii Ninka Muslimka Ah Iyo Halkay Islamareen, Sheekhu Waxa Uu Yidhi:

"Waxaannu Ninkii Muslimka Ahaa Oo Magaciisu Muxamed Ahaa Waydiinay: Immisa Nuqul Oo Kala Duwan Ayuu Quraankiinu Leeyahay?, Waxa Uu Noogu Jawaabay: Quraanku Waxa Uu Leehay Hal Nuqul Oo Kali Ah, Quraanku Waxa Uu Yahay Sidii Uu Ilaahay Kaga Soo Dagay 1400 Sano Kahor, Waxa Uu Ku Qoranyahay Luqaddii Uu Kusoo Dagay Ee Carabida !!! Jawaabtani Waxay Nagu Noqotay Musiibo Iyo Qallad Korka Nagaga Soo Dhacday.

Waxa Xusid Mudan, Wadaadka Kaatoliga Ahaa Inkastoo Uu 12 Sano Uu Daaci Ku Ahaa Mad-Habkan Hadana Shaki Ayaa Kaga Jiray Waliba Dhanka Caqiidada, Aabahayna Waxa Uu Aaminsanaa Inaanu Kitaabkani Ahayn Waxyigii Ilaahay Oo Sidiisii Ah Lakin Ay Dad

Qoreen Iyagoo U Malaynaya Ama Ku Matalaya Waxyi, Gabadhayduna Waxay Rumaysnayd In Kitaabkeeda Ay Ku Jiraan Qaladdo Badani Laakiin Se Asal Ahaan Uu Ka Yimi Xagga Alle. Aniga Miyaa, Waxaa Jiray Arrimo Badan Oo Ku Xusnaa Kitaabka Baybalka Lakin Aanan Si Fiican U Rumaysnayn Waayo Waxaan Arkayay Isburin Iyo Iskahor-Imaad Inuu Ku Jiro, Masalooyinka Maankayga Aad Ugu Meeri Jiray Waxa Kamid Ahaa, Masalada Saddexaynta (Waa Fikrad Ay Kiristanku Aaminsanyihiin Oo Odhanaysa Ilaahay, Ciise Iyo Ruuxdu Waa Hal Mid Waana Isku Ilaahay Haddana Waa Saddex Shay… Subxaanalaah!!!) Waxaan Is Waydiin Jiray Sidee Ayuu Ilaahay Hal Mid U Noqon Karaa Islamarkaana Uu Saddexdan Uga Koobanyahay! Culimo Badan Oo Ka Mid Ah Culimada Kiristanka Oo Aan Waydiiyayna Waxay Iigu Jawaabi Jireen Jawaabo Aan Macno Samaynayn Oo Shaki Ku Jiro, Waxaan Dib Wadaadada Kiristanka Ugu Celin Jiray: Sidee Ayay Suurtogal U Tahay Wax Aanan Aniguba Si Fiican U Fahansanayn Ama Aan Si Quman Iiga Dhaadhicin Inaan Dadka Ka Dhaadhiciyo Oo Ugu Qanciyo , Qaarkood Waxay Igu Odhan Jireen, Arrintan Waxba Aad Ha U Caddaynin Oo Ha U Waadixinine Waxaad Ku Dhaaftaa Waa Arrin Qarsoon Oo Cilmu Sir Ah Islamarkaana Ay Waajib Tahay In Sidaa Ay Tahay Lagu Rumeeyo, Kuwo Kale Waxay Igu Odhan Jireen: Waxaad Tidhaa Sida Ukuntuba Uga Koobantahay Saddex Shay Islamarkaana Ay U Tahay Hal Shay Ayuu Ilaahayna Kali U Yahay Ugana Koobanyahay Saddex Shay, Ukuntu Waxay Ka Koobantahay Qolofta Ama Dahaadhka Sare, Xabka Cad Ee Qolofta Ku Hoos Jira Iyo Qaybta Jaallaha Ama Huruuda Ah Ee Dhexda Ku Jirta Ee Uu Ilmuhu Ka Samaysmo, Qaar Kale Waxa Ay Igu Odhan Jireen: Waa Sida Nin Iyo Xaaskiisa Iyo Ilmo Yar Oo Ay Dhaleen, Dhamaan Waxan Ay Cadeymo Iyo Daliil Ku Sheegayaan Waa Barkumataal Iyo Wax Aan Dadka Qancin Karayn Adna Aanad Ku Qanci Karin, Inkastoo Aan Ahaa Wadaad Diinfidiye Kiristan Ah, Hadana Kumaan Qancin Masalada Saddexaynta Manaan Helin Jawaab Shaafi Ah Oo Qof Bani'aadam Ah Qancin Karta".

Yusuf Estes, Aabihii, Xaaskiisa Iyo Wadaadka Kaatoliga Ahi Waxay Ka Doodaan Madaahibtoodaba, Waxay Bilaabeen Inay La Doodaan Maxamed Oo Ah Ganacsadihii Muslimka Ahaa, Waxay Waydiiyeen Su'aalo Badan Oo Ku Saabsan Caqiidada Iyo Iimaanka, Ugu Dambayntiina Waxay Habab Kala Duwan Ugu Soo Bandhigeen Inuu Diinta Kiristanka Qaato, Jawaabtii Uu Siiyay Iyo Natiijadii Dooddaa Kasoo Baxday Waxa Inooga Sheekaynaya Sheekh Yusuf Estes, Waxana Uu Yidhi:

" Markaannu Maxamed Usoo Bandhignay Inuu Qaato Diinta Kiristanka Waxa Uu Noogu Jawaabay: Hadii Diintiina Uu Ku Jiro Hal Shay Oo Ka Wanaagsan Waxyaabaha Diintayda Ku Jira, Waan Idin Raacayaa, Waxaannu Ugu Jawaabnay: Hubaashii Way Jiraan Waxyaabo Badan Oo Diintayadu Idinkaga Wanaagsantahay, Waxa Uu Maxamed Marlabaad Noogu Halceliyay: Diyaar Ayaan Ahay Hadii Aad Keentaan Daliil Iyo Caddayn Sugan, Waxaan Ku Idhi: Dhankayaga Diintu Kuma Xidhna Daliil, Caddayn Iyo Caqli, Bal Se Waa Shay Ceeb-Ka-Saliim Ah Waana Rumayn Iyo Ictiqaad Kaliya, Umana Baahna Daliil Iyo Caddayn, Maxamed Ayaa Nagu Yidhi: Annaga Diintayada Islaamku Waa Caqiido, Daliil, Caddayn, Shay-Caqli Oggol Iyo Waxyi Samada Kasoo Dagay, Waxaan Ku Idhi: Hadday Sidaa Tahay Oo Aad Cuskataan Daliil, Caddayn Iyo Caqliga Waxaan Jecelahay Inaan Kaa Faa'iidaysto Waxna Kaa Barto.

Kaddib Waxaanu Dhexgalnay Oo Aannu Ka Doodnay Masaladii Saddexaynta, Mid Kastaa Waxa Uu Daliil Iyo Caddayn Uga Baadhay Mad-Habkiisa, Balse Maanan Helin Caddayn Caqligal Ah, Waxaannu Maxamed Dib U Waydiinay: Maxaad Ka Aaminsantihiin Ilaahay Hadaad Tihiin Muslimiinta?, Maxamed Markiiba Waxa Uu Noo Akhriyay Quluwallaha (Suurat-Ul-Ikhlaas), Waxa Uu Ku Akhriyay Luqada Carabida Kadibna Waa Uu Noo Fasiray Macnaheeda, Islamarkii Uu Akhriyayba Codkii Uu Ku Aqriyay Ayaa Qalbigayga Galay,

Wali Dayaankii Codkaasi Waxa Uu Kusoo Dhacayaa Dhegahayga, Walina Waan Xusuusanahay, Macnaheeduna Si Fiican Ayuu Noogu Baxay, Waxaanay Nagu Noqotay Kadiso".

Allaahu Akbar!!! Maxamed Waxa Uu Ahaa Ganacsade Caadi Ah, Muu Ahayn Wadaad Afarta Mad-Hab Ka Jawaaba, Maxamed Dalkan Umuu Iman Inuu Diinta Islaamka Fidiyo Waxa Uu Yoolkiisu Ahaa Inuu Soo Abuuro Xidhiidh Ganacsi Oo Gaar Ah, Dadka Uu La Kulmay Ee Doodda Iyo Wadahadalka Uu La Galay Waxay Ahaayeen Wadaado Waawayn Oo Ka Tirsan Kiniisadaha Kiristanka, Waxay Ahaayeen Diinfideyeyaal Qaarkood Kasoo Shaqeeyeen Dalal Badan, Iyadoo Ay Sidaa Tahay Hadana Maxamed Waxa Uu Noqday Geesi Raganimo Leh Oo Si Fudud Oo Farshaxanimo Ku Jirto U Caddayn Kara Diinta Iyo Fikirka Uu Aaminsanyahay, Waxa Uu Ahaa Nin Maskax Leh Oo Kala Haadin Kara Xaqa Iyo Baadilka, Waxa Uu Ahaa Nin Laab Furan Oo Aan Seef-La-Boodnimo Iyo Fudayd Ku Jirin, Waxa Uu Ahaa Nin Aan Jiljileec Iyo Labaclabac Lahayn, Sifooyinkanina Waa Kuwa U Saamaxay Inuu Horfadhiisto Oo Wax La Gorfeeyo Culimo Kiristan Ah Oo Khubaro Ku Ah Fidinta Diintooda, Haddaba Waxa Muhiim Ah In Aynu Ogaanno Sidii Ay Ku Dambaysay Doodii Dhexmartay Maxamed Iyo Afarta Wadaad, Midkoodna Ma Ku Qancay Diinta Islaamka Iyo Sidii Uu Wax Ugu Sharraxay Maxamed, Waa Kan Sheekh Yusuf Estes Oo Aan Ka Dhabqiyay Hanaankii Uu Qisada Inoogu Waday, Isagoo Sheekada Halkeedii Inooga Sii Wada Waxa Uu Yidhi:

"… Wadaadkii Kaatoliga Ahaa Waxa Uu Maxamed Ka Codsaday In Uu U Raaco Masaajidka Si Uu Usoo Arko Sida Ay Muslimiintu U Tukadaan, Maxamed Waa Uu Ka Yeelay, Waana Uu Kaxeeyay, Waxana Uu Geeyay Xarun Ama Markas Ay Muslimiintu Leeyihiin, Wadaadkii Kaatoliga Ahaa Waxa Uu Soo Arkay, Sida Ay Muslimiintu U Tukadaan, Sida Ay U Wayso Qaataan, Kadibna Waxa Ay Kusoo Laabteen Gurigii, Kolkii Ay Guriga Soo Galeenba Wadaadkii Kaatoliga Ahaa Waxaanu La Boobnay Su'aashan: Muusig Noocee Ah Ayay Muslimiintu U Adeegsadaan Salaadooda?! Waxa Uu Noogu Jawaabay: Noocnaba, Annagoo La Yaabban Ayaannu Marlabaad Waydiinay: Oo Ma Waxa Ay Ilaahooda Caabudaan Oo Ay Tukadaan Iyagoon Muusig Adeegsan?!! Wadaadkii Kaatoliga Ahaa Waxa Uu Hadana Ugu Jawaabay: HAA, Anna Waxaan Qirayaa Inaan Ilaah Xaq Lagu Caabudaa Jirin Ilaahay Mooyaane, Muxamedna Yahay Rasuulkiisii, Halkii Ayuu Wadaadkii Ku Caddaystay Inuu Islaamay Oo Uu Qaatay Caqiidada Islaamka, Kolkaas Ayaan Ku Celiyay: Maxaad U Islaamtay … Mase Hubtaa Waxaad Samaynayso? Waxaan Sidaa Ku Idhi Anigoo Isku Ciilkaambiyaya Alla!Muxuu Khayrka Kaaga Horreeyay, Waxyar Kadib Aniga Iyo Xaaskaygii Jaranjarta Ayaannu Kor U Raacnay Waxana Aannu U Baxnay Xaga Sare Ee Guriga.

Kolkaanu Xaga Sare Tagnay Ayay Xaasku Igu Tidhi: Waxaan U Malaynayaa In Aanan Xidhiidhkeena Sii Wadi Karaynin, Anigoo Naxsan Ayaan Ku Idhi: Waayo? Ma Waxaad Moodaysaa Anna Inaan Islaamay?Waxay Tidhi: Maya, Laakiin Aniga Ayaa Raba Inaan Islaamo, Markaas Ayaan Anna Ku Idhi: Walaahi Anna Waxaan Rabaa Inaan Islaamo, Intaa Kadib Ayaan Soo Dagay Oo Inta Aan Dhulka Imid Ayaan Ilaahay U Sujuuday Anoo Islamarkiiba Dareemay In Laabtaydu U Furantay Islaamka, Guriga Ayaan Dib Ugu Noqday Waxaanan Caddeeyay Oo Shaaca Ka Qaaday Inaan Islaamay".

Sidaa Ayuu Ku Islaamay Sheekh Yusuf Estes, Xaaskiisii, Aabihii Iyo Wadaadkii Katholic-Ka Ahaaba, Xilligii Uu Islaamay Sheekh Yusuf Estes Waxa Ay Ku Beegantahay Sanadkii 1991-Kii.



Yusuf Estes – Kahor Intii Aanu Islaamin



Yusuf Estes – Kadib Markii Uu Islaamay



Sheikh Yusuf Estes Iyo Aabihii

“Jidkii Hanuunka“ Qisooyinkii ay Ku soo Islaameen Shakhsiyaad Adduunka Caan ka Ah Waa Buug uu Qoray Qoraa Aaden Daahir Cabdilaahi (Aaden Cade) Qaybtii 25aad

Waxa Iga Yaabiyay Usamafalka Waalidka Ee Islaamka

Erayadan Ciwaanka U Ah Qisadeennu Waxa Ay Kasoo Baxeen Haweenay U Dhalatay Dalka Mareykanka, Sida Ay Sheegtay Markii Ugu Horreysay Ee Ay Maqasho Islaamka Oo Laga Hadlayo Waxay Daawatay Baahin Tv Oo Lagaga Hadlayo Islaamka, Waxay Tidhi Aad Ayaan Ugu Qoslay Sababtoo Ah Waxay Ahayd Qof Aan Hore U Maqlin Macluumaad Ku Saabsan Islaamka Iyo Muslimiinta, Markii Ugu Xigtay Ee Ay Macluumaad Dambe Ka Hesho Islaamka Waxay Ahayd Maalintaa Hal Sano Kadib, Iyadoo Ka Sheekaynaysa Maalintan Dambe Sida Ay Ku Maqashay Islaamka Iyo Ciddii Ay Ka Maqashayba Waxay Tidhi:

“Waxaan Ka Shaqayn Jiray Cusbitaal Dadka Lagu Daaweeyo, Maalin Maalmaha Kamid Ah Anoo Cusbitaalkii Jooga Ayaa Waxa Dhakhtarka Yimi Nin Iyo Gabadh Isqaba Oo Wada Ruux Dumar Ah Oo Xanuunsanaysa, Gabadhi Waxay Fadhiisatay Meel Kasoo Horjeeda Miiskii Aan Ku Shaqayanayay, Gabadha Waxa Kamuuqday Daal, Murugo Iyo Werwer Badan, Ilmada Dhabanadeeda Ka Dareeraysa Ayay Kolba Gacanta Iskaga Tirtiraysay, Markaan Cabbaar U Fiirsanayay Dareenka Naxdinta Leh Ee Gabadhan Ka Muuqda Ayaan Markii Dambe Si Faduulinimo Ah U Waydiiyay Mushkilada Haysata Iyo Sida Ay Wax U Jiraan, Waxana Ay Ii Sheegtay In Ay La Socoto Ninkeeda Oo Wada Hooyadii (Soddohdeed) Oo Xanuunsanaysa Islamarkaana Ay Ka Yimaadeen Waddan Kale, Afadani Waxay Ila Hadlaysay Iyadoo Ooyaysa, Sodohdeedna Ilaahay Uga Baryaysa Caafimaad Iyo Fayoobaan, Runtii Aad Ayaan Ula Yaabay Gabadhan, Waxay Ka Timid Wadan Fog, Waxay La Socotaa Ninkeedii Oo Wada Hooyadii Oo Bukta, Anna Waxaan Xusuustay Hooyaday Rumaad Oo Ay Iigu Dambaysay Mudo Afar Bilood Kahor Ah Oo Aan Quraarad Cadar Ah Hadyad Ahaan Ugu Diray Sababtoo Ah Waxay Ku Beegnayd Maalinta Hooyooyinka Aduunka, Intaa Waxii Kadambeeyayna War Iyo Wacaal Toona Kama Helin, Xataa Lamaan Xidhiidhin”.

Guud Ahaan Bulshada Reer Galbeedka, Qoyska, Waalidka Iyo Qaraabadu Agtooda Macno Badan Kuma Laha, Waxa Laga Yaabaa In Waalidku Uu Ilmihiisa Dayriyo Isagoo Yar, Ilmuhuna Aanu Dareemin Qiimihii Waalidka, Sidoo Kale Diintooduna Ma Aha Mid Aad Ugu Dhiirigalisa Xaqdhowrka Iyo Xushmada Waalidka, Halka Diinta Islaamku Ina Fartay Inaynu Waalidkeena Aad U Daryeelo Gaar Ahaan Markay Gaboobaan, Xaqa Waalidku Agteenna Macno Wayn Ayuu Ku Leeyahay Waxana Uu Ku Xigaa Xaqqa Alle Inagu Leeyahay, Kolkaa Gabadhan Layaab Kuma Laha In Ay Hooyadeed Afar Bilood Moogantahay Waliba Xilligaana Ay Ku Xusuusatay Maalinta Hooyooyinka Aduunka Oo Warbaahinta Ay Ka Maqashay, Si Kastaba Ha Ahaatee Gabadhi Iyadoo Inoo Sii Wadda Sheekada Waxay Tidhi:

“Ninkii Iyo Xaaskiisi Waxay 24-Ka Saacadoodba Dul Fadhiyeen Islaanta, Waxa Intaa Dibadda Kaga Imanaya Wicitaano Iyo Talefoono Lagaga Waraysanayo Caafimaadka Islaanta Iyo Xaaladda Ay Hadda Ku Sugantahay, Waxa Aad Iiga Yaabiyay Qiimaha Islaantani Dadkan U Leedahay Iyo Sida Ay Dhamaantood Ula Dareemayaan Xanuunka, Waxaaban Gaadhay Heer Aan Ku Hinaaso Habartan Nasiibka Badan, Maalin Dambe Ayaan Gabadhii Kula Kulmay Qolka Sugitaanka Ee Dhakhtarka, Anoo Fursada Ka Faaidaynaya Ayaan Markiiba Waydiiyay Suaalihii Igu Mudnaa Ee Ku Saabsanaa Islaantan Iyo Sidan Cajiibka Ah Ee Ay Ehelkeedu Ugu Xidhanyihiin. Gabadhi Waxay Iiga Sheekaysay Xuquuqda Uu Islaamku Siiyay Waalidka, Sida Ay Muslimiinta Waajib Ugu Tahay Inay Xaq-Dhawr Iyo Ixtiraam U Hayaan Waalidkooda, Sida Diintu Muslimiinta Ugu Dhiirigalisay Daryeelka Iyo Xanaanaynta Waalidka Kolkay Gaboobaan, Markiiba Waxa Aad Iisoo Jiitay Qaddarinta Heerkaa Leeg Iyo Sharafta Uu Islaamku Siiyay Waalidka.

Dhawr Maalmood Kaddib Islaantii Waa Ay Geeriyootay, Inankeedii Iyo Xaaskiisiina Aad Ayay Uga Naxeen, Waxaan Xusuustaa Inay Aad Uga Dul Ooyeen Sida Ubadka Yaryar Oo Kale, Markasta Waxa I Horyimaada Lammaanahan, Waxa Kale Oo Aan Kolba Xusuustaa Xuquuqdii Uu Islaamku Waalidka Siiyay Ee Ay Gabadhu Iiga Sheekaysay, Mudo Yar Kadibna Waxaan Xarumaha Islaamka Ee Dalkayga Ka Codsaday Inay I Siiyaan Kitaab Ka Hadlaya Xuquuqda Waalidka, Waa La I Siiyay, Kolkii Aan Kitaabkii Akhriyay, Waxaan Galay Caalam Kale Oo Riyo Ah, Waxaan Niyaystay Amma Sawirtay Anoo Waalid Ah Oo Dhalay Caruur Badan Oo I Jecel Iina Samafala Iyagoon Mushqaayad Iga Doonayn Aniguna Aan U Duceeyo, Riyadan Quruxda Badani Waxay Markii Dambe Igu Kalliftay Inaan Islaamo Anoo Diinta Islaamka Ka Aqaanna Xuquuqda Waalidka Oo Kaliya”.

Waa Ilaahay Mahaddiiye Sidaas Ayay Ku Islaamtay Gabadhani Iyadoo Shayga Kaliya Ee Ay Islaamka Ka Taqaannaa Yahay Xuquuqda Waalidka, Waxa Guursaday Nin Muslim Ah Waxana Ay U Dhashay Ubad Badan Oo Kuwii Ay Rabtay Ah, Inamadeeda Midka Ugu Wayn Waxa La Yidhaa Cabdulmalik, Iyadana Waxa Loo Yaqaanaa Um-Cabdul Malik

"Jidkii Hanuunka" Qisooyinkii ay Ku soo Islaameen Shakhsiyaad Adduunka Caan ka Ah Waa Buug uu Qoray Qoraa Aaden Daahir Cabdilaahi (Aaden Cade) Qaybtii 26aad

Dr. Keith Moore

Dr. Keith Moore Waxa Uu Ahaa Mid Kamid Ah Dhakhaatiirta Ugu Caansan Aduunka Ee Ku Takhasustay Cilmiga Embryology-Ga (Cilmiga Ku Saabsan Inta Uu Ilmuhu Uurka Ku Jiro).

Qisadan Waxa Inoo Warinaya Dr. Zaqluul Al-Najaar Oo Ah Sheekh Kamid Ah Culimada Muslimiinta Ugu Caansan, Sheekhu Isagoo Sheekada Inoogu Soo Tebinaya Sidii Ay U Dhacday Waxa Uu Yidhi:

Waxa La Iigu Yeedhay Shirwayne Lagu Qabanayo Magaalada Moscow Ee Caasimadda Carriga Ruushka, Ujeedada Shirku Waxa Ay Ahayd Dood Cilmiyeed Lagaga Hadlayay Carrinta Aqooneed Ee Quraanka Iyo Sida Diintu Uga Sii Warrantay Aqoonta Casriga Ah Ee Hadda Uun La Ogaaday, Bilawgii Hore Waan Ka Maagay In Aan Shirkaas Ka Qayb-Galo, Sababtoo Ah Waxa Lagu Qabanayay Magaalo Ahayd Caasimadda Kufriga Muddo Kor U Dhaafaysa 70 Sanno. Waxaan Naftayda Hoos U Waydiiyay: Maxay Dadkani Ka Garanayaan Ilaahay Si Aynu Ugu Sheegno Waxii Quraanku Ka Warramay?, Dabadeed Waxa La Igu Yidhi: Waa Lagama-Maarmaan Inaad Shirkan Kasoo Qayb-Gasho, Waayo Waxa Innagu Soo Macsuuntay Akaadamiyadda Caafimaadka Ee Ruushka (Russian Health Academy), Sidaas Ayaan Ku Go'aansaday Markii Dambe Inaan Aado Moscow Si Aan Uga Qayb-Galo Shirka, Shirkina Waxa Uu U Dhacay Sida Tan:

Markii Shirka Si Rasmi Ah Loo Furay, Ayaa Waxa Shaashadaha Lagu Soo Bandhigay Aayado Ka Mid Ah Quraanka Kariimka Ah, Gaar Ahaan Aayadda 5^{aad} Ee Suurat Al-Sajda, Dabadeed Waxa Kacay Mid Kamid Ah Culimadii Muslimiinta Oo Fasiray Aayadda, Waxana Uu Yidhi: Hadii Aayadu Ay Tilmaantay Laba Qaddar Oo Xilli Ah Lakiin Aan Isleekayn Waxay Ku Tusaysaa Kala Duwanaansho Dhanka Xawaaraha Ah, Dabadeed Waxa Uu Bilaabay In Uu Xisaabiyo Xawaarahaas, Waxana Uu Yidhi: "Waxa Lagama-Maarmaan Ah In Kunkan Sano Ee Aayadu Sheegayso Laga Tiriyay Dayaxa, Sababtoo Ah Carabtu May Aqoon Sanadka Laga Tiriyo Qorraxda, Sanadka Dayaxu Waxa Uu Ka Koobanyahay 12 Bilood, Mudada Bishuna Waa Waqtiga Ay Ku Qaadato In Uu Dayaxu Ku Wareego Dhulka, Masaafada Majaraha Dayaxu Uu Ugu Wareego Dhulkuna Waxa Si Xeel-Dheeri Ah Loogu Qiyaasay 2.4 Billion Km" Intaa Kadib Waxa Uu Sharraxay Xisaabtan: 2.4 Billion Ayuu Ku Dhuftay 12 (Bilaha Sanadka), Kadib Waxa Uu Kusii Dhuftay 1000 Sano, Dabadeed Natiijadii Kasoo Baxday Ayuu U Qaybiyay 24 (Tirada Saacadaha Maalmaha), Haddana Waxa Uu U Sii Qaybiyay 60 (Tirada Daqiiqadaha Halkii Saac), Ugu Dambayntiina Waxa

Uu Usii Qaybiyay 60 (Tirada Il-Bidhiqsiyada Halkii Daqiiqo) Kadib Waxa Uu Soo Saaray Xawaare Ka Badan Xawaaraha Ilayska. Halkaa Markii Uu Marinayay Ayaa Waxa Kacay Professor Ruush Ahaa Oo Ku Takhasusay Physics-Ka Kana Tirsanaa Akaadamiyadda Ruushka Ee Shirka Qabatay, Waxana Uu Yidhi: **"**Shirkan Ka Hor Waxa Aan Isu Malaynayay Inaan Kamid Ahay Shakhsiyaadka Ugu Horreeya Aqoonta Physics-Ka, Gaar Ahaan Cilmiga Ilayska, Lakin Waxa Soo Baxay Cilmi Ka Weyn Cilmigaygii, Wax Cudur-Daar Ahna Uma Hayo Sidaan Uga Qatanaa Aqoonta Intaa Leeg, Waxa Kaliya Oo Aan Awoodaa In Aan Hortiina Ka Caddeeyo, In Aan Ilaah Xaq Lagu Caabudaa Jirin Ilaahay Mooyee, Muxammedna Uu Ahaa Rasuulkii Ilaahay!!!**"**.

Dr. Zaqluul Al-Najaar Oo Inoo Sii Wada Qisadan Cajiibka Ah Ee Uu Goob-Jooga Ka Ahaa Waxa Uu Yidhi:

Waxyar Kadib Waxa Iyaguna Islaamay Afar Nin Oo Kamid Ahaa Turjumaanadii, Waxa Layaab Ahayd Annagu Dacwad Maanaan Gaadhsiin Turjumaanada Waxna Umaanaan Sheegin, Waxayna Ku Jireen Qolol Quraarad Ah, Waxa Ay Isu Turjumayeen Luqadda Carabida Iyo Ruushka, Annagoon Warkooda Hayn Ayay Noo Soo Galeen Iyagoo Qiraya In Aan Ilaah Xaq Lagu Caabudaa Jirin Alle Mooyee, Muxamedna Rasuulkiisii Yahay!!!

Sheekadu Intaas Kuma Ay Ekayne, Haddana Waxa Aanu Ogaanay In Telefishanka Qaranka Ee Ruushku Duubay Islamarkaana Baahiyay Dood Cilmiyeedda Oo Dhamaystiran, Kadib Waxa Nasoo Gaadhay In Ay Ku Islaameen In Ka Badan 37 Aqoonyahan Oo Ka Tirsan Culimadii Ugu Caansanayd Ruushka!!!

Waxa Kale Oo Shirka Nala Joogay, Kana Mid Ahaa Xubnihii Lagu Martiqaaday, Dr. Keith Moore Oo Ah Mid Kamid Ah Culimada Ugu Caansan Cilmiga Embryology-Ga Ugu Yaraanna Ay Yaqaanaan Dhamaan Dhakhaatiirta Aduunku, Waa Dhakhtarkii Qoray Buugga Caanka Ah The Developing Human Oo Ah Buug Loo Tarjumay 25 Luuqadood Laguna Dhigo Badiba Jaamacadaha Iyo Kulliyadaha Caafimaadka Ee Aduunka, Diktoorku Waxa Uu Dhex Istaagay Shirwaynihii Waxana Uu Yidhi Hadaladan Qiimaha Badan:

"Ereyada Uu Quraanku Adeegsaday Marka Uu Ka Hadlayo Heerarka Samaysanka Iyo Koriinka Ilmaha Uurka Ku Jira Waa Ereyo Aad U Sar Go'an Oo Aanay Gaadhin Aqoonta Casriga Ahi, Sidaa Darteed Waxa Cad Oo Aan Muran Ku Jirin In Uu Quraanku Yahay Hadalkii Ilaahay, Muxamedna Yahay Rasuulkiisii**"** , Intaa Markii Uu Yidhi Ayaa Diktoorka La Waydiiyay: *Ma Muslimbaad Tahay, Oo Waad Islaamtay?!,* Waxa Uu Ku Jawaabay: Maya, Laakiin Waxa Aan Qirayaa In Uu Quraanku Yahay Hadalkii Ilaahay, Muxamedna Uu Ilaahay Soo Diray; Kolkaas Ayaa Haddana Loogu Hal-Celiyay: *Dee Haddaa Muslim Ayaad Tahay,* Diktoorku Se Waxa Uu Yidhi: Cadaadis Bulsheed Ayaa I Saaran Imika Hadii Aan Islaamo, Laakiin Ha La Yaabina Haddii Aad Mar Uun Maqashaan Dr. Keith Moore Wuu Islaamay, Ugu Dambayntiina Dr. Keith Moore Waa Uu Islaamay Ilaahaybaana Mahad Leh.

Shirwayne Kale Oo Lagaga Hadlayay Carinta Aqooneed Ee Quraanka Iyo Xadiiska Laguna Qabtay Caasimada Dalka Masar Ee Qaahira 1986-Kii, Ayuu Diktoorku Kalmad Ka Jeediyay, Hadalkiisiina Waxa Kamid Ahaa:

"Waxaan Qirayaa Carinta Aqooneed Ee Quraanka, Gaar Ahaan Marka Uu Ka Hadlayo Heerarka Korriinka Ilmaha Uurka Ku Jira, Sababtoo Ah Heerarka Ilmuhu Maro Marka Uu Korayo Ee Uu Uurka Ku Jiro Waa Cilmi Iyo Aqoon La Ogaaday Qarnigan 20^{aad} Dhamaadkiisa Uun, Waxa Kale Oo Aan Qirayaa In Muxamed Nnkh Yahay Rasuulkii Alle,

Sidoo Kale Waxa Aan Idiin Caddaynayaa, Wax Kasta Oo Aan Ka Akhriyay Quraanka Kuna Saabsan Koboca Iyo Abuurka Bani'aadamka Waxa Uu Si Toos Ah U Dabbaqayaa Dhammaan Aqoontii Aan Ku Bartay Cilmiga Embryology-Ga. Quraanku Waxa Uu Heerarka Korriinka Bani'aadamka U Qaybiyay 7 Heer Oo Kala Ah:

1. Asalka Insaanka Oo Ka Samaysan Dhoobo.
2. Candhuuf.
3. Xinjir Dhiig Ah.
4. Waslad Cad Ah.
5. Lafo.
6. Hilibka Oo Lafaha Ku Dul Samaysma.
7. Kobaca Iyo Samaysanka Xubnaha.

Toddobadan Heerba Waxa Ay Si Cad Ugu Xusanyihiin Aayadda 12 ^{Aad} Ee Suurat Al-Mu'minuun, Sidoo Kale Cilmiga Embryology-Guna Waxa Uu Aqoonsanyahay Toddobadan Heer Ee Quraanku Sheegay**".**

Shirwayne Kale Oo Lagu Qabtay Magaalada Moscow September 1995, Ayaa Loo Aqoonsaday In Heerarka Korriinka Iyo Samaysanka Insaanka Loogu Dhigo Jaamacadaha Aduunka Sida Uu Quraanku U Sheegay.

***** *** *****



Dr. Keith Moore

“Jidkii Hanuunka“ Qisooyinkii ay Ku soo Islaameen Shakhsiyaad Adduunka Caan ka Ah Waa Buug uu Qoray Qoraa Aaden Daahir Cabdilaahi (Aaden Cade) Qaybtii 27aad

.

Suldaankii Qabiilada Zulu

Qisadani Waxa Ay Ku Saabsantahay Dhacdadii Uu Ku Soo Islaamay Hogaamiye Ka Mid Ahaa Salaadiinta Beelaha Zulu Ee Dega Qaaradda Afrika, Beelaha Zulu Intooda Badani Waxa Ay Haystaan Diinta Kiristaanka, Suldaanku Isagoo Innooga Sheekaynaya Qisadii Uu Kusoo Islaamay Waxa Uu Yidhi:

Aabahay, Awoowgay Iyo Awowgay Awowgii Dhamaantood Waxa Ay Ahaayeen Wadaado Ka Tirsan Culimada Kiristanka, Anigu Se Aad Ayaan Uga Duwanaa, Waxaan Ahaa Khamriyo-Cab Ama Sarkhaan Ku Fogaaday Daroogooyinka Iyo Balwadaha Xun-Xun, Sidoo

Kale Kuma Aan Qanacsanayn Diinta Kiristanka Iyo Ka Qayb-Galka Munaasabadaha Cibaadada Ah Ee La Isugu Yimaado, Waxa Aannu Aad U Kala Fogayn Xaaskayga Oo Ahayd Qof Aad Ugu Jajaban Diintan Kiristanka Iyo Ku Noq-Noqoshada Kiniisadda.

Maalin Maalmaha Kamid Ah Ayaan Kiniisada Aaday, Kolkii Aannu Kiniisada Soo Galnay Ayaannu Tukanay, In Aannu Salaadda Tukanno Oo Aannu Cibaadaysannaa Waxa Ay Nagu Qaadatay Saacad Badhkeed (30 Daqiiqo), Halka Laba Saacadood Iyo Badh Aannu Ururinaynay Tabarucaad Iyo Lacag Kiniisadda Loogu Talo-Galay. Markii Aannu Lacag Ururintii Dhamaynay Ayaan Wadaadkii Na Tujiyay Waydiiyay Su'aal Kaga Yaabisay Dhamaan Dadkii Kiniisadda Ku Sugnaa, Su'aashaasi Waxa Ay Ahayd Sidan:

*Ilaahay Ayaan Kugu Dhaariyee, Maxaynu Ka Faaidaynaa Imaatinka Kiniisadda, Haddii Aynu Laba Saacadood Iyo Badh Lacag Iyo Xoolo UrurSanaynay, Salaaddii Muhiimka Ahaydna Aynu Ku Tukanay Saacad Badhkeed?!*Halkaa Marka Ay Marayso, Ayay Dhammaan Dadkii Kiniisadda Joogay Qosol Jaanta Wadheen, Wadaadkii Oo Yaab Iyo Amakaag Dhabanada Haysta, Su'aashuna Kadis Iyo Lama-Filaan Ku Noqotay Isalamarkaana La Fajacsan Dhiirranaantayda Ayaa Waayay Wax Uu Iigu Jawaabo, Wadaadki Waxa Uu Hollan Kari Waayay Hal Eray Oo Shaafiya Laabtayda, Guux Iyo Gariir Toona Waa Laga Waayay. Maalintaas Ayaan Go'aansaday In Aanan Dib U Iman Kiniisadda, Waana Aan Kaga Dhabeeyay Oo Waxay Noqotay Maalintii Iigu Dambaysay Kiniisad Aan Galo, Inkastoo Aan Gurigayga Ku Tukan Jiray Hal Mar Oo Subaxii Ah Iyo Hal Mar Oo Galabtii Ah Anigoo Khamrigii Iyo Balwadahaygii Kaleba Halkaygii Ka Wada.

Maalin Dambe Ayaan Khamri Badan Isku Hiraabiyay, Waxa Aan Cabbay Xaddi Ka Badan Intii Aan Qaadi Karayay, Sakhraddii Ayaa Iga Awood Badatay Isalamarkaana Saamayn Culus Ku Yeelatay Maskaxdaydii, Ma Aan Sarkhaamin Oo Kali Ah Balse Waaba Aan Miyir-Beelay, Walaalkay Ayaa Dhakhtarka Iila Cararay, Dhowr Cusbitaal Ayaa Iskay Dhaafiyay Kadib Markii Ay Kasi Waayeen Cilladdayda, Aakhirkii Waxa La I Geeyay Cusbitaal Aad U Mashquul Ah Oo Ay Fadhiisan Jireen Dhakhaatiir Badani, Markii Aannu Soo Gaadhnay Qolka Soo Dhawaynta (Reception-Ka) Aniguna Sidii Aan U Miyir La'ahay, Ayaa Walaalkay Loo Dhiibay Liis Ay Ku Taxanyihiin Dhamaan Dhakhaatiirta Fadhiisata Cusbitaalka, Cabbaar Markii Uu Fiiriyay Warqadii Waxa Uu Ka Doortay Mid Kamid Ah Magacyadii Dhakhaatiirta Warqadda Ku Qornaa, Dhakhtarka Uu Doortay Magaciisu Waxa Uu Ahaa Dr. Salamon, Ilaahay Ayaa Xumo Ka Hufane!, Dr. Salamon Waxa Uu Noqday Dhakhar Muslim Ah, Dr. Salamon Waxa Uu I Geeyay Qolkiisii Baadhitaanka, Baadhitaan Deg-Deg Ah Kadib Waxa Uu Amar Ku Bixiyay In La Ii Gudbiyo Dhakhtarka Dawladda Waayo Xaaladayda Ayaa Ahayd Mid Khatar Ah Una Dhawayd Inay Soo Gaba-Gabayso Noloshayda, Waxa La Ii Wareejiyay Cusbitaalkii Waynaa Ee Xukuumadda, Waxaan Ku Jiray Oo La Igu Dabiibayay Muddo Dhan Saddex Bilood Oo Aan Ku Jiray Miyir-Beel Dhamaystiran. Kolkii Aan Koomadii Kasoo Baxay, Waxaan Ku War Helay Anigoo Jiifa Meel Igu Cusub Oo Ay Is-Waydaaranayaan Dad Xidhan Dhar Cad-Cad, Hadii Aanay Xaaskaygu Ila Joogi Lahayna Waxaaban U Qaadan Lahaa Inaan U Gudbay Caalam Kale Oo Aan Ahayn Kii Aan Ku Noolaa, Islamarkiiba Si Argagax Leh Ayaan U Waydiiyay: Waa Maxay Meeshan Aan Joogaa?! Waxay Iigu Jawaabtay: Waa Cusbitaalkii Dawladda, Waxana Ay Iiga Soo Sheekaysay Sidii Wax Iigu Dhaceen Iyo Inaan Mudo Dheer Kooma Ku Jiray Oo Aan Hadda Soo Miyirsaday (Soo Naaxay).

Waxa Aan Dhakhtarkii Waynaa Ku Jiray Bil Dambe Oo Uu Ii Socday Daryeel Caafimaad Iyo Daawayn Guud, Intii Aan Cusbitaalka Ku Jiray Dr. Salamon Maalin Kasta Waa Uu Isoo Booqan Jiray, Wax Aqoon Ah Umaan Lahayn Diktoorka, Marka Laga Reebo In Uu Yahay

Dhakhtarkii Iisoo Gudbiyay Cusbitaalkan Aan Ku Jiro, Kolkii Ay Ii Dhamaatay Daawaynti Ee Aan Ka Baxay Cusbitaalkii, Ayaan Maalin Maalmaha Kamid Ah Booqasho Ugu Tagay Dr. Salamon Isagoo Jooga Xafiiskiisa, Halkaasna Waxa Ka Bilaabmay Hayaankii Beddelay Noloshayda. Markii Aan Diktoorka Usoo Galayba Waxa Aan Arkay Walax Igu Cusub Oo Sudhnayd Gidaarka Xafiiskiisa, Waxana Aan Waydiiyay Waxa Uu Yahay Shaygani, Si Daganaani Ku Jirto Ayuu Iigu Jawaabay: Waa Sijaayad Aan Ku Tukado, Halkaas Ayaan Anigu Ku Ogaaday In Uu Muslim Yahay, Isla-Markiiba Waxa Uu I Waydiiyay: Wali Quraanka Ma Akhriday? Waxaan Ugu Hal-Celiyay: May, Balse Waa Aan Maqlay, Halkaas Ayuu Iigu Dhamaaday Kulankii Dr. Salamon, Balse Waxa Uu Kulankaasi Qalbigayga Kaga Tagay Raad, Waxa Aan Isku Arkay Dareen Aanan Hore Isugu Arag.

Tuulada Aan Daganay Waxa Ku Yaallay Masaajid Cidla' Ah Oo Laga Guuray, Waxa Kaliya Oo Joogi Jiray Nin Waardiye Ah Oo Loogu Talo-Galay Inuu Masaajidka Sii Ilaaliyo Kadib Markii Ay Xaafada Ka Guureen Muslimiintii Daganayd, Ninkan Oo La Odhan Jiray *Mawlaanaa* (Sheekhayagii) Waxa Uu Ahaa Imaamkii Masaajidka. Masaajidku Waxa Uu U Ekaaday Guri Rooxaaneed, Cawska Iyo Doogga Ka Baxay Hal Mitir Ayuu Kor U Dhaafay, Albaabka Iyo Daaqaduhu Aad Ayay U Daxalaysteen Waana Ay Iska Furnaayeen. Maalinta Aan Masaajidkan Soo Booqday Waxa Ay Ahayd Kadib Markii Aan Go'aansaday Inaan Diinta Islaamka Soo Galo Iyadoo Aanay Jirin Cid Dacwad Isoo Gaadhsiisay Ama Igula Talisay Inaan Soo Islaamo Marka Laga Reebo Hab-Dhaqankii Wanaagsanaa Ee Dr. Salamon Taas Oo Waliba Aan Ahayn Soo Islaamid Toos Ah. Waxa Aan Soo Galay Daaraddii Masaajidka, Islamarkiiba Waxa Aan Kadis Ah Uga Sii Gudbay Qolkii Sheekhu Ku Jiray, Anigoo Aan Wax Hor-Dhac Ah Siinin Ayaan Wadaadkii Si Deg-Deg Ah Ugu Idhi: Waxa Aan Rabaa Inaad I Barto Sida Loo Tukado!, Sheekhii Oo Yaabban, Ayaa I Waydiiyay: Miyaad Soo Islaamtay?!, Waxa Aan Ugu Jawaabay: Haa, Waxa Aan Go'aansaday Kuna Qanacsanay Inaan Diinta Islaamka Soo Galo, Sheekhi Waa Uu I Kaxeeyay, Waxa Uu I Geeyay Meesha Laga Waysaysto, Kolkii Aan Waysaystay Ayuu Ashahaadda Ii Qabtay Kadibna Waxa Uu I Baray Sida Loo Tukado Waana Aan La Tukaday, Halkaas Ayaan Si Toos Ah Ugu Soo Islaamay.

Markii Aan Kusoo Laabtay Gurigaygii Ee Aan Reerka U Sheegay In Aan Islaamay Fajac Iyo Dhabana-Hays Ayay Ku Noqotay, Gaar Ahaan Wiilka Caruurtayda Ugu Waynaa Oo Si Cadho Leh Iigu Yidhi: *Aabbo, Miyaad Waalatay?,* Waxaan Ugu Jawaabay: *Haddii Cidi Waalantahay Waa Idinka Aniguna Waxa Aan Ahay Ka Idiinku Caqliga Badan.* Anigoo Ahaa Madax Dhaqameed Islamarkaana Awood Maamul Lahaa Awgeed Qoyskaygu Ima Ay Horjoogsan Karaynin, Waxyar Kadibna Waxa Soo Islaamay Inankaygii Maxamed, Waxa Kale Oo Isagana Ku Dayday Oo Soo Islaamay Asxaabtiisii, Intaa Waxii Ka Dambeeyayna Waxa Soo Badanayay Dadka Soo Islaamayay, Maalin Kasta Dad Cusub Ayaa Diinta Soo Gali Jiray, Ilaa Aanu Markii Dambe Waynay Meel Aanu Ku Kala Tukano, Markii Ay Na Qaadi Waayeen Goobihii Cibaadadu Waxa Aan U Tagay Jaaliyadii Muslimiinta Ee Magaalada Oo Ahaa Hindi, Waxaan Ka Codsaday Sidii Dadka Loogu Dhisi Lahaa Goobo Cibaado, Si Fiican Ayay Iila Hadleen Wax Wanaagsana Way Ii Ballan Qaadeen, Waxana Ay Igu Yidhaahdeen Masaajid Ayaanu Kaaga Dhisi Doonaa Xaafada Aad Degentay, Balse Balanqaadkoodii Waxa Uu Ku Ekaaday Insha Allaah Kaliya. Xaaskaygu Iyadu Wali May Soo Islaamin Balse Way Na Ixtiraami Jirtay Waxana Ay Ilaalin Jirtay Dareenkayaga, Toban Sano Markii Ay Ila Noolayd Iyadoo Diinteeda Haysata Aakhirkii Iyaduna Way Soo Islaamtay, Maalintii Ay Diinta Islaamka Soo Gashay Ayaan Inankayga Ugu Wayn Ku Idhi: Aabo, **Makka** Ayaan Tagayaa Si Aan Ilaahay Ugu Soo Mahad-Naqo Maadaama Hooyadaa Soo Islaamtay, Wiilkaygi Waxa Uu Iigu Hal-Celiyay: Aabo, Mahaysano Dhaqaale Aynu Ilaa Makka Ku Aadno, Waxaan Ku Idhi: Ilaahay Ayaa Inoo Fududaynaya, Rajadaydii Ayaa

Dhabawday Oo Waxa Aan Aniga Iyo Wiilkaygii Aadnay **Makka**, Waanu Soo Cimraysanay, Waxa Sidoo Kale Aannu Soo Booqanay **Madiina.**

Waxa Layaab Ahaa In Beelaha Zulu Iyagoo Haystay Diinta Kiristaanka Hadana Ay Muslimiinta Iskaga Mid Ahaayeen Dhaqamo Badan Oo Ay Kamid Ahaayeen Kuwan Hoos Ku Qorani:

v Marka Wax La Cunayo Ragga Hal Saxni Ayaa La Isugu Ridaa, Dumarku Se Raga Lama Cunaan Ee Gooni Ayay U Cunaan.

v Beelaha Zulu Cuntada Midigta Ayay Ku Cunaan.

v Beelaha Zulu Sida Muslimiinta Ayay Xoolaha U Gawracaan.

v Beelaha Zulu Waxa Ay Dhaqan U Leeyihiin In Ay Guursan Karaan 4 Dumar Ah.

v Beelaha Zulu Marka Uu Qof Ka Geeriyoodo Waxa Ay U Aasaan Si Lamid Ah Sida Ay Musliintu U Aasto Dadka Ka Dhinta, God Ayay U Qodaan, Dhanka Midig Ayay U Dhigaan, Qibladana Way U Jeediyaan.

“Jidkii Hanuunka“ Qisooyinkii ay Ku soo Islaameen Shakhsiyaad Adduunka Caan ka Ah Waa Buug uu Qoray Qoraa Aaden Daahir Cabdilaahi (Aaden Cade) Qaybtii 28aad

Qisadii Foosiya

Qisadani Waxa Ay Ka Dhacday Dalka Nigeria, Waxay Ku Saabsantahay Gabadh U Dhalatay Dalka Nigeria Iyo Sidii Ay U Soo Islaamtay, Gabadhan Oo Markii Hore Ahayd Kiristaan Waxa Qisadeeda Inoo Soo Gudbinaya Sheekh Abu-Islaam Axmed Bin Cali, Sheekhu Isagoo Qisada Qayb Kamid Ah Ka Werinaya Wiil Abu-Bakar La Yidhaa Oo Reer Nigeria Ah Qaybta Kalena Goob Joog U Ahaa Waxa Uu Hadalkiisa Ku Bilaabay Sidan:

Waxa Is-Qabsaday Onkod Reenkiisa Lagu Dhego-Beelayo Iyo Hillaac Walalacdiisa Aanay Labada Indhood U Adkaysan Karin, Dhulku Waxa Uu U Ekaa In Buste La Huwiyay Oo Kale Sababtoo Ah Waxa Afarta Jiho Iyo Korba Is-Celiyay Fadad Waaweyn, Heegooyin Madow Iyo Daruuro Godlan, Dhibcaha Roobka Ee Daruuraha Ka Shubmayay Waxaad Moodaysay In Togag Xaga Sare Innaga Xigaa Hoos U Soo Fataheen, Nimco Waliba Nusqaan Lehe Anigoo

Waxoogaa Cabsi Ahi I Hayso Ayaan Indhaha Qac Ku Siiyay Gabadh Kaligeed Ah Oo Roobka, Dhoobada Iyo Daadka Dhex-Qaadaysa, Gabadha Waxa Ka Muuqday Daal Badan Sababtoo Ah Waxa Isugu Biiray Qoyid, Qadh-Qadhyo (Dardhasho),Siibasho Iyo Kaacaa-Kuf , Hareeraha Oo Dhan Waxa Uga Gacan Haadinayay Gacmo Ujeedooyin Gooni Ah Leh, Waxay Arkaysay Dhoola-Cadayn Iyo Wajiyo Furan Oo Lagu Soo Dabayo, Anigoo Yaaban Ayaan Abu-Bakar Oo Ahaa Wiil Caato Ah Islamarkaana Meesha Marayay Waydiiyay: *Waa Maxay Inantan Qisadeedu?!* Abu-Bakar Waxa Uu Iigu Hal-Celiyay: *Anaa Kaaga Warrami Wax Walbee Horta Aynu Roobka Ka Jirsano Geedkaas Babayga Ah Hoostiisee Ina Keen*, Waanu Orodnay Oo Geedkii Babayga Ahaa Hoostiisa Ayaannu Roobkii Ka Galnay, Islamarkiibana Waxa Uu Abu-Bakar Ii Bilaabay Sheekadii Inanta Isagoo Isku Daraya English Iyo Waxoogaa Carabi Jajaban Ah, Hadalkana Waxa Uu Ku Bilaabay Sidan: "Saaxiib, Maalin Maalmaha Kamid Ah Oo Aan Ka Shaqaynayay Mashruuc Dhisme Ah Oo Loo Dhisayay Dadka Cusub Ee Soo Hanuunay Ayaan Tujiyay Shaqaalihii Aanu Wada Shaqaynaynay, Kolkii Aanu Salaada Ka Baxnay Ayaan Arkay Gabadh Na Daawanaysay, Kolkiiba Waxa Ay Ii Dadajisay Su'aal Lama Filaan Ah, Su'aashaasi Waxay Ahayd: *Waxaad Tahay Nin Afrikaan Ahe Maxay Salaadaadu Uga Duwantahay Salaadayada?,* Waxaan U Sheegay In Aan Muslim Ahay, Qosol Ayay Jaanta Wadhay Waxana Ay Tidhi: *Muslimaa, Ma Kuwa Afarta Dumar Ah Guursada, Dumarkana Ku Dada Maryo Waawayn Sidii Uu Ku Dhacay Cudurka Maroodigu Oo Kale, Islamarkaana Ka Cabsada In Baniaadamku Dumarkooda Arko,* Qosol Labaad Ayay Hadalkeeda Ku Soo Xidhay; Maan Cadhoon Balse Si Aad U Deggan Ayaan Ugu Jawaabay Waxana Aan Ku Idhi: *Annagu Haddaanu Muslimiinta Nahay Dumarkayaga Waanu Ixtiraamnaa, Waanu Xaq-Dhawrnaa, Suuqyadana Ma Yaacaan Iyagoo Eryanaya Rudhmo Cunto Ah, Dumarkayagu Agtayada Waxay Ka Yihiin Boqorado.*

Gabadhi Wax Ay Ku Hadasho Ayay Wayday, Way Iga Tagtay Iyadoo Isbedeshay, Waxay Dib Ugu Laabatay Gurigoodii Oo Kasoo Horjeeday Halka Aanu Dhismaha Ka Wadnay, Maalin Dambe Ayay Igu Soo Noqotay Si Ay Iila Gasho Doodo Cadho-Galin Iyo Yool-Baadh Ah, Maalinba Maalinta Ka Dambaysa Hadalkeedii Iyo Doodeedu Waxa Ay Usoo Dhawaanayeen Kuwo Macquul Ah, In Badan Ayay Igu Soo Noqnoqotay, Laga-Yaabaa In Ay Bilo Gaadhaysay, Maalin Kasta Way Noo Iman Jirtay Shaqaalahana Waxa Ay U Keeni Jirtay Bariis Caano Lagu Kariyay, Bal Qabsoo Waxay Ka Faa'iidaysan Jirtay Duhurka Marka La Kala Seexdo Si Doodo Aannu U Wadaagno, Su'aalo Badanna Ay Ii Waydiiso, Waxaan Is Odhan Jiray Malaa Inantan Doodeedu Ma Dhamaanayso, Daqiiqadii Kasta Waxaan Ka Cabsan Jiray Oo Aan Iska Fiirin Jiray Aabaheed, Sababta Oo Ah Maalin Ayaa Annagoo Markaa Goobta Dhismaha Ku Tukannay Ayaan Ku War-Helay Wax Qaboow Oo Koodka La Igaga Qabtay, Islamarkiibana Waxaan Maqlay Cod Argagax Leh Oo Igu Leh: *Waan Ku Dilayaa Hadii Aad Inantayda Islaamiso;* Markiiba Codkii Ayaan Gartay, Mise Waa Wadaadkii Ugu Waynaa Kiniisadda Magaalada Oo Qorigiisii Gaboobay Koodka Igaga Haya, Ogow Waliba Wax Dacwad Diineed Ah Oo Aan Inantiisa U Sheegay May Jirin.

Inantii Wax Ay Maalin Walba Noo Timaado Oo Aannu Su'aalo Iyo Afkaar Is-Waydaarsanaba Waxay Ku Qanacday Diinta Islaamka, Waana Ay Islaamtay, Waxase Kasoo Gaadhay Hanjabaad, Cago-Juglayn, Garaacid Iyo Dhibaatooyin Badan Oo Kaga Imanayay Dhanka Aabaheed, Waayo Aabaheed Waa Wadaadka Ugu Sarreeya Kiniisadda Magaalada, Waxay U Dulqaadan Jirtay Dhib Aan Qof Bani'aadam Ahi U Dulqaadan Karin".

Intaa Markuu Abu-Bakar Iiga Sheekeeyay, Ayaanu Is Waydiinay: Toloow, Maanta Xilligan Roobku Da'ayo Maxaa Soo Saaray?, Balse Markaas Ayaanu Dareenay In Ay Waajibkayaga Ahayd In Aanu Inanta Joojino, Waraysano Islamarkaana Roobka Ka Xarayno, Waxaanu Isku

Daynay In Aanu Kadaba Yaacno Lakin Waannu Gaadhi Waynay, Meel Alle Meel Ay Martayna Waanu Garan Waynay.

Maalintii Labaad Ayaanu Soo Ogaanay In Inanta Aabaheed Guriga Kasoo Eryay, Kolkii Lasoo Eryay Waxay Ka Fekeraysay, Xagii Ay Ku Noolaan Lahayd Iyo Caawa Halkii Ay U Hoyan Lahayd, Nasiib Wanaag Se Waxa Ay Aragtay Minaarada Dheer Ee Masjid Al-Bayan, Way Faraxday, Masaajidkii Ayay Gashay Habeenkiina Masaajidka Ayay U Hoyatay, Markuu Waagi Beryay Ayaa Waxa Arkay Sheekh La Yidhaa Sh. Sulaymaan, Sheekhii Ayaa Kexeeyay, Waxa Uu Geeyay Gurigiisii Islamarkaana Ku Ballamiyay Reerkiisa In Ay Ilaaliyaan Una Dulqaataan.

Dhawr Maalmood Markii Ay La Joogtay Afadii Sheekh Sulaymaan Ayay Aad Ugu Sii Qanacday Islaamka Kolkii Ay Si Fiican Uga Bogatay Hab-Dhaqanka Muslimiinta, Maalintii Dambe Ayaa Aabaheed Oo Cadho Karaya, Meel Kastana Kasoo Raadiyay Islamarkaana Sita Qorigiisii Gaboobay, Ciidana Wataa Yimid Gurigii Sheekh Sulaymaan, Gurigii Ayay Isku Hareereeyeen, Waxana Uu Ku Hanjabay In Uu Guriga Iyo Waxii Ku Jiraba Isku Gubayo Hadii Aan Inantiisii Lasoo Saarin. Sheekh Sulaymaan Ayaa Soo Baxay, Waxana Uu U Sheegay In Inantiisii Nabad Qabto Oo Aan Wax Dhib Ahi Ku Dhicin, Odaygi Waxa Uu Codsaday In Uu Arko Oo Ay Soo Baxdo, Inantii Soo Baxday, Markii Uu Aabaheed Arkay In Ay Nabad Qabto Ayuu Farxay, Waxana Uu Ku Amray In Ay Gurigiisii U Raacdo, Balse Way Diiday Waayo Waxa Ay Ogtahay Waxa Kaga Horreeya Oo Ah Garaacid Iyo Ciqaab Adag, Kolkii Ay Diiday Ayuu Odaygi Cadho Sii Holcay, Waxana Uu Huriyay Oo Dab Ku Qabtay Alaab U Dhawayd, Markii Sheekadu Adkaatay, Ayuu Booliski Yimid Islamarkaan Kala Kexeeyay Dadkii Meesha Ku Soo Ururay, Arrintii Waxa Sidaa Kula Wareegay Booliska.

Wadaadkii Inanta Dhalay Booliskii Waxa Uu Ka Codsaday In Inantiisa Gurigiisii Loogu Celiyo, Balse Inantii Ayaa Diiday, Qadiyadi Waxay Noqotay Mid Adag, Waxana Loo Gudbiyay Maxkamadda, Maxkamaddina Waxa Ay Xukuntay In Inantu Ay Qaan-Gaadh Tahay, Maskaxdeeduna Caadi Tahay, Sidaa Darteed Ay Xor U Tahay Diinta Ay Qaadanayso, Xorriyadna Ay U Haysato Sida Ay Nolosheeda Ugu Talinayso.

Muslimiintii Magaalada Oo Difaacaysay Inanta, Korkana Kala Socotay Dacwadii Maxkamada Ka Socotay, Ayaa Markii Ay Maqashay Go'aankii Maxkamada Isugu Soo Ururay Suuqyada Magaalada Iyagoo Ku Dhawaaqaya ***"Foosiyi Waa Annaga … Foosiyi Waa Walaashayo … Foosiyi Waa Muslimad";*** Saxaafadii Magaalada Ayaa Dhacdadii Qaadaa Dhigtay.

Sheekh Sulaymaan Ayaa Martiqaaday Inanta Aabaheed Iyo Hooyadeed, Si Fiican Ayuu U Sharfay, Wuu Soo Dhaweeyay, Inantoodii Ayuu Tusay Oo U Keenay, Islamarkaana Waxa Uu Inantii Kala Dooransiiyay In Ay Waalidkeed Raacdo Iyo In Ay Gurigiisa Ku Noolaato, Maadaama Oo Ay Maxkamadu Go'aamisay In Ay Tahay Qof Muddakar Ah Oo Masiirka Nolosheeda Ka Talin Karta.

Odaygii Inanta Dhalay Ayaa Isagoo Qiiraysan Kusoo Booday Sheekh Sulaymaan Oo Laabta Galiyay, Hooyadeedna Oohin Kalgacal Ayay Meel Agtiisa Ah La Fadhiisatay, Waalidkani Waxa Ay Dareemeen Nabad Jaceylka Iyo Naxariista Islaamka, Waxa Ay Ogaadeen In Islaamku Yahay Diin Wada-Noolaansho, Diin Sharafeed, Diin Bani'aadanimada Iyo Xuquuqda Insaanka Aad U Ilaalisa, Balse Aanay Ahayn Sidii Markii Hore Ay Ka Filayeen Ama Ay Ka Aaminsanaayeen Oo Ahayd, In Islaamku Yahay Diin Argagixiso, Diin

Xuquuqda Dumarka Ku Tumata, Diin Ay Ku Badantahay Dilka Iyo Axmaqnimadu, Ku Darsoo Waa Sidii Ay Aaminsanayd Foosiyi Intii Aanay Soo Islaamin Ka Hor, Waana Su'aashii Koowaad Ee Ay Waydiisay Wiilkii Abu-Bakar Ee Gacanta Wayn Ku Lahaa In Ay Soo Islaamto.

Foosiya Markii Ikhtiyaar Loo Siiyay In Ay Waalidkeed La Noolaato Iyo In Ay Guriga Sheekh Sulaymaan Sii Joogto, Waxa Ay Dooratay In Ay Waalidkeed Raacdo Islamarkaana Gurigoodii Ku Noolaato Mar Hadii Waalidkeed Gaar Ahaan Aabaheed Gar-Waaqsaday Wanaaga Islaamka Iyo In Aanay Inantiisu Xumaane Kaliya Ay Qaadatay Caqiido Wanaagsan, Sidaas Ayay Gurigoodii Ugu Noqotay Iyadoo Qalbigeeda Uu Ka Buuxo Nuurka Iimaanku, Iyada Oo Uu Korkeeda Ka Muuqdo Iftiinka Islaamku, Iyadoo Oo Ku Faraxasan In Uu Alle Waafajiyay Jidkii Hanuunka, Iyada Oo Jaceyl Dheeraad Ah U Haysa Muslimiinta, Sidaa Darteed Ayay Muslimiintii Magaalada Degganayd Ugu Bixiyeen Foosiya Oo Macnaheedu Yahay: Tii Guulaysatay.

"Jidkii Hanuunka" Qisooyinkii ay Ku soo Islaameen Shakhsiyaad Adduunka Caan ka Ah Waa Buug uu Qoray Qoraa Aaden Daahir Cabdilaahi (Aaden Cade) Qaybtii 29aad

.

Qisadii Layaabka Lahayd Ee Ibraahim Silly

Qisadani Waxa Ay U Eegtahay Mala-Awaal Iyo Dhacdo Aan Suurto-Gal Ahayn, Balse Waa Dhacdo Run Ah Oo Uu Sheekh Abu-Islaam Axmed Bin Cali Inoo Soo Warinayo Isagoo Sheekada Ka Maqlay Halyeeyga Ay Qisaduba Ku Saabsantahay, Waa Kan Sheekh Axmed Oo Qisada Bilaabayaa Ee Aan Idiin Kala Baxo:

Waxaan Joogay Magaalada Johansberg Ee Carriga Koonfur Afrika, Johansberg Waxay Ahayd Magaalo Hodan Ku Ahayd Dahabka, Waxa Aan U Shaqayn Jiray Islamarkaana Aan Maamule Ka Ahaa Xafiiska Xidhiidhka Islaamka Aduunka (Raabidatul Caalam Al-Islaami) Ee South Africa. 1996-Kii Oo Aanu Ku Jirno Jiilaal Aad U Qabow, Ayaa Maalin Maalmaha Ka Mid Ah Oo Ay Cirka Daruuro Qariyeen, Dabayl Xoog Badan Oo Qaboobina Dhacayso, Waxa Aan Ballan La Lahaa Qof Muhiim Ah, Waxa Aan Isu Diyaariyay Inaan Soo Dhaweeyo Si Fiicana U Martiqaado, Qofka Aan Ballanta La Lahaa Waxa Uu Ahaa Qof Ay Qaraabo Ahaan Is Xigaan Nelson Mandella Madaxwaynihii Hore Ee Dalka South Africa, Waxa Uu Ahaa Nin Aad Ugu Jajaban Diinta Kiristanka, Waxa Uu Ahaa Wadaad Ka Tirsan Kiniisada Magaalada, Waxa Uu Ahaa Diin-Fidiye Dadka Gaadhsiiya Diinta Kiristanka, Magaciisana Waxa La Odhan Jiray **Silly.**

In Aan Silly La Kulmo Oo Aan La Ballamaa Waxa Ay Ku Timid Isaga Ayaa Maalin U Yimid Xog-Hayahayga Oo La Odhan Jiray Cabdi-Khaaliq Matiir, Waxana Uu Ku Yidhi, Waxa Aan Rabaa Inaan La Kulmo Madaxda Ururka Oo Aan Kala Hadlo Arrimo Muhiim Ah; Markii Ay Gaadhay Xilligii Aanu Ballansanayn Ayuu Ii Yimid Silly, Waxa La Socday Nin Feedh-Yahan Hore Ahaa Oo La Odhan Jiray Sulaymaan, Sulaymaan Waagii Hore Waxa Uu Ahaa Kiristan Lakin Gadaal Ayuu Soo Islaamay Mar Uu Wareeg Feedh-Feedh Ah La

Yeeshay Feedhyahankii Caanka Ahaa Ee Muxamed Cali Kalaay, Labadoodiiba Waxaan Kula Kulmay Xafiiskayga, Aadbaan Ugu Faraxsanaa In Aan La Kulmo.

Silly Waxa Uu Ahaa Nin Gaaban Oo Madow, Waxa Uu Ahaa Nin Qosol Badan Oo Farxaan Ah, Kasoo Horjeedkayga Ayuu Fadhiistay, Si Hufan Oo Dabacsan Ayuu Noogu Sheekeeyay, Markiiba Waxa Aan Waydiiyay: *Silly, Ma Ogaan Karnaa Oo Ma Nooga Sheekayn Kartaa Qisadii Aad Ku Soo Islaamtay?,* Waa Uu Dhoola-Caddeeyay, Waxana Uu Yidhi: *Haa Dabcan,* Silly Waxa Uu Bilaabay Sheekadii, Waxana Uu Yidhi:

"Waxa Aan Ahaa Wadaad Firfircoon, Waxa Aan Kiniisadda Ugu Shaqayn Jiray Si Daacad Ah Oo Dadaal Badan, Intaa Kumaan Koobnayne Waxa Aan Ka Mid Ahaa Diin-Fidiyeyaasha Koonfur Afrika, Hawl-Karnimadayda Iyo Firfircoonidayda Awgeed Faatikaanka Ayaa Ii Doortay In Aan U Shaqeeyo, Dhaqaale Iyo Mushahar Fiicanna Way Ii Qoreen, Si Kasta Waan U Shaqeeyay Si Aan U Gaadho Yoolkayga Oo Ahaa Kiristaamaynta Dadka, Waxa Aan Booqashooyin Iyo Safaro Badan Oo Xidhiidh Ah Ugu Bixi Jiray Iskuulada, Cusbitaalada, Tuulooyinka Iyo Dhulka Miyiga Ah, Waxa Aan Dadka Siin Jiray Lacag Iyo Xoolo Badan Oo Aan Uga Dhigayay Gargaar, Kaalmo, Sadaqo Amma Hadyado, Balse Niyadaydu Waxa Ay Ahayd In Aan Ku Dhexgalo Quluubta Dadka Si Aan U Kiristaameeyo, Kiniisadduna Waxa Ay Igu Harqin Jirtay Xoolo Badan, Dabadeed Waxa Aan Noqday Maalqabeen, Waxa Aan Yeeshay Guri, Gaadhi Iyo Mushahar Wanaagsan, Darajo Fiicanna Waxa Aan Ku Yeeshay Boobabka Dhexdooda, Iyadoo Ay Sidaas Tahay, Ayaan Maalin Maalmaha Kamid Ah U Baxay Xarun Ganacsi Oo Degmadayda Ku Taallay Si Aan Uga Soo Dukaansado, Halkaas Ayay Ka Dhacday Lama-Filaanta Iyo Sheekadii Laf Dhuun Gashay Igu Noqotay!!

Markaan Suuqa Badhtankiisa Marayo Ayaa Waxa Iga Soo Horbaxay Nin Koofiyad Xidhan, Ninku Waxa Uu Ahaa Ganacsade Hadyadaha Iibiya, Waxaan Xidhnaa Dharka Baadariyada Ee Dhaadheer, Taas Oo Ahayd Astaan Aannu Dadka Kaga Duwanayn, Ninkii Waxaan Damcay Inaan Wax Ka Iibsado, Waxoogaa Markii Aannu Ku Gorgortanay Qiimaha Hadyadda Ayaan Ogaaday In Uu Muslim Yahay, Hadaanu Nahay Reer Koonfur Afrika, Diinta Islaamka Waxa Aanu U Naqaanaa Diinta Hindida, Waayo Muslimiinta Koonfur Afrika Caanka Ka Ahayd Waxay Ahaayeen Hindi, Markaan Ninkii Ka Iibsaday Hadyadii, Hadyad Yaan Odhane, Dabinadii Aanu U Dhigi Jirnay Dadka, Si Ay Noogu Fududaato In Aanu Kiristaamayno, Waayo Waxa Aanu Ka Faa'idaysan Jirnay Xaaladda Baahiyeed Ee Dad Badan Oo Muslimiin Ah, Ayay Ganacsadihii Muslimka Ahaa Na Dhex Martay Su'aalahan Iyo Jawaabahan Koobani:

Ganacsadihii: Ma Baadari Ayaad Tahay?

Silly: Haa

Ganacsadihii: Ilaahaagu Waa Maxay? Maxaad Caabudaa?

Silly: Ilaahaygu Waa Ciise.

Ganacsadihii: Car Waxa Aad Keentaa Aayad Kaliya Oo Ku Jirta Diintiina Injiil Oo Ciise Afkiisa Ka Yidhi: Anigaa Ilaahay Ah, Amma Inankii Ilaahay Ayaan Ahay Ee I Caabuda.

Su'aashaasi Waxa Ay Madaxayga Ku Noqotay Qamar Sanaaci Samada Kagasoo Dhacay, Wax Jawaab Ahna Uma Aan Helin, Waxa Aan Isku Dayay In Aan Xusuusta Dib U Celiyo

Oo Aan Aayadihii Kitaabka Injiil Iyo Kutubta Kiristanka Oo Dhan Ka Dhex Raadiyo Jawaab Shaafi Ah Oo Aan Ugu Jawaabo Ninkan, Runtii Waan Ka Waayay, May Jirin Aayad Kaliya Oo Ciise Uu Afkiisa Ka Yidhi: Ilaahay Ayaan Ahay Amma Inankii Ilaahay Ayaan Ahay.

Su'aashaasi Way I Dhibtay, Werwer Iyo Walaac Hor Leh Ayaa Igu Abuurmay, Cidhiidhi Iyo Culays Ayaan Laabtayda Ka Dareemay, Waxaan Iswaydiiyay Sidee Ayay Kaaga Maqnayd Su'aashan Oo Kale, Ninkiina Waan Iskaga Tagay, Waan Iska Dhaqaajiyay Aniga Oo Aan Garanayn Meel Aan U Socdo, Waxa Aan Go'aansaday In Aan Su'aashan Jawaab U Raadiyo Waxay Doonto Ha Igu Qaadatee, Nasiib Darro Se Waan U Waayay Jawaab, Waxaan U Tagay Golihii Sare Ee Kiniisadda, Waxaan Ka Codsaday In Kulan Degdeg Ah La Isugu Yimaado, Way Iga Ogolaadeen, Markii La Isu Yimi, Ayaan Uga Sheekeeyay Sidii Wax U Dhaceen Iyo Su'aashii La I Waydiiyay, Iima Ay Garaabine Inta Ay Wada Cadhoodeen Waliba Anigii Daalac Ii Raaceen Ayay Yidhaahdeen: Hindigu Wuu Ku Khiyaameeyay, Waxa Uu Rabay Inuu Kuu Lumiyo Diinta Hindida, Waxaan Ku Idhi Waa Hagaage Bal Su'aasha Ka Jawaaba Oo Aayad Sheegaysa In Ciise Yidhi Anaa Ilaahay Ah Ee I Caabuda Keena, Ileen Waa Su'aal U Baahan Jawaabe, Cid Ka Jawaabta Waa La Waayay, Shib Ayaana Laga Yidhi.

Maalintii Axadda Markay Gaadhay, Ee Aan Isu Diyaariyay Khudbadii Iyo Darsigii Aan Kiniisadda Ka Bixin Jiray, Ee Aan Dadkii Soo Hor Istaagay, Ayaan Guux Iyo Gariir Toona Iska Waayay, Hadalba Gam, Dadkina Way Yaabeen, Waxna Way Ka Garan Waayeen Belaayada Wadaadkoodii Haleeshay, Nin Aannu Saaxiib Ahayn Ayaan Ku Idhi: Waar Waan Daallanay Oo Si Ayaan Ahaye Darsiga Dadka Usii Gal, Aniguse Kiniisadii Waan Iskaga Baxay, Aniga Oo Mooraal Jabsan, Aniga Oo Bilaa Niyad Ah, Aniga Oo Wax Aan Sameeyo Garan La'.

Gurigaygii Ayaan Tagay Anigoo Wareer Iyo Walaac Qaba, Meel Yar Oo Gurigayga Kamid Ah Ayaan Iska Fadhiistay, Waan Ooyay, Dabcan Aad Ayaan U Ooyay, Oo Inta Aan Kor Eegay Ayaan Ducaystay, Toloow Yaan Baryay?, Waxaan Baryay Kii Aan Aaminsanaa In Uu Ilaahii Waynaa Ee I Abuuray Yahay, Ducadaydi Waxay Ahayd: ***"Rabbii .. Kii I Abuurayoow. Albaabadii Oo Dhami Way Iga Soo Xidhmeen Albaabkaaga Mooyee Ee Ha Iga Maanacin Inaan Xaqiiqada Ogaado, Meeday Xaqiiqadu Oo Xaqi Mee?. Yaa Rabbi! Yaa Rabbi, Ha Igu Eegin Dawakhan Aan Ku Jiro, Igu Ilhaami Sida Saxda Ah Oo Xaqiiqada I Tus"..***

Intaa Markii Aan U Ducaystay Ayaan Gamay, Waan Suuray, Hurdada Dhexdeedii Ayaa Manaam La Igu Tusay Aniga Oo Hool Wayn Kaligay Ku Jira, Xaga Hore Ee Hoolka Waxa Iiga Soo Muuqday Nin, Ninkaa Nuurkii Ka Baxayay Awgii Ayaan Wajigiisa Iyo Muuqaalkiisa Si Fiican U Arki Waayay, Waxaan Markiiba U Maleeyay, In Uu Yahay Ilaahii Aan Hadda Waydiisanayay Inuu Xaqa I Tuso, Lakin Waxa Ii Caddaatay In Uu Yahay Nin Nuur Ka Baxayo, Ninkii Intuu Dhankayga Soo Tilmaamay Ayuu Yeedhay Oo Yidhi: Ibraahinoow! Hareerahayga Ayaan Eegay, Waan Daymooday Si Aan U Arko Ibraahinkan Uu U Yeedhayo, Cid Kale Oo Hoolka Ku Jirtaba Waan Arki Waayay, Wuu Isoo Fiiriyay Oo Igu Yidhi: Waa Adiga Ibraahinkaan La Hadlayaa … Magacaagu Waa Ibraahin … Miyaanad Ilaahay Waydiisan Inuu Xaqiiqada Ku Tuso … Waxa Aan Idhi: Haa, Waxa Uu Yidhi: Dhankaaga Midig Eeg, Waan Eegay, Mise Waa Koox Dhan Oo Rag Ah, Oo Alaabtoodii Iyo Agabkoodiiba Garbaha Ku Sita, Raggani Waxa Ay Xidhnaayeen Dhar Cad-Cad Iyo Cumaamado Cad-Cad, Ninki Hadalkiisii Ayuu Sii Watay Oo Waxa Uu Yidhi: Raggaas Raac, Si Aad Xaqiiqada U Ogaato, Halkaas Ayaan Hurdadii Kaga Toosay, Waxaan Dareemay Waxoogaa Farxad Ah Oo Isoo Gashay, Lakin Waxa Haddana Fallaadh Igu Taagan Igu

Noqotay Su’aasha Ah, Xagee Ayaad Ka Raadisaa Raggan Lagu Yidhi Raac Ee Aad Manaamka Ku Aragtay?.

Waxa Aan Go’aansaday In Aan Meel Dhow Iyo Meel Dheerba Ka Baadi Goobo Nimankii Aan Manaamka Ku Arkay, Waxa Aan Qorshaystay In Aanan Ka Daalin Raadintooda, Waxa Aan Niyadda U Sheegay In Riyadani Tahay Qorshe Hanuunin Ah Oo Rabbi Ii Gartay, Shaqadii Ayaan Fasax Ka Qaatay, Waxana Aan Galay Safar Baadi-Goob Ah Oo Dheer, Waxa Aan Socdaal Ku Maray Magaalooyin, Tuulooyin Iyo Dhul Miyi Ah Intaba Anoo Dadka Ka Waraysanaya Cidda Xidhata Dhar Caddaan Ah Iyo Cumaamado Cad-Cad, Markii In Muddo Ah Aan Gaaf-Wareegayay, Muslimiinta Aan Arkaana Ay Ahaayeen Kuwo Xidhan Surwaalo Iyo Koofiyado, Ayaan Dib Ugu Soo Laabtay Magaalada Johansberg, Waxa Aan Tagay Xafiiska Soo Dhawaynta Ee Gudida Muslimiinta Africa, Inankii Joogay Soo Dhawaynta Ayaan Waydiiyay Bal In Uu Garanayo Cidda Xidhata Dhar Cad-Cad Iyo Cumaamado Caddaan Ah, Waxa Aan Si Fiican Ugu Sawiray Muuqaalka Raggii Aan Riyada Ku Arkay Ee La Igu Yidhi Nimankaas Raac, Wiilkii Waxa Uu Ii Maleeyay In Aan Ahay Dawarsade (Tuugsade), Gacanta Ayuu Ii Soo Taagay, Waxa Uu Dhankayga Usoo Fidiyay Waxoogaa Shilimaan Ah, Waxaan Ku Idhi: Lacag Kumaan Waydiisane Waxa Aad Ii Sheegtaa Meel Lagu Cibaadaysto Haddii Ay Meelahan Ka Dhawdahay, Wiilkii Waxa Uu Ii Tilmaamay Masaajid Meesha Ka Dhawaa, Dhankii Masaajidka Ayaan U Dhaqaaqay, Kolkaan Masaajidkii Wax-Yar Usoo Jiro Ayaan Si Lama-Filaan Ah Indhaha Ugu Dhuftay Nin Xidhan Dharkii Aan Raadinayay Cid Xidhan, Ninku Waxa Uu Xidhnaa Dhar Caddaan Ah Iyo Cumaamad Cad, Aad Ayaan U Farxay, Waaba Noocii Aan Riyada Ku Arkay Oo Kale, Dhankiisii Ayaan Dhowr Tallaabo U Qaaday Anoo Aad Ugu Faraxsan, Markaan Soo Gaadhay Ee Aanan Wali La Hadlin, Ayuu Isagu Hadalkii Igaga Horreeyay Iguna Yidhi: Soo Dhawoow Ibraahinoow !!! Amakaag Iyo Af-Kalaqaad Ayay Igu Noqotay, Koomo Ayaan Gali Gaadhay Tacajab Awgii, Waxa Iga Yaabiyayna Waxa Uu Ahaa In Ninku Magacaygii Gartay Intii Aanan Isu Sheegin Kahor, Waliba Magaca Uu Iigu Yeedhay Waa Kii Uu Ii Bixiyay Ninkii Aan Riyada Ku Arkay, Hadalba Waa Ka Dambeeyee, Waxa Uu Haddana Intaa Ii Raaciyay: *Waxa Aan Kugu Arkay Manaam Adiga Oo Annaga Na Raadinaya, Islamarkaana Raba In Aad Xaqa Iyo Xaqiiqada Ogaato, Xaqiiqadu Waxa Ay Ku Jirtaa Diinta Uu Alle Uga Raalli Noqday Addoomihiisa Oo Ah Diinta Islaamka,* Kolkaas Ayaan Mar Labaad Waydiiyay: *Haa, Waxa Aan Raadinayay Xaqiiqada, Waxana Isoo Hagay Ninkii Nuurku Ka Baxayay Ee Aan Riyada Ku Arkay, Waxana Uu I Faray In Aan Raaco Qolo U Labbisan Sidan Aad U Labbisantahay Oo Kale, Ee Waxa Aan Ku Waydiiyay, Ma Ii Sheegi Kartaa Ninkaasi Cidda Uu Ahaa?,* Waxa Uu Ninkii Iigu Jawaabay: *Haa, Waxa Uu Ahaa Nebi Muxamed, Nebigii Islaamka, Rasuulkii Alle Naxariis Iyo Nabad-Galyo Korkiisa Ha Ahaatee.* Ma Aan Rumaysan Waxan Igu Dhacay, Lakin Inta Aan Ninkii Ku Booday Ayaan Laabta Galiyay Oo Mucaanaqeeyay, Anigoo Ku Leh: *Ma Dhabbaa Oo Rasuulkiinii Ayuu Ahaa, Oo Waxa Uu I Tusayay Diinta Xaqa Ah?,*Waxa Uu Ninki Iigu Hal-Celiyay: Haa.

Intaa Kadib Ninkii Si Fiican Ayuu Ii Soo Dhaweeyay, Waxana Uu Iigu Hambalyeeyay In Uu Ilaahay Igu Soo Hanuuniyay Ogaanshaha Xaqiiqada, Kadib Waqtigii Salaada Duhur Ayaa Soo Galay, Kolkaasuu I Fadhiisiyay Masaajidka Xagiisa Dambe, Isaguna Dadkii Ayuu Tujiyay, Intii Ay Salaada Ku Jireen Anigu Si Fiican Ayaan U Daawanayay, Qaar Badan Oo Dadka Tukanayay Kamid Ahaa Waxa Ay Xidhnaayeen Dharkiisa Oo Kale, Markaan Aad Uga Bogtay Salaadoodii, Ee Aan Arkay Iyagoo Kolna Rukuucaya Kolna Sujuudaya, Ayaan Naftayda Hoos Ugu Idhi: *Walaahi Tani Waa Diintii Xaqa Ahayd, Waayo Kutubta Samaawiga Ah Waxa Aan Ka Akhriyay In Dhamaan Nabiyadii Alle Soo Diray Ay Foodda Dhulka Saari Jireen Iyagoo Rabbi U Sujuudaya.*

Markii Ay Salaadii Dhamaysteen, Naftaydu Aadbay Ugu Raaxaysatay, Waxana Aan Ku Xasilay Wixii Aan Arkay Iyo Wixii Aan Maqlay, Mar Labaad Ayaanan Naftayda Ku Idhi: *Walaahi Ilaahay Waxa Uu Ku Tusay Diintii Xaqa Ahayd*, Balse Markiiba Waxa Ii Yeedhay Ninkii Wadaadka Ahaa Si Uu Ashahaadda Iigu Qabto, Ashahaadii Ayaan Ku Dhawaaqay, Markii Aan Halkaa Ku Islaamay Ayaan Aad U Ooyay Anigoo Ku Faraxsan In Ilaahay Igu Soo Riday Jidkii Hanuunka.

Muddo Ayaan Nimankii La Joogay, Waxa Aan La Baxay Oo Raacay Safar Muddo Nagu Qaatay Oo Aanu Dhul Badan Marnay Si Aanu Dadka Ugu Yeedhno Islaamnimada Iyo Wanaaga, Aadbaan Ugu Faraxsanaa Inaan La Socdo, Intii Aan La Socdayna Waxa Aan Ka Bartay Waxyaabo Badan Oo Wanaag Ah, Waxa Aan Ka Bartay Salaadda, Soonka, Habeen Tukadka, Ducada, Runta Iyo Amaanada, Waxa Aan Ka Bartay In Ay Muslimiintu Tahay Ummad Ilaahay Saaray Masuuliyad Ah In Ay Dadka Diinta Gaadhsiiyaan Xagga Allena Ugu Yeedhaan, Waxa Aan Ka Bartay In Aan Noqdo Diin-Fidiye Xaqa Ku Addima, Waxa Aan Ka Bartay In Aan Dadka Si Xikmadaysan Wax Ugu Sheego, Waxa Kale Oo Aan Ka Bartay Sabirka, Dulqaadka, Naf-Huridda Iyo Dabacsanaanta.

Dhawr Bilood Kadib Ayaan Dib Ugu Noqday Magaaladaydii, Waxa Aan U Tagay Ehelkaygii Iyo Asxaabtaydii Oo Igu Daalay Sidii Ay Ii Raadinayeen, Waayo Ma Ay Garanayn Meel Aan Tagay Iyo Dhinac Aan U Kacay Toona, Balse Markii Ay Igu Arkeen Anigoo Xidhan Dharkii Muslimiinta Way La Yaabeen, Wayna I Dafireen, Golahii Sare Ee Kiniisadii Aan Ka Shaqayn Jirayna Waxa Uu Iigu Yeedhay In Aan Ula Kulmo Si Degdeg Ah, Kolkii Aan La Kulmayna Waxa Ay Igu Yidhaahdeen, Waxa Aad Ka Tagtay Diintaadii, Diintii Aabayaashaa, Diintii Tolka, Waxay Intaa Walib Ii Raaciyeen: Hindidii Ayaa Ku Khiyaamaysay Oo Xaggii Diintoodii Kuu Lumisay, Markay Hadalkoodii Dhamaysteen Ayaan Ugu Jawaabay: Cid I Lumisay Iyo Cid I Duufsatay Toona Ma Jirto, Balse Waxa Manaam Iigu Yimid Nebi Muxamed Naxariis Iyo Nabadgalyo Korkiisa Ha Ahaatee, Waxana Uu I Tusay Xaqa Iyo Diinta Dhabta Ah, Waana Diinta Islaamka Ee Maaha Sidan Aad U Taqaanaan Diinta Hindida, Waxana Talo Iga Ah Oo Aan Idiinku Yeedhayaa In Aad Soo Islaamtaan Oo Runta Iyo Xaqiiqada Garataan, Kolkaasay Yaabeen Oo Hadana Fajaceen, Islamarkaana Inta Ay Dhinac Kale Iila Kaceen Igu Maslaxeen Inaan Xoolo Qaato Amma Mansab Iyo Awood La I Siiyo, Hadaladii Ay Igu Yidhaahdeena Waxa Kamid Ahaa: *Faatikaanka Ayaa Raba Inaad Lix Bilood Daganaato Rooma, Lacagtaadana Waa Laguu Qaddimayaa, Guri Cusub Iyo Gaadhi Casri Ahna Waa Lagu Siinayaa, Kiniisaduna Darajo Ayay Ku Siinaysaa Oo Waa Lagu Dallacsiinayaa*, Waxaa Ay Shubayeen Se Anigu Dheg Uma Jalaqsiine Inta Aan Ka Diiday Ayaan Ku Idhi: *Ma Markii Ilaahay I Hanuuniyay Ayaad Doonaysaan In Aad I Lumisaan … Walaahi Inaanan Idinka Yeelaynin Xataa Haddii La I Jarjarayo*, Waan Waaniyay Waxana Aan Ugu Baaqay Inay Diinta Xaqa Ah Soo Galaan, Halkiina Waxa Ku Islaamay Laba Kamid Ah Wadaadadii Kiniisadda Waana Ilaahay Mahaddii …"

Markii Ay Arkeen Sida Aan Ugu Adagay Mabda'an Iyo Diintan Cusub Ee Aan Qaatay, Ayay Igala Noqdeen Xoolihii Iyo Waxii Ay Hanti Hore I Siiyeen, Aadna Waan Ugu Farxay Arrintaas, Halkaas Ayaanan Kaga Tagay Kiniisadii Iyo Dadkeediiba..

Waa Dambe Oo Sheekh Abu-Islaam Axmed Bin Cali Uu Sheekh Ibraahim Silly Ku Arkay Magaalada Keebtown Ayuu Waydiiyay: Ibraahinow Reer Johansberg Ayaad Ahayde Maxaa Kebtown Ku Keenay? Waxana Uu Ugu Jawaabay: Waxaan Ku Wareegaa Dhamaan Gobolada Koonfur Afrika Si Aan Tolkay Naar Uga Badbaadiyo, Si Aan Mugdiga Uga Saaro Una Saaro Nuurka Iyo Iftiinka Islaamka.

“Jidkii Hanuunka“ Qisooyinkii ay Ku soo Islaameen Shakhsiyaad Adduunka Caan ka Ah Waa Buug uu Qoray Qoraa Aaden Daahir Cabdilaahi (Aaden Cade) Qaybtii 30aad

MaroodiJeex 23 July 2014 Buugan Jidka Hanuunka Ee Uu Qoray **Qoraa Aaden Daahir Cabdilaahi (Aaden Cade)** Ayaa Qoraagu Ku Soo Koobay Qisooyinkii Ay Ku Soo Islaameen Shakhsiyaad Adduuka Caan Ka Ah .

Buuga Ayaa Ka Kooban 226 Bogg Oo Qoraagu U Qeybiyey Tusmadda Buuga , Hibayn, Mahadnaq , Odhaahda Buuga Laga Yidhi, Gogol Dhig Iyo Iyo Cutubyada Buugu Ka Kooban Yahay..

Buuga Ayaa Haatan Qoraagu Daabacay Si Aad Macluumaad Dheeraad Ah Uga Hesho La Xidhiidh Qoraaga Oo Telefankiisa Gacantu Yahay **63 44 15 022 .**

© Xuquuqda Daabacaada Iyo Qoraalku Waxay Gaar U Tahay Qoraaga Buuga.

Dr. Robert Dickson Crane

(Faaruuq Cabdul-Xaq)



Dr. Robert Dickson Crane Waxa Uu Ku Dhashay Magaalada Cambridge Ee Gobolka Massachusetts26-Kii March 1929, Waxa Uu Lataliye U Ahaa Madaxweynihii Maraykanka Ee La Odhan Jiray Richard Nixon, Sidoo Kale Waxa Uu

Maareeye Ku Xigeen Dhanka Qorshaynta Ah Ka Ahaa Golaha Amniga Qaranka Ee Maraykanka (Former Deputy Director "For Planning" Of The United States National Security Council).

Dr. Robert Waxa Uu Kamid Ahaa Siyaasiyiinta Waawayn Ee Maraykanka, Waxa Uu Xeel-Dheere Caan Ah Ku Ahaa Dhinacyada Sharciga, Siyaasadda Iyo Xidhiidhada Caalamiga Ah; Waxa Uu Ahaa Aasaasihii Xarunta Horumarinta Iyo Cusboonaysiinta Ilbaxnimada Maraykan, Waxa Uu In Ka Badan Toban Buug Iyo Konton Maqaal Ka Qoray Isbarbardhigga Nidaamyada Sharciga, Istaraatiijiyadda Caalamiga Ah Iyo Maamulka Xogaha.

1945-Kii Oo Da'diisu Ahayd 16 Jir Ayuu Dr. Robert Dickson Crane Galay Jaamacadda Hardvard University Si Uu Uga Barto Luqadda Ruushka, Tallaabadana Waxa Ay Noqotay Tii Koowaad Ee Uu U Qaado Dhanka Barashada Saxaafadda Oo Uu Jeclaa, Guud Ahaana Waxa Uu Yaqaanay Lix Af (Luuqadood).

1948-Kii Waxa Uu Noqday Ninkii Koowaad Ee Maraykan Ah Ee Loo Ogolaado Inuu Wax Ka Dhigo Jaamacadaha Jarmalkii La Qabsaday (Occupied Germany), Waxa Uu Maadada **Sociology Of Religion** Ka Dhigay Jaamacadda Munikh (University Of Munich).

Dr. Robert Waxa Uu Ahaa Nin Aad Uga Soo Horjeeday Mabda'a Shuuciyadda (Unti-Communist), Taasina Waxa Ay Keentay In Lagu Xidho Mid Ka Mid Ah Jeelashii Ruushka (Joseph Stalin's Gulag Archipelago). Dr. Robert Markii Uu Dib Ugu Soo Laabtay Maraykanka Waxa Uu Shahaadada B.A Ka Diyaariyay Northwestern University, Evanston, Illinois; Sidoo Kale Waxa Uu 1956-Kii Ka Qalinjabiyay Aqoonta Siyaasadda, Qorshaynta Dhaqaalaha Iyo Barashada Ruush Nacaybka (Political Science, Economic Planning And Sino-Soviet Studies), Waxa Kale Oo Uu Shahaadada J.D Ka Diyaariyay Harvard Law School, Cambridge, Ugu Dambayntii 1959-Kii Waxa Uu Shahaadada Ma Ku Diyaariyay Isbarbardhigga Nidaamyada Sharciga Iyo Maal-Gashiga Caalamiga Ah (Comparative Legal Systems And International Investment); Ugu Dambayntii Dr. Robert Waxa Uu Jaamacadda Harvard Ka Aasaasay Joornaalka Caalamiga Ah Ee Sharciga (*Harvard International Law Journal*).

o 1962-Kii Waxa Uu Ka Qayb-Qaatay Aasaasidda Xarunta Cilmi-Baadhista Istaraatiijiyada Ee Aduunka.

o 1963 Ilaa 1968-Kii Waxa Uu Ahaa Lataliyaha Ugu Wayn Ee Madaxwayne Nickson Dhanka Siyaasadda Arrimaha Dibadda.

o 1969-Kii Waxa Uu Madaxwayne Nickson U Magacaabay Maamule Ku-Xigeenka Golaha Amniga Ummadda Ee Aqalka Cad.

o 1981-Kii Waxa Loo Magacaabay Danjiraha (Safiirka) Dawladda Maraykanka U Fadhiya Dalka Imaaraatka Carabta.

Intii Uu Ahaa Maamule Ku-Xigeenka Golaha Amniga Ummadda Ee Aqalka Cad Waxa Loo Xilsaaray In Uu Soo Koobo Warbixinno Ay Soo Ururiyeen Sirdoonka Maraykanku Oo Ku Saabsanayd Asal-Raacnimada Muslimiinta Iyo Arrimaha Islaamka Guud Ahaan, Inkastoo Warbixinnadan (Reports) Ay Diyaarisay Wakaaladda Sirdoonka Ee Maraykanku Haddana Raad Wayn Ayay Kaga Tagtay Dr. Robert Markii Uu Akhriyay Ee Uu Soo Koobayay.

1980-Kii Waxa Uu Ka Qayb-Galay Shirar Iyo Dood-Cilmiyeedyo Ku Saabsanaa Arrimaha Islaamka, Doodahaas Waxa Uu La Wadaagay Qaar Kamid Ah Hogaamiyeyaasha Fikirka Islaamiga Ah, Intaa Waxa Dheerayd, Diktoorku Waxa Uu Maalin Maalmaha Kamid Ah Dhagaystay Sheekh Muslim Ah Oo Ka Khudbadaynaya Kana Hadlaya Islaamka Iyo Fahankiisa, Maalintaa Waxa Uu Arkay Sheekhii Oo Tukanaya Islamarkaana Waxa Uu Aad Ula Yaabay Sujuuddiisa Iyo Rukuucdiisa Isaga Oo U Haystay Yasid Iyo Is-Dullayn Ku Salaysan Hoos U Dhigidda Meeqaamka Qofka Bani'aadamka Ah, Sidoo Kale Waxa Uu Magaalada Dimishiq Ee Carriga Suuriya Kula Kulmay Dr. Rooji Gaaruudi.

Ugu Dambaynna, Soo Koobiddii Warbixintii Sirdoonka Ee Loo Igmaday, Dood-Cilmiyeedyadii Uu Galay, Khudbadii Sheekha Ee Uu Dhagaystay Iyo Kulankii Uu La Yeeshay Dr. Rooti Gaaruudi Waxa Ay Keentay In Uu Dr. Robert Ku Qanco Diinta Islaamka Islamarkaana Qalbigiisu U Balaadho Nuurka Iimaanka, Halkaas Ayuu Diktoorku Kaga Soo Dhacay Jidkii Hanuunka Kolkii Ay Taariikhdu Maraysay 1980-Kii, Magaciisiina Waxa Uu U Bedelay Dr.Faaruuq Cabdil-Xaq.

Diktoorku Mar Lagu Soo Macsuumay Shirwaynihii 24^{aad} Ee Ururka Islaamka Ee Mareykanka Waqooyi Oo Socday Intii Ka Dhaxaysay 29/8/1986 Ilaa 1/9/1986 Waxa Uu Yidhi: "Way Adagtahay In Reer Galbeedka La Fahansiiyo Xaqiiqada Islaamka Sababtoo Ah Muslimiinta Ku Nool Wadamada Reer Galbeedku Kuma Dhaqmaan Si Fiicana Uma Dabbaqaan Dhaqamada Islaamka" Sidaa Darteed Waxa Uu Tilmaamay In Reer Galbeedku Aanay Fahan Sax Ka Haysan Islaamka Iyo Muslimiinta Midna, Muslimiinta Ku Noolna Kama Arkaan Dhaqamadii Islaamka Ee Wanaagsanaa Badankooda.

Qaar Ka Mid Ah Buugaagta Uu Qoray Dr. Robert:

v*Détente: Cold War Strategies In Transition*, Dulles And Crane, Csis, Praeger, 1965

v*Planning The Future Of Saudi Arabia: A Model For Achieving National Priorities*, Praeger, 1978

v*Shaping The Future: Challenge And Response*, Tapestry, 1997.

v*Meta-Law: An Islamic Policy Paradigm*, 49 Pages

v*The Grand Strategy Of Justice*, 83 Pages

v*Kosovo And Chechnya: Products Of The Past, Harbingers Of The Future*, 32 Pages

v*The Role Of Religion In America*, 24 Pages

v*The Muslim Challenge In America And The World*, 35 Pages.



Dr. Robert Dickson Crane Oo Ka Hadlaya Shir Intii Uu Islaamay Kadib